"Dhisidda Hanaan garsoor oo kasbaday kalsoonida shacabka"

Ciwaanada/Address:

Tel: +251252783560

Fax:-+251-252788135

P.O.BOX 231

srssupremecourt@gmail.com

facebook:- srssupremecourt.com

DAWLADDA DEEGAANKA SOOMAALIDDA

MAXKAMADDA GUUD

MAXKAMADDA GUUD EE DDS
የሶማሌ ክልላዊ መንግስት ጠቅላይ ፍ/ቤት
SOMALI REGIONAL STATE SUPREME COURT

AWAAMIIRTA KALA DUWAN

Daabacaadda 1aad

Maskerem 2015 T.I

DAWLADDA DEEGAANKA SOOMAALIDA

MAXKAMADDA GUUD

Maxkamadda guud ee DDS

AWAAMIIRTA ANSHAXA IYO NIDAAMKA DACWADDA GARASOOREYAASHA MAXKAMADAHA DDS.

AWAAMIIR LAMBARTA ___/2014 T.I

ARAR

Maadaama xuquuqaha iyo xoriyadaha dastuurka lagu qeexay si ku haboon loogaga midho dhalin karo oo kaliya marka ay jirto maxkamad madaxbanaan.

Maadaama garsoorayaasha la saaray waajibaadka koobaad oo ah in iyagoo aaminsan sarraynta sharciga iyo ilaalinta karaamada iyo madaxbanaanida garsoorka, ay ilaaliyaan xuquuqaha insaanka ee lagu qeexay dastuurka

Maadaama karaamada iyo madaxbanaanida garsoorkana lagu ilaalin karo oo kaliya marka garsoorayaashu habdhaqankooda shaqo iyo midda gaarahaaneedba ku muujiyaan akhlaaq sare oo ku dayasho leh iyaga oo maanka ku haya xilka lasaaray iyo jiritaanka hanaan cad oo lagula xisaabtamayo

Maadaama ay lagama maarmaantahay in lasoosaaro awaamiir sharci oo maxakamadaha deegaanku kasimanyihiin,iyada oo laga duulayo khibradihii laga helay barnaamijka dib u hindisida shaqada garsoorka.Awaamiirtaasi oo casrina ah qeexaysana waajibaadka iyo anshaxa garsooraha looga baahanyahay islamarkaasna xanbaarsan ciqaabta iyo ganaaxyada ama talaabooyinka ka dhalanaya marka lagu xadgudbo qododbada ay awaamiirtaasi xanbaarsantahay, taasi oo looga gol leeyahay in adeegbixinta garsoorku noqoto mid baaxadeedu deegaanka wada gaadhsantahay, waqti kooban iyo kharash yarna lagu heli karo iyo sidoo kale in go'aanada maxkamaduhu ay noqdaan kuwo tayo leh kuna salaysan sharciga.

Ayaa hadaba gudiga garsoorka ee DDS isaga oo kaduulaya awooda lagu siiyay qodobka***7(4)***ee bayaanka tirsigiisuyahay ***37/1994***waxa uu soo saaray Awaamiirtan.

QAYBTA 1AAD: QODOBO GUUD

1. CIWAAN GAABAN

Awaamiirtanwaxaa loogu yeedhi karaaAwaamiirta Anshaxa iyo Nidaamka Dawcadda Garsoorayaasha Maxkamadaha DDS

2. QEEXID

Hadii aanay weedha eraygu ku jiro micne kale siin- awaamiirtan dhexdeeda erayga:-

1) Gudddi " waxaa loola jeedaa gudiyada maamulka garsoorka maxkamada guud iyo maxkamada shareecada.

2) Gole'' waxaa loola jeedaa Golaha Baarlamaanka Dawladda Degaanka Soomaalida

2) Dastuur'' waxaa loola jeedaa dastuurka Jamhuuriyada Diimuqraadiga Federaalka Itoobiya iyo Kan Dawladda Deegaanka Soomaalida

3) Garsoore-Qaadi waxaa loola jeedaa qofkaste oo golaha deegaanku u ansixiyay ama u ansixin doono in uu bixiyo adeegbixin garsoor kaasi oo ka hawlgala qaabdhismeedka kaladuwan ee maxkamadaha dawladda deegaanka soomaalida.

4) Xubnaha magacaabista'' waxaa loola jeedaa masuuliyiinta xafiishoosaadyada, xirfadlayaasha geedisocodyada, Rejisteraalada, kalkaaliyayaasha garsoorka iyo kalkaaliyayaasha rejisteraalada

5) Maxkamaddwaxaa loo lajeedaa qaab dhismeedka kaladuwan ee maxkamadaha dawladda deegaanka soomaalida

3. AWOODA SOO SAARISTA

Sida ku xusan Qodobka***7 (4)*** ee bayaanka tirsigiisu yahay ***37/1994***,awooda soo saarista Awaamiirtan waxaa iska lehgudiga maamulka garsoorka ee DDS

4. XADKA DHAQANGALKA

Awaamiirtan waxaa lagu dabakhayaa garsoorayaasha maxkamadaha DDS ee uu maamulo gudiga maamulka garsoorku,waxaa kale oo awaamiirtan lagu dabaqayaa, Masuuliyiinta xafiishoosaadyada, Agaasimada, rejisterraalada, kalkaaliyayaasha rejisteraalada, kalkaaliyayaasha garsoorayaasha iyo qareenada dawlada ee gudigu magacaabo.

5. DABAKHAADA JINSIGA

Dhamaan qodobada kujira awaamiirtan ee laxidhiidha labka sidoo kalena waa lagu dabaqayaa dhediga.

6. WAAAJIBAADKA GUDDIGA

Gudiga waxaa waajib ku ah:

1. In uu wacyigalin kasiiyo garsoorayaasha iyo xirfadlayaasha magacaabista ahba awaamiirtan
2. In uu xaqiijiyo dhaqangalka awaamiirtan

QAYBTA LABAAD

HABKA SHAQO FULINTA

3. SHURUUCDA OO SI SAX AH SHAQADA LOOGU DHAQANGALIYO

Amarka iyo go'aankasta oo uu garsooruhu bixinayaayiwaa inay dhaqan galinayaanshuruucda uu dalku soo saaray, taasoo ah shaqada ugu horaysa ee garsooraha, gaar ahaan inta uuna dacwada/ garta guda galin ka horwaxaa haboon inuu xaqiijiyo inay awoodiisa tahay iyo in kale

4. ILAALINTA XUQUUQDA U SINAANSHAHA SHARCIGA EE MACAAMIISHA IYO XAQIIJINTA SAREYNTA SHARCIGA

1. Garsooruhu waa in uu ahmiyad weyn siiyo ilaalinta xaquuqul insaanka iyo sugida nidaamka cadaaladda.
2. Garsooruhu waa inuu si sinaansho leh u eego xuquuqda dhamaan dhincyada doodu kadhaxayso islamarkaana, waa in uusan ogolaanin, in hawsha garsoorka ay saamayn ku yeeshaan arrimaha laxidhiidha qoyska, diinta, qoomiyada, siyaasadda, bulshada ama xidhiidhada kale

5. KARTI IYO HUFNAAN.

1. Garsooraha waa inuu shaqada ku muujiyo dadaalka iyo kartida looga baahan yahay, walibana waa inuu ku dadaalaa sidii uu u kobcin lahaa aqoonta uu u lee yahay sharciga

6. JIITANKA FAYLASHA/DACWADAHA

Garsooruhu, waa in arrinta loo soo gudbiyay inta karaan kiisa ah si dhakhso leh u dhameeyaa Sidaa daraadeedna, ma aha in sabab aan macquul ahayn uu ku luudiyo arrinta ama kolba balan u siiyo.

7. ILAALINTA SHARAFTA IYO HAYBADA MAXKAMADA

1 Garsooruhu wakhti kasta oo uu shaqaynayo ama uu fadhiga hoggaaminayo waa inuu ilaaliyaa sharafta iyo karaamada maxkamada

2 Garsooraha waxaa kareeban in uu sabab la'aan uga tago xidhashada dharka fadhiga (jiloodka) marka uu dhagaysiga dacwada kujiro

3 Garsooraha waxaa ka mamnuuc ah in isaga oo daroogaysan uu yimaado goobta shaqada

4 garsooraha waxaa ka mamnuuc ah in uu ku dhexdagaalamo gudaha jiloodka ama xafiiska

8. WADA SHAQAYNTA BAHDA GARSOORKA

Garsooruhu waa inuu si isfahan iyo qadarin leh kula shaqeeyaa garsoorayaasha iyo shaqaahalaha kale ee Maxkamada

9. SAMIR KUDHAGAYSIGA IYO DHAMYSTIRKA DOODAHA

1. Wakhtiga geedisocodka dhagaysiga dacwadaha waa inuu garsooruhu si samir iyo dulqaad leh u dhagaystaa ugana dhamaystiraa dhamaan doodaha sharciga waafaqsan ee ay soo jeedinayaan qareenada iyo dhinacyada dacwadu kadhaxayso
2. Garsooraha waxaa looga baahanyahay in uu dhowro, bani'aadan nimda, karaamada iyo xuquuqda dhinacyada dacwadu ka dhaxayso.

10. HOGAAMINTA DOODA DHINACYADA

1. Garsooruha waxaa ka reeban in uu lamurmo dhinacyada dacwadu kadhaxayso. Waxaana waajib kasaaranyahay in su'aalaha iyo dooda dhinacyada uu uhogaamiyo qaab ay ku dheehan tahay cadaalad iyo xirfada garsoorenimo**.**
2. waa in uu qaladaadka doodayaasha saxo, kuna canaanto, marka ay muujiyaan dabeecad xun ama ay sameeyaan fal aan haboonayn ama ay kusoo diyaari garoobi waayaan mudadii loo qabtay ama ay sabab ka abuuraan geedisocodka dhexdiisa si
   Aysan doodu u joogsan, hadii loo baahdana waa inuu ka qaadaa talaabada sharci ee ku haboon**.**

11. HABKA GO'AAN BIXINTA

1. Garsooraha waxaa kareeban in uu tirtiro, masaxo, foorjariyeeyo, cadaymaha, xogta iyo dokumentiyada ama si kutalagal ah u bedello maragfurka markhaatiyada
2. Garsooruhu amarka iyo go'aanka uu bixinayaa waa in ay waafaqsanaadaan hanaanka lagu xusay hababka sharciyada, kana koobnaado nuxurka dacwada, cadaymaha lasoo bandhigay, xaalada dooda dhinacyada iyo Qodobada sharci ee loo cuskaday. Islamarkaana faahfaahiyo sababaha go'aankiisa

12. KU DHAWAAQIDA GO'AANKA DAMBIILANIMADA IYO XADEYNTA XUKUNKA

1. Garsooruhu marka uu bixinayo ga,aanka dambiilanimada ah ee dacwadaha ciqaabta laxidhiihda waa inuu si taxadar leh u miisaamo qodobka quseeya faldambiyeedka ama faldanbiyeedyada lagu soo eedeyay eedaysanaha, caddaymaha la soo gudbiyay iyo difaaca eedaysanaha
2. Garsooruhu marka uu bixinayo xukunka ciqaabta, waa in isaga oo si taxadarleh umiisaamaya xaalada uu danbiga kugaystay eedaysanahu raacayana ujeedooyinka ciqaabta iyo awaamiirta xadeynta xukunka ciqaabta iyo waliba xaaladaha culaysinta iyo khafiifinta kana duulaya mabaadiida kuxusan xeerka ciqaabta uu go'aamiyaa ciqaabta eedaysanaha.

13. KALA DUWANAANSHAHA FIKIRKA

Garsooruhu kasakow xaqa uu uleeyahay, in uu qaadan karo fikir kaduwan ayaa hadana si loo helo cadaalad degdeg ah waain uufikirkiisa/keeda gaarka ah si dhakhso leh usoo gudbiyaa/saa Waana in uusan fikirka uuqorayo/qorayso usoo jeedinin, qaab wax u dhimaya dareenka iyo sharafta asxaabtiisa shaqadaiyo tan cidkale toona

14. KAANTAROOLIDA HABKA SHAQO FULINTA SHAQAALAHA FADHIGA

1. Garsooraha mudada badan shaqeeyay waa in uu garsoorayaasha iyo shaqaalaha kalaba kacaawiyo, xogna kasiiyo anshaxa iyo dhaqanka shaqo ee larumaysanyahay
2. Garsooruhu waa inuu kaantaroolo, canaanta ku haboon iyo talana siiyo marka shaqaalaha taakulayntu ay nusqaamiyaan, dhayalsadaan ama ay shaqadooda u

Isticmaalaan danahooda gaarka ah. Hadii loo baahdana waa inuu tallaabo sharci ah ka qaado isaga oo u maraya wadada sharci.

15. KA ILAALINTADIIWAANADA MAXKAMADA ERAYO AAN HABOONAY KUWA CEEBTA AH IYO FIKIRADAHA GAARKA AH

1. Garsooruhu waan in, amarada, go'aanada, iyo qoraal kaste oo uu samaynayo ka ilaaliyaa erayada aan haboonayn ama ceebta ah hadiiba aanan cadaaladda darteed loogu baahan.

16. Xaqiijinta in si haboon loo soo gudbiyay dacwada, jawaabta dacwada iyo cabashooyinka

Garsooruhu Waa in uu xaqiijiyo in dacwada, jawaabta iyo cabashooyinka loosoo gudbiyo loo soo diyaariyay si waafaqsan hanaanka ay farayaan hababka sharcigu islamarkaasna ay kareeban yihiin erayada aan haboonayn amaaan munaasibka ahayn, hadii aanan iftiiminta cadaalada darteed loogu baahan

QAYBTA SADDEXAAD

AKHLAAQDA

17. KA FIIRSASHADA IYO TAXADAR SAMAYNTA

1. Garsooruhu waa inuu noqdaa mid Ixtaraam, Samir iyo ka fiirsasho leh shaqadiisana si taxadar leh u qabta.
2. Waa in uu gacan kagaystaa dhaqan galka aamiirtan tusaale lagu daydana unoqdaa isaga oo muujinaya dhaqan wanaag markasta oo uu hayo shaqada garsoorka.

18. ASLUUB WANAAG

1. Garsooruhu waa inuu hagaajiyo qaablabiskiisa, dabeecadiisa iyo kale, islamarkaana kafogaado kana taxadaro inuu taggo goobaha xun xun ee wax u dhimikara sharaftiisa garsooranimo.
2. Waan in uu leeyahay islamarkaana kobciyo isku kalsoonidiisa
3. Garsooraha waxaa kareeban in uu caadeysto isticmaalka mukhaaadaraadka wax u dhimi Kara shaqada, sharafta iyo karaamada garsoorenimo.
4. Garsooraha waxaa kamamnuuc ah in uu sicad gudaha xafiiska ugu dhexcaytamo.

19. KUSHAQAYNTA SHARCIGA

1. Garsooruhu marka uu shaqada garsoorka fulinayo, isagoon kafogaanaaya amaanta maalaayacniga ah, laab lakacna samaynayn, waa in uu si cabsi la,aan ah sharciga ugu shaqeeyaa.
2. Waa in uu dadaal kamuujiyaa in nidaamka maamul ee cadaalada laxidhiidha iyo guud ahaanba hanaanka dacwad qaadistu ay kusalaysan yihiin dastuurka iyo shuruucda kaleba.

20. XAKAMAYNTA AKHLAAQDA SHAQAALAHA MAXKAMADA

Garsooruhu waa in uu meesha kasaaro xidhiidhada abuuraya in ay shaqaalaha maxkamada dhexdoodu is xiniyaan sidoo kale waxaa laga filayaa inuu suurta galiyo in shaqaaluhudhowraan sharafta maxkamada iyaga oo dabacsanaan umuujinaya danlayaasha iyo makhraatiyadamaxkamada u imanaya danaha iyo arimaha kale ee muhiimka ah.

21. ILAALINTA SAACADAHA SHAQADA IYO DHAWRISTA HANTIDA DAWLADA

1. Maadaamo garsooraha laga rabo inuu dhinaca ilaalinta saacadaha shaqada tusaale ugu noqdo kuwa kale, waa inuu san sabab la,aan ama fasax la,aan uga maqnaan goobta shaqada
2. Garsooraha waxaa kareeban in uu kutagrifalo hantida dawlada ee gacantiisa ku jirta ama uu masuulka kayahay.

22. DHOWRISTA SHARCIGA

1. Garsooraha waxaa waajib kasaaranyahay in uu sharciga dhowro. Sidoo kalana kashaqeeyo in la dhowro
2. Garsooraha waxaa waajib kasaaranyahay in uu dhaqan galiyo amaradda ama go'aanada ay soo gaadhaan maxkamadaha kasareeya{maxkamadaha Racfaanka}
3. Garsoooraha waxaa kareeban in xogaha sirta ahaanu uga faa'iidaysan dano shaqsi ah
4. Garsooraha waxaa waajib ku ah in dacwad kaste oo uu dhagaysanayo ku qaado fadhi furan marka laga reebo arimaha sicad sharcigu u xeeriyay
5. Garsooraha waxaa kareeban in uu uga doodo ama wakiil uga noqdo cid kale arin kasocota maxkamada

23. ILAALINTA SIRTA SHAQADA MAXKAMADA.

1. Garsooruhu, marka lagareebo garsoorayaasha la shaqeeya waa in arrimaha horyaala ee aanan wali go,aan laga gaadhin uusan kala xaajoonin cid kale, warbaahinta uusan lawdaagin, macluumaad shaqada maxkamadaha laxidhiidha si aan haboonayn ugu baahinin baraha bulshada sida inistigraamka, tiwiiterka iyo faysbuuga, sidoo kalena aanu sitoos ah iyo sidadban toona faalo ka bixinin.

2. Garsooraha waxaa kareeban in aanu si toos ah iyo si dadban toona u bixinin arimaha sirta ah mudada uu shaqada kujiro iyo hadii uu shaqada katagaba.
3. Garsooraha waxaa kareeban in xogaha sirta ah aanu uga faaiideysan dano shaqsi ahaaneed.

24. FADHI KABIXINTA GARSOORAHA

1. Garsooraha, hadii sharcigu ka mamnuucayo dhagaysiga arrin loo soo gudbiyay waa in marka uu arrinta ogaado, isagoon sugin in cabasho laga keeno, intuu sababta sharaxo fadhiga iskaga baxaa.
2. Garsooruha hadii aanay jirin sifo sharci oo kareebaysa dhagaysiga dacwada hortaala/ loosoo gudbiyay majirto sabab kale oo uu u diidi karo in uu dhagaysto dacwada loo soo gudbiyay.

25. KAMADAXBANAANIDA LAALUUSHKA /MUSUQA

1. Garsooruhu arrin lahorkeenidoono, mid hortaala ama mid la go'aamiyay arimo laxidhiidha darteed waa in uusan danlayaasha si toos ah iyo si dadban uga qaadanin laaluush, hadiyad ama dano dhaaqaale oo kaleba.
2. garsooraha waxaa kareeban in aanu dano laaluush darteed ugu qalqaalin garsoore kale in ay wada jir laaluush u qaataan

26. KAMADAXBANAANIDA SIYAASADA

1 Garsooraha waxaa ka reeban in uu kamidnoqdo urur siyaasadeed iyo in uu u ololeeyo urur siyaasadeed ama uu galo olole doorasho isaga oo matalaya musharax ama xisbi

2 Iyada oo aan waxba loo dhimaynin xuquuqaha iyo xoriyadaha muwaadiniinta ee ku xusan dastuurka, hadana, Garsooraha waxa kareeeaban in uu faalo kabixiyo ama dhaleeceeyo dawlada iyo siyaasadeeda iasaga oo adeegsanaya baraha bulshada, wargeysyada, idaacadaha iyo wixii lamida.

3 garsooraha waxaa kareeban in uu kamidnoqdo ururada ama gudiyada qabiilka

27. KAFOGAANSHAHA ERGO KU SHAQAYNTA

1 garsooraha waxaa waajib kasaaranyahay in uu dhowro balanqaadkiisaislamarkaana kamadaxbanaanaado madmadow iyo musuqmaasuq.sidoo kale waxaa kareeban in uusan ergo kushaqaynin ama isagu uusan ergo noqonin.

3 Garsooraha waxaa kareeban in uu dadweynaha talo bixin kasiiyo dacwadaha kasocda maxkamadaha ama uu u diyaariyo asbaabta ama jawaabta asbaabta marka laga reebo dadka ehelkiisa ah ee lagu xusay qodobka 58aad ee HXMI

28. U ADEEGSIGA AWOODA GARSOORANIMO DANO GAAR AHAANEED

Garsooruhu si uu u helo dano gaar ah ama qof kale in uu helo uga faa'iideeyo waa inuusan awoodiisa iyo karaamadiisa u adeegsan hub ahaan

29. ISKU DHACA SHAQADA GARSOORKA IYO DANAHA GAARKA AH

Garsooraha waxaa kareebanin uusan qabanin shaqooyinka aan joogtada ahayn hadii ay tahay mid kahor iminaysa amaaanay iswaafaqaynin shaqada garsoorenimo ama karaamada garsoorka

Sidoo kalena garsooraha lagama filayo in uu labo shaqo dawladeed oo joogto ah hal mar kawada hawlgalo.

QAYBTA 4AAD

HABKA RAACA SOO GUDBINTA GEEDISOCODKA IYO GO'AAMINTA DACWADAHA LAXIDHIIDHA ANSHAXA

30. Qaabka loo soo gudbiyo dacwada anshaxa

1. Qofka kasta oo ku andacoonayo in lagu xadgudbay anshaxa wanaaga laga doonayo xirfada garsooranimo ayaa dacwad soo gudbisankara
2. Xubin kasta oo gudiga kamid ah ayaa soo gudbinkara dacawad anshaxa isaga oo soo dhaweynaya cadeynteeda
3. Guddiga marka uu hayo sabab kufilan ah wuxuu amri karaa in garsoore kasta lagu oogo dacwad anshaxa ah.

31. HABKA SOO GUDBINTA DACWADAHA ANSHAXA

1. Arrinta lagu sheegay 29/1 /2 iyada oo ay sideed tahay, waa in soo gudbiyaha cabashada uu dacwada qoraal ku soo diyaariyo cadaymahana ku soo lifaaqo, haday jiraancadaymo qof sadexaad uu hayana waa in uu qoraalka kudhex sheego.
2. Qofkas oo ku andacoonaya in garsoore katirsanmaxkamada guud ee DDS oo ku xadgudbay habka shaqo fulineed ama anshax wanaga la xidhiidha xirfada garsooranimo waxuu cabashada u soo gudbiyaa gudoomiyaha maxkamada, gudoomiyahuna waxuu cabashadaas u gudbinayaa xafiiska maamulka garsoorka.
3. Qofkasta oo ku andacoonaya in garsoore katirsan maxkamadaha sare ee goballada DDS oo ku xadgudbay habka shaqo fulineed ama anshax wanaga la xidhiidha xirfada garsooranimo waxuu cabashada u soo gudbiyaa gudoomiyaha maxkamada sare ee gobalkaas, gudoomiyahuna waxuu cabashadaas u gudbinayaa xafiiska maamulka garsoorka
4. Qofkasta oo ku andacoonaya in garsoore katirsan maxkamadaha degmooyinka DDS oo ku xadgudbay habka shaqo fulineed ama anshax wanaga la xidhiidha xirfada garsooranimo waxuu cabashadaas u soo gudbinayaa gudoomiyaha maxkamada dagmadaas, gudoomiyahuna waxuu cabashadaas u gudbinayaa xafiiska maamulka garsoorka
5. qofkastaoo ku andacoonaya in garsoore katirsan maxkamada darajada koowaad ee maamul magaalooyinka DDS oo ku xadgudbay habka shaqo fulineed ama anshax wanaga la xidhiidha xirfada garsooranimo waxuu cabashada u soo gudbiyaa gudoomiyaha maxkamadaas, gudoomiyahuna waxuu cabashadaas u gudbinayaa xafiiska maamulka garsoorka
6. Qofkasta oo ku andacoonaya in garsoore katirsan maxkamada racfaanka ee maamul magaalooyinka DDS oo ku xadgudbay habka shaqo fulineed ama anshax wanaga la xidhiidha xirfada garsooranimo waxuu cabashada u soo gudbiyaa gudoomiyaha maxkamadaaas, gudoomiyahuna waxuu cabashadaas u gudbinayaa xafiiska maamulka garsoorka
7. iyada xaaladaha sare lagu sheegay ee qodobka 30{6} ay sidoodayihiin, dacwad kasta oo la xidhiidha in lagu xadgudbay habka shaqo fulineed ama anshax wanaga xirfada garsooranimo waxaa si toos ah loogu gudbinkaraa xafiiska maamulka garsoorka
8. Qofkaste oo ku andacoonaya in gudoomiyaha maxkamada sare ama gudoomiyaha maxkamada degmadu ama gudoomiyayaasha maxkamadaha maamul magaalooyinku ku xadgudbeen habka shaqo fulineed ama anshax wanaga la xidhiidha xirfada garsooranimo waxa uu cabashadiisa u gudbinayaa Gudoomiyaha , gudoomiye ku xigeenka ama xafiiska maamulka garsoorka. Kolba maxkamada ay tazhay shareeco iyo dastuuri.s

32. MUDADA LAGU DACWOON KARO

1. Laga bilaabo maalinta la ogaaday in falku dhacay danbiyada fudud ee laxidhiidha anshaxa waxaa lagu dacwoon karaa mudo 3 bilood gudahood ahsidoo kale danbiyada dhexe iyo kuwa culusna waxaa lagu dacwoon karaa mudo lix bilood gudahood ah.

2. Sinaba wax dacwad anshax ah lasoo oogi maayo hadii ay 2sano kasoo wareegto maalinta uu falka laga dacweenayo ee anshax xumada ahi uu dhacay.

33. MUDADA LOO BAAHANYAHAY IN GO'AAN LAGAGA GAADHO ARIMAHA ANSHAXA

1 Arinkasta oo anshax xumo laxidhiidha waa in laga bilaabo maalinta gudiga ay soo gaadho mudo sadex bilood gudaheed ah go'aan ku heshaa

2Mudada ku xusan qodobhoosaadka 1aad ee qodobkan hadii lagu xalinwaayo arinta anshax xumada waxaa looqaadan in aanay jirin ficil anshax xumo oo lasameeyay, arintuna halkaas ayay ku hadhaysaa

3 Iyada oo ay sideeda tahay arinta lagu qeexay qodob hoosaadka 2aad ee qodobkan, marka uu garsooraha lasoo dacweeyay aanu jawaabta ama difaaciisa keenin waqtigii loo baahnaa ama uu siyaabo kale sabab ugu noqdo dib udhaca arrintan mudada kuxusan qodobhoosaadka 2aad ee qodobkani malaha wax dhaqan gala

4Hadii soo dhaweeyihii cabashadu uu wax cadayn ah u keeni waayo cabashadiisa waxaa lagu qaadi talaabooyinka anshax marinta ee kuxusan qodobka 481 ee HXMI.

34. GEEDISOCODKADAWCAD EEGISTA GUDIGA.

a) Gudigu hadii uu aamino in baadhitaan lagu sameeyo dacwada anshaxa ee loo soo gudbiyay, wuxuu gudigu usaari xubno gudi hoosaad ah oo arintaa soo baadha inta laga aas aasayo waaxda baadhista go'aanada iyo shaqada garsoorka.
b) Hadii uu gudigu dacwada macquul u arki waayo waxuu dhinacii soo gudbiyay ku ogaysiinayaa qoraal ahaan.
c) Hadii uu gudigu dacwadii loo soo gudbiyay macquul u arko waxuu la dacweeyaha ku amri in jawaabta iyo cadeymaha uu usoo gudbiyo gudiga.
d) Kadib marka gudigu uu baadho dacwada iyo jawaabta loosoo gudbiyay waxa uu qaban mudo si arinta loo dhagaysto isaga oo eegaya hadba xaaladu sidaytahay waxa uuna dhinacyada ogeysiin mudada dhagaysiga loo cayimay
e) Hadii ladacweeyuhu kusoo dhawaan waayo yeedhista loo geeyay, waxaa arinta ladhagaysan isaga oo maqan. Kadib marka laxaqiijiyo in yeedhitaanka si habsami leh loo gaadhsiiyay
f) Gudi hoosaadkii loo saaray soo baadhista arinta kadib marka ay baadhista soo dhamaystiraan waxay natiijada baadhistooda oo qoraal ah usoo gudbinayaa gudiga garsoorka.
g) Guddiga garsoorku kadib markuu baadho ayuu go,aan kakuhaboon kasoo saari.

35. SHAQO KA JOOJIN

a. Garsooraha laga soo gudbiyay dacwad ku saabsan inuu sameeyay qalad anshax oo culus, ilaa arrintiisa laga soo hubinayo, go'aan Kama dambays ahna laga siinayo ama lahor gaynayo golaha, guddiga ayaa wuxuu amri karaa in shaqada laga sii joojiyo.
b. Shaqo ka joojintu waa in aysan ka badnaanin mudo lix bilood ah
c. Haddii garsooraha shaqada laga joojiyay uu dacwada lagu soo oogay xor ka noqdo, shaqadaii laga joojiyay waa loo fasaxayaa.

36. XILKA IYO WAAJIBAADKA GUDDIHOOSAADKA:-

a. Marka uu guddiga maamulka garsoorku amro:
1. Waxaa la suurogelin in la dacweeyaha la gaadhsiiyo arjiga iyo caddeynta dacwada, sidoo kalena waxaa la guddoomi la dacweeyaha jawaabtiisa qoraalka ah iyo caddeyntiisaba.

2. Waxaa la suurogelin in qofkasta oo arrinta sharixi karaayi uu soo dhawaado ama uu soo gudbiyo dukumentiga gacantiisa ku jira ee arrinta la xidhiidha.
3. Waxaa la suurto-gelin in la keeno diiwaanada iyo G/socodyada maxkamadda ee arrinta la xidhiidha si loo baadho.

b. Waxaa si hagaagsan loo xafidayaa dokementiyada iyo diiwaanada baadhista lagu sameeyey, marka guddiga maamulka garsoorku amrana waa loo dhawaynayaa.
c. Waxaa warbixinta baadhista oo qoraal iyo talo-bixinba loo gudbinayaa guddiga maamulka garsoorka, marka faahfaahin looga baahdana uu sharaxaad ka bixinayaa.

d. Waxay guddiga baadhistu ka taxadari dhawrista sirta arrintaasi loo xilsaaray haddii aanay guddiga maamulka garsoorku fasixin shaacinteeda.

37. NOOCYADA CIQAABTA

Marka la xaqiijiyo in ladacweeyuhuuu galay fal anshax daro sida ay dhigayso awaamiirtan, ayaa waxaa lagu qaadi ciqaabaha hoos kucad midkood ama isku darka laba ciqaabood iyo wixii kabadan iyada oo laga duulayo hadba culayska falka

a. Digniin afka ah
b. Digniin qoraal ah
c. Ganaax mushaar oo 3 bilood gaadhaya
d. In darajada iyo mushaarka hoo looga dhigo
e. In shaqada laga sii joojiyo golahana loo dhaweeyo

38. CADAYNTA SHAQO KATAGISTA IYO KHIBRADA

1. Garsooraha dacwada anshaxa laga soo gudbiyay, hadii iskii shaqada uu uga tagayo intaan go,aan la siinin, warqad shaqo ka tagida lama siinayo
2. Garsooraha lagu helay dambi anshaxa hadii uu soo waydiisto in caddayn shaqo katagis ah la siiyo. Dhamaan ciqaabihiilamariyay ayaa lagu xusayaa cadaynta, marka lagareebo digniinta afka.

QAYBTA SHANAAD

ANSHAX MARINTA IYO CIQAABAHA

39. QODOB GUUD

1. Garsoore kaste oo ku xadgudba qodobada anshax ee kor ku xusan waxaa lagu ciqaabi laguna qaadi talaabo anshax marineed sida ay dhigayso awaamiirtan.
2. Iyada oo ujeedada ciqaabta iyo anshax marinta ay tahay in garsooraha lagu saxo ama shaqada lagaga caydhiyo hadii danbigu yahay mid culus, ayaa ciqaabaha waxaa lookala soocayaa iyada oo laga duulayo noocyada iyo heerarka danbiga.
3. Talaabo kaste oo laxidhiidha anshax marinta garsoorku kuma xadgudbayso in sharciga loo raaco arimaha xasaalada iyo dhawrsanaantiisa laxidhiidha.

40. DANBIYADA FUDUD

1. Waa iyada oo lagu xad gudbo arimaha lagu sheegay qodobka 6aad (1) (2) ee awaamiirtan
2. Waa iyada oo lagu xadgudbo arimaha lagu qeexay qodobada 4aad, 7aad iyo 9aad ee awaamiirtan.
3. waa iyada oo lagu xadgudbo arimaha lagu qeexay qodobka iyo 12aad ee awaamiirtan
4. Waa iyada oo lagu xadgudbo arimaha lagu qeexay qodobada 13aad, 14aad iyo 15aad ee awaamiirtan.
5. Waa iyada oo lagu xadgudbo arimaha lagu qeexay qodobada 16aad iyo 17aad ee awaamiirtan.
6. Waa iyada oo lagu xadgudbo arimaha lagu qeexay qodobada 18aad iyo 19aad ee awaamiirtan

Sidaa daraadeed garsoorahaas ciqaabtiisu waxay noqonaysaa sida soo socota:-

{A} Digniin af ah marka uu garsooruhu danbiga galo markii ugu horaysay. Haduu mar labaad galo mid qoraal ah oo loo galiyo faylkiisa shaqsi ahaaneed.

{B} Hadii uu garsoorruhu danbiga soo celceliyana ciqaabtiisu waxay u gudbaysaa heerka danbiyada dhexe ee lagu xusay qodobka 39 ee awaamiirtan

41. DANBIYADA DHEXE

1. Waa iyada oo lagu xadgudbo arimaha lagu qeexay qodobka 28aad ee awaamiirtan.

2. Waa iyada oo lagu xadgudbo arimaha lagu qeexay qodobka 20aad ee awaamiirtan.
3. Waa iyada oo lagu xadgudbo arimaha lagu qeexay qodob ka 12aad ee awaamiirtan.
4. Waa iyada oo lagu xadgudbo arimaha lagu qeexay qodobka 8aad ee awaamiirtan
5. Waa iyada oo lagu xad gudbo arimaha lagu qeeaxy qodobka 26aad (2) ee awaamiirtan
6. Waa iyada oo lagu xadgudbo arimaha lagu qeexay qodobka 3aad ee awaamiirtan
7. Waa iyada oo lagu xadgudbo arimaha lagu qeexay qodobada 2aad iyo 5aad ee awaamiirtan
7. waa iyada oo lagu xad gudbo arimaha lagu qeexay qodobka 6aad (3) ee awaamiirtan
8. waa iyada oo lagu xad gudbay arimaha lagu qeexay qodobka 21aad (4) ee awaamiirtan)

Sidaa daraadeed garsoorahaas ciqaabtiisu waxay noqonaysaa sida soo socota:-

{A} waxaa la ganaaxi sadex meeloodoow meel mushahaarkiisa mudo aan kabadnayn afar bilood

{B} waxaa laga soo celin haday jirto hanti dawladeed ama lacag dadweyne oo uu si sharci darro ah ku qaatay

{C}waxaa hal darajo hoos loo dhigi darajadiisa shaqo hadii uu danbiga kucelceliyana waxa ciqaabtiisa ama ganaaxiisu uu u guurayaa dabiyadaculus ee lagu qeexay qodobka 41aad ee awaaamiirtan

41 DANBIYADA CULUS

1. Waa iyada oo lagu xadgudbo arimaha lagu qeexay qodobka 24aad ee awaamiirtan.
2. Waa iyada oo lagu xadgudbo arimaha lagu qeexay qodobka 25aad ee awaamiirtan
3. Waa iyada oo lagu xadgudbo arimaha lagu qeexay qodobada 26aad iyo 27aad ee awaamiirtan
4. Waa iyada oo lagu xadgudbo arimaha lagu qeexay qodobada 22aad iyo 23aad ee awaamiirtan.
5. Waa iyada oo lagu xadgudbo arimaha lagu qeexay qodobada 2aad iyo 21aad (1) (2) & (5) ee awaamiirtan.
6. Waa iyada oo lagu xad gudbay arimaha lagu qaeexay qodobada 10aad iyo 11aad ee awaamiirtan
7. Waa iyada oo lagu xadgudbo arimaha lagu qeexay qodobka 6aad (4) ee awaamiirtan.

Sidaasi daraadeed garsooraha ciqaabtiisu waxay noqonaysa sidan soo socota

A) In shaqada laga lagasii joojiyo
B) Sidoo kalena laga soo celiyo wixii hanti dawladeed ah iyo mid shacaba ah ee Gacantiisa kujira

8. Ciqaabta sare lagu xeeriyayKama reebayso in garsooraha lagu helay in uu galay faldanbiyeed lagu xeeriyay xeerka ciqaabta ee dalka in maxkamad la horgeeyo iyada oo loo marayo wadada sharciga.

QAYBBTA LIXAAD

QODOBO KALADUWAN

42. ILAALINTA SIRTA

1. In guddiga uu ogalaado mooye, arrin kasta oo dacwad anshaxa laxidhiidha oo gudiga hortaala geedi socodkeeduna socdo, waa in sirteeda la ilaaliyo.
2. In guddiga mamnuuco mooyee, arrinta la go,aamiyay dhowristeeda laguma qasbana

43. FAYLKAGARSOORAHA OO LAGU XIDHO GO' AANKA CIQAABTA

1. Go,aanka ciqaabta ee gudiga ayaa waxaa lagu xidhayaa faylka garsooraha
2. Hadii go,aanka la bixiyay uu yahay shaqo ka caydhin, waxaa go,aanka faylka garsooraha lagu xidhi karaa oo kaliya marka ay soo ansixiyaan golaha wakiilada shacabka ee DDS
3. Arrimaha anshaxa ah ee aan la go,aaminina ama garsooraha lagu waayay laguma xidhikaro faylka garsooraha

44. CODSIGA KA LAALISTAGO' AANKA CIQAABTA

1. Ciqaabta la saaray garsooraha hadii aysan ahayn shaqo ka caydhin, wuxuu guddiga u soo gudbisan karaa codsi ah in laga laalo go,aanka ciqaabta
2. Guddiga waxuu garsooraha kaga laali karaa go'aan ka ciqaabta arimaha soo socda:

a. Hadii ciqaabtu ay tahay mid kadhalatay danbiyada anshaxa ee culus waxaa laali karaa ugu yaraan marka la soo dhaafo 5 sano hadii ciqaabtu ay tahay mid kadhalatay danbiyada anshax ee dhexe ama fududna 2 sano ka dib
b. Waana in mudadaas gudaheeda garsooraha lamariyayciqaabtu uu muujiyo anshax wanaaga, islamarkaana qabtay shaqo ku dayasho muddan.

3. Marka guddiga uu go'aamiyo inuu laalo go' aanka ciqaabta, waxaa loo qaadanayaa inaan eedaysanaha la ciqaabin oo kale.
4. Sida ku xusan qodobka 43aad ee awaamiirtan, go,aanka uu guddigu bixiyay faylka ayaa lagu xidhayaa

45 UJUURADA ADEEGA

Wax ujuura ah laga qaadimaayo dacwad qaadista cabashooyinka laxidhiidha
Anshaxa

46. SHURUUCDA AAN DHAQAN GALKA LAHAYN

1 Waxaa halkan lagu nasakhay awaamiirttii hore ee laxidhiidhay anshaxa garsooreyaasha ee tirsigeedu yahay No 1/2002
2 Sharci iyohabdhaqan kaste oo kahor imanaya arimaha lagu xusay awaamiirtan gudihiisa malaha wax dhaqan gal sharciya

47 CABASHOOYINKA AAN WALI LA GO'AAMIN

Cabashooyinka la soo oogay awaamiirtan kahor, islamarkaasina geedissocodka ku jiraWaxaa lagu dhamaystiri iyada oo laraacayo sharcigii hore

48. WAXKABEDELKA AWAAMIIRTAN

Awaamiirtan waxaa wax lagaga badali karaa marka ay xubnaha gudigiyadu sadex meeloodow laba meelood u codayso wax kabedelkiisa

49 DHAQANGALKA AWAAMIIRTAN

Awaamiirtani waxaydhaqangalayasaa marka gudiga maamulka garsoorku ansixiyo, gudoomiyaha maxkamadaguudna saxeexo

DAWLADDA DEEGAANKA SOOMAALIDA

MAXKAMADDA GUUD EE

Maxkamadda guud ee DDS

AWAAMIIRTA DHEXDHEXAADINTA AY MAXKAMADDU HOGGAAMISO

AWAAMIIR LAMBARTA ___2015T.I.

TUSMADA **BOGGA**

ARAR 18

QAYBTA KOOWAAD 19

QODOBO GUUD 19

1. CIWAAN GAABAN 19

2. MIC'NAHA ERAYGA: 19

3. XADKA DHAQAN GALKA. 19

QAYBTA LABAAD 20

TIIRARKA DHEXDHEXAADINTA 20

4. SUURTO-GALINTA IN DHINACYADA IYO MACAAMIISHU IN ARRIMAHOODA AY KA GOÁAN GAADHAAN 20

5. DHEXDHEXAADNIMO 20

6. SINNAANSHO 20

7. ILAALINTA SIRTA 21

8. KARTTI XIRFADEED 21

9. XIL ISKA SAARID 21

10. ILAALINTA TAYADA GEEDDISOCODKA DHEXDHEXAADINTA 21

QAYBTA SADDEXAAD 22

HABRAACA GEEDDI-SOCODKA DHEXDHEXAADINTA 22

11. SOO DHAWEYNTA DHINACYADA/DANLAYAASHA 22

12. ARRIMAHA MADANIGA EE AAN LAGU DHAMEYN KARIN DHEXDHEXAADINTA MAXKAMADDA KU SIDKAN 22

13. U ASTEYNTA ARIMAHA MADANIGA EE LAGU DHAMAYNAYO DHEXDHEXAADINTA MAXKAMADDA KU SIDKAN 22

14. HABRAACA HOGAAMINTA GEEDI SOCODKA DHEXDHEXAADINTA MAXKAMADA KU SIDKAN. 23

15. GEEDISOCDKA DHEXDHEXAADINTA MAALINTA LOO CAYIMAY 24

16. JOOJINTA GEEDDISOCODKA DHEXDHEXAADINTA 24

17. WAREEJINTA GEEDDI-SOCODKA DHEXDHEXAADINTA 25

18. SAAMAYNTA KA DHALATA MAQNAANSHAHA DHINACYADA EE MAALINTA BALLANTA 25

19. XARRUMAHA DHEXDHEXAADINTA 25

20. FOOMKA HESHIISKA DHEXDHEXAADINTA 26

QAYBTA AFRAAD 26

QAAB-DHISMEEDKA IYO SHAQAALAHA HAY'ADEED EE DHEXDHEXAADINTA MAXKAMADDU HOGGAAMISO 26

21. XAFIISKA ARRIMAHA DHEXDHEXAADINTA 26

22. ISKUDUWAHA ARRIMAHA DHEXDHEXAADINTA AY MAXKAMADDU HOGGAAMISO 26

23. XARUNTA DHEXDHEXAADINTA AY MAXKAMADDU HOGGAAMISO 27

24. SARKAALKA ADEEGGA DHEXDHEXAADINTA 27

25. WAAJIBAADKA XOG-HAYAHAARRIMAHA DHEXDHEXAADINTA AY MAXKAMMADDU HOGGAAMISO 27

QAYBTA SHANAAD 28

DHEXDHEXAADIYEYAASHA 28

26. DHEXDHEXAADIYEYAASHA 28

27. LIISKA DIWAANKA DHEXDHEXAADIYEYAASHA 28
28. TIRADA DHEXDHEXAADIYEYAASHA DACWADDIBA QAADAYA 28
29. AWOODDA IYO WAAJIBAADKA DHEXDHEXAADIYAHA 28
30. ADEEGA DHEXDHEXAADINTA BILAASHKA AH 29
31. XUQUUQDA GUNNADA IYO KHARASHADKA 29
32. IS-DIWAANGELINTA IYO HABKA KHARASH BIXINTA SANNADLAHA AH 29
33. WAAJIBAADKA HORUMARINTA NIDAAMKA DHEXDHEXAADINTA 30
34. WAAJIBKA DIYAARINTA DUKUMENTIGA HESHIISKA EE HABKA RASMIGA AH 30
35. XIDHIIDHKA UU DHEXDHEXAADIYUHU LA YEELANAYO MACAAMIISHA 30
36. WAAJIBAADKA ILAALINTA RABITAANKA XORTA AH EE MACAAMIISHA 30
QAYBTA LIXAAD 30
GUDDIGA ARRIMAHA DHEXDHEXAADINTA AY MAXKAMADDU HOGGAAMISO 30
37. Aas-aaska guddiga arrimaha dhexdhexaadinta ay maxkamaddu hoggaamiso 30
38. XUBNAHA GUDDIGA DHEXDHEXAADINTA AY MAXKAMADDU HOGGAAMISO 30
39. AWOODAHA IYO WAAJIBAADKA GUDDIGA 31
40. NIDAAMKA KAAL-FADHIGA GUDDIGA 31
QAYBTA TODDOBAAD 32
NIDAAMKA ANSHAXA IYO CIQAABTA 32
41. NIDAAMKA ANSHAXA 32
42. KHALADAADKA ANSHAXA FUDUD EE DHEXDHEXAADIYAHA 32
43. KHALADAADKA ANSHAXA CULUS EE DHEXDHEXAADIYAHA 32
44. TALLAABOOYINKA CIQAABTA 32
45. MAS'UULIYADDA FAL-DEMBIYEEDKA 33
QAYBTA SIDDEEDAAD 33
UJUURADA DHEXDHEXAADIYEYAASHA 33
46. UJUURADA DHEXDHEXAADIYAHA 33
47. ARRIMAHA LA XIDHIIDHA UJUURADA DHEXDHEXAADIYAHA 33
48. HABKA UJUURO BIXINTA 34
49. MABDA'A LACAG BIXINTA 34
QAYBTA SAGAALAAD 34
QODOBADA GUUD 34
50. SAXIIXA XAQIIJINTA 34
51. WAX KA BEDDELKA HAB-RAACA 34
52. QODOBADA KALAGUURKA 35
53. MUDDADA DHAQANGALKA 35
LIFAAQA KOOWAAD: 35
LIFAAQA LABAAD: 35

ARAR

Maadaama oo ay tahay in lagu xisaabtamo islamarkaana maanka lagu hayo arrimaha khilaafyada ay dhinacyadu is-kuhayaan ee khuseeya arimaha madanigu ku dhamayntooda nidaamka dhexdhexaadintu uu ahmiyad ay u leedahay is af-garadka dhinacyada iyo dhismaha nidaamka caddaaladeed. Iyada oo ay waliba suurto galinayso in uu xidhiidhkii wanaagsanaa ee ka dhexeeyay dhinacyadu uu sii socdo iyo waliba fursad u siinta in isla dhinacayadu ay khilaafkooda xalintiisa ka qayb-qaataan

Maadaama oo ay tahay in arrimaha qaarkood dhexdhexaadin lagu dhameeyo, iyada oo laga duulayo codsiga/rabitaanka dhinacyadu ay tahay mid suurto galinaysa fidinta nidaam cadaaladeed oo degdegsiinyo leh, si loo yareeyo arimaha keenaya jiitanka dacwadaha ee ka dhasha Faylasha is dul fuulaya darteed,

Maadaama ay lagama maarmaan tahay in la bayaamiyo Nidaamka anshax, iyo tiirarka habdhaqan ee ay raacayaan dhexdhexaadiyayaashu si, iyaga oo fahmaya xuquuqdooda iyo waajibaadkooda, ay hawlaha dhexdhexaadinta u wadaan si karti iyo tayo leh.

Maadaama oo bayaanka tirsigiisuyahay 206/2013T.I lagu aasaasay guddi caawiya baadhitaanada arrimaha anshax dhexdhexaadiyaasha ku hawlan dhexdhexaadinta ay maxkamaddu hogaamiso sida ku cad qodobka tirsigiisu yahay 42 farqadiisa (7) ee isla bayaanka sare ku cad ayaa waxaa lagama maarmaan ah in faah-faahintan xilka iyo waajibaadka guddiga, qaab-dhismeedkooda, iyo xaddigooda mas'uuliyadeedba la bayaamiyo.

Ayaa iyada oo laga duulayo awoodda lagu siiyay bayaanka aasaaska maxkamadaha Dawlad Deegaanka soomaalida ee tirsigiisu yahay 206/2013 qodobkiisa 42 faqradiisa (7) waxaa labayaamiyay awaamiirtan oo loogu yeedho awaamiirta dhexdhexaadinta ay maxkamaddu hogaamiso.

QAYBTA KOOWAAD: QODOBO GUUD

1. CIWAAN GAABAN

Awaamiirtan waxaa loogu yeedhi karaa awaamiirta dhexdhexaadinta ay maxkamaddu hoigaamiso ee maxkamadaha DDS ee tirsigeedu yahay-------2015T.I

2. MIC'NAHA ERAYGA:

Awaamiirtan dhexdeeda haddii ereygu weedha uu ku jiro aanu micno kale siinin, awaamiirtan dhexdheeda waxaa loola jeeda sidan:

1 **Dhexdhexaadinta ay maxkamaddu hogaamiso**: Waxaa loola jeedaa iyada oo ay maxkamadda guud iskudubaride katahay dhamman hawlaha dhexdhexaadinta ee laga agaasimo lagana fuliyo maxkamadaha heer degmo, heer gobol, iyo heer deegaan.

1. **Guddi,** waxaa loola jeedaa, guddiga latalinata ee lagu aasaasay awaamiirtan dhexdeeda iyo waliba bayaanka aasaaska maxkamadaha DDS ee tisigiisu yahay 206/2013 qodobkiisa 42aad farqada (7)
2. **Is-kuduwaha dhexdhexaadinta ay maxkamaddu hogaamiso**:- waxaa loola jeeda agaasinka u qaabilsan arrimaha dhexdhexaadinta heerarka kal duwan ee maxkamadaha;
3. **Dhexdhexaadiye;-** waxaa loola jeeda khabiirka haysta aqoonsi maxkamadeed kaasi oo khilaafka iyo Isfahan la'áanta u dhexeeya dhinacyada ku dhameeya wada hadashiin iyo dhexdhexaadin isaga oo kala soocaya nuxurada layskuhayo faahfaahinaya, islamarkaana suurto galinaya sidii ay dhinacyadu khilaafkooda wada hadashiin ku dhamayastiri lahaayeen;
4. **Xoghayaha dhexdhexaadinta:-** waxaa loola jeeda shaqaalaha maxkamadda kaas oo qabta geeddisocodyada shaqo ee ku saabsan arrimaha dhexdhexaadinta dhexdeeda la xidhiidha sida qoraalada iyo habaynta faylasha;
5. **Qoraalka dhexdhexaadinta:-** waxaa loola jeeda dhexdhexaadiyaha dartii arimaha ay dhinacyada ishayaayi ka gorgortaman kuna heshiiyeen, islamarkaana ah goáankii ka soo baxay wada xaajoodka kaas oo lagu heshiiyay lana saxeexay;
6. **Garsoore:-** waa garsooraha katirsan maxkamadaha degmooyinka, maamul magaalooyinka, maxkamadaha sare iyo maxkamadda guud kaas oo eegaya arimaha galdacwadeedka dhexhdhexaadinta loo asteeyay.
7. **Macmiil/danle;-** waa arinta loo asteeyay dhexdhexaadinta macmiilka xaq iyo xuquuq ku leh, kaas oo noqon kara dacwoodihii dacwadda soo dhaweeyay ama dacweysanihii dacwadda loogu yeedhay ama geeddi socodka qofka soo dhaxgalenimo kaga soo qayb-galay;
8. **Geeddisocodka dhexdhexaadinta;-** waa xadka mudo uu dhexeeya marka ay dhinacyadu dhexdhexaadiyaha doortaan, muddada dhexdhexaadintana cayimaan, dhexdhexaadiyuhuna laga bilaabo xiliga uu shaqada bilaabay ilaa inta uu dhinacyada ka ogaysiinayo in uu shaqadii dhameeyay.
9. **Xarrunta dhexdhexaadinta:-**waxaa loola jeeda goobta ay maxkamadaha heerarkooda kala duwani u diyaariyaan shaqada dhexdhexaadinta:-
10. **Danta guud:-** waxaa loola jeeda danaha ku saabsan cabashooyinka/suáalaha islamarkaana laxidhiidha adeeg-bixinta uu fulinayo xafiisyada dawladda, kaas oo bixiya adeeg bixinta dawliga;
11. Awaamiirtan dhexdeeda arrimaha lagu sheego jinsiga labku sidoo kalena waxaa loo adeegsanaya jinsiga dheddiga ah;

3. XADKA DHAQAN GALKA.

1. Awaamiirtani waxay dhaqan gal ku tahay arimaha sida tooska ah u yimaada maxkamadaha Dawladda deegaanka soomaalida ee wali aan la dhagaysan, islamarkaana la xidhiidha arimaha madaniga. Hase ahaate, qof kasta oo kamid ah dhinacyada is haya haddii uu danaynayo in arintiisa dhexdhexaadin lagu dhameeyo codsiga dhexdhexaadinta waa uu soo guidbisan karaa heer kaste oo uu geeddisocodku marayo.

2. Awaamiirtani waxa kale oo ay dhaqan-gal ku tahay qaab-dhismeedka dhexdhexaadinta dhexdiisa, agaasinka, ofisarada, dhexdhexaadiyayaasha iyo shaqaalaha kale ee maxkamadaha ee ka hawlgala shaqada dhexdhexaadinta.

QAYBTA LABAAD

TIIRARKA DHEXDHEXAADINTA

4. SUURTO-GALINTA IN DHINACYADA IYO MACAAMIISHU IN ARRIMAHOODA AY KA GOÁAN GAADHAAN

1. Arrimaha dhexdhexaadinta waxaa la hir-galin karaa oo kaliya marka ay dhinacyadu/macaamiishu ay wada-xaajodka dhexdhexaadinta raali ka ahaan-shahooda ka dhiibtaan.
2. Dhexdhexaadiyaha waxa ay masuuliyada ka saarantahay in ta aanu guda galin hawsha dhexdhexaadinta kahor in uu raali ahaanshaha dhinacyada qoraal kaga sugo.
3. Dhexdhexaadiyuhun isaga oo raacaya habraaca dhexdhexaadinta iyo xirfada dhexdhexaadintaba ayaa waxa uu fuliyaa hawlaha suuryto galinaya in ay dhinacyadu heshiiyaan
4. Dhexdhexaadiyuhu inta aanu shaqada dhexdhexaadinta bilaabin kahor waxa uu dhinacyada ogeysiini in awooda goáan gaadhista ay iyagu leeyihiin islamarkaasina aaanya awoodiisu kabadnayn ama xadigiisa awoodeed uu ku koobanyahay oo kaliya in uu dhinacyada u abuuro beyad wanaagsan oo ay ku heshiiyaaan ‘
5. Dhexdhexaadiyuhu sikasteba ha ahaatee si kabaxsan rabitaanka macaamiisha/dhinacyada goáan iskii ah uma qaadan karo dhionacyadana kuma qasbi karo.
6. Dhexdhexaadiyuhu waa in uu ka digtoonaado, in uu goáan bixiyo iyo in uu balanqaado in dhexdhexaadinta ay ka soo baxayaan natiijooyin kala duwan.
7. Dhexdhexaadiyaha mamnuuc kama aha in uu fikradaha lagama maarmaanka u ah hawsha dhexdhexaadinta ah dhinacyada ku kabo isaga oo dhinacyada fasax kaqaadanaya

5. DHEXDHEXAADNIMO

1. Dhexdhexaadiyuhu waxa uu hawsha dhexdhexaadinta u gudanaya isaga oo aan dhinacyada u kala eexanin ama anaan u joojinaynin culays dhinac sadexaad sidookalena dhexdhexaad ka ah hawsha dhexdhexaadinta.
2. dhexdhexaadiyuhu waa in uu ka fogaado hawl kasta oo tuhun ku abuuri karta dhexdhexaadnimadiisa;
3. dhexdhexaadiyuhu inta aanu hawsha dhexdhexaadinta galin kahor waa in uu xaqiijiyo in aanaya dhinacyada ama midka mid ah dhinacyada ka dhaxaynin wax dane dhaqqle ah, qaraabo nimo , isku dhac, nacaybsho ama jiritaanka arimo kale oo dhexdhexaadinimadiisa mugdi galinkara. Sidookalena hadii ay jiraan isku dhac dano dhaqaale waa in aanu galin hawsha dhexdhaxaadinta;
4. Iyada oo la ogyahay in ay jiraan isku dhac dano dhaqaale oo ka dhexeeya dhexdhexaadiyaha iyo dhinacyada ama mid ka mida dhinacyada, haddii ay hadana dhinacyadu ay ku heshiiyaan inuu isla dhexdhexadiyahaasi hawsha dhexdhexaadinta in uu galo hawsha ka sokow, waa in uu xataa geeddisocodka dhexdhexaadinta ka fogaado;

6. SINNAANSHO

1. dhexdhexaadiyuhu inta aanu hawsha dhexdhexaadinta bilaabin kahor, amaba geedi socodka dhexdiisaba waxa uu waajib ka saaran yahay in uu dhinacyada simo ama uu si sinaansho leh ula dhaqmaa;
2. dhexdhexaadiyuhu waa in uu ka fogaado arrimaha muujin kara inuu mid kamaid ah dhinacyada uu kala dhawaysanayo ama mudnaansiinayo;

7. ILAALINTA SIRTA

1. Dhexdhexaadiyaha waxa uu waajib ka saran yahay inuu xogaha kala duwan ee uu geeddisocodka dhexdiisa ku helo qoraal ahaan, weedh ahaa ama caddayn muujin ahaanba uu dhawro.
2. Dhexdhexaadiyuhu geeddisocodka dhexdhexaadinta dhexdeeda hawlaha ay dhinacyadu isku waydaarsadaan, ama kaga wada xaajodan ama ay dhinaca saddexaadi fuliyaan oo aan dhexdhexaadinta qayb ka hayn lama wadaagi karo;
3. Dhexdhexaadiyuhu geeddisocdka dhexdhexaadinta dhexdiisa macluumaadyada uu ka helo dhinacyada ama uu si gooniya ula wadaago hal dhinac, iyada oo aanu dhinicii macluumaadkaasi siiyay u fasixin ama aanu ogayn lama wadaagi karo dhinaca kale sidadban iyo si toos ah toona;
4. iyada oo arinta lagu sheegay qodobkan qodobhoosaadkiisa 1-3 ay sideeda tahay ayaa hadana dhexdhexaadiyuhu marka ay jiraan arimahan soo socda, macluumaadka uu helay xiligii geedisocodka dhexdhexaadinta wuu soo bandhigi karaa
    B. iyada oo aan la sheaacinaynin magacyada dhinacyada ayaa macluumaadkaasi waa uu u bixin karaa arimo baadhitaan ama daraasadeed darted;
    T. Haddii sheegid la'aanta macluumaadkaasi ay waxyeelo u yeelanayso, danta guud, mid shaqsi ahaaneed, ama hantiba.
    J. Marka ay dhexdhexaadiyaha saran tahay masuuliyada ah in uu cida ay khusayso warbixion qoraal ah ama hadal gunaanad ay talo bixini la socoto kasooo jeediyo;
    X. Marka ay danlayaashu/dhinacyadu raali kayihiin;
    K. haddii uu jiro sharci kale oo qasbaya in macluumaad kaasi la sheego;

8. KARTTI XIRFADEED

1. Dhexdhexaadiyee kasta waa in uu leeyahay khibrad gaamurtay iyo karti la xidhiidha hawsha dhexdhexaadinta. Sidoo kalena dhexdhexaadiyaha ay ka muuqato karti yaraan dhanka hawsha dhexdhexaadinta la xidhiidha waxaa laga filayaa in uu geedi socoka dhexdhexaadinta ka tanaasulo waqti kaste/xili kaste
2. Dhexdhexaadiye kasta waxaa waajib ka saran yahay in aqoonta iyo xirfaiisa dhexdhexcaadinta la xidhiidha uu kobciyo isga oo tababaro arintaasi waafaqsan qaadanaya.

9. XIL ISKA SAARID

1. Dhexdhexaadiyaha loo doortay hawsha dhexdhexaadinta, waa inuu hawsha dhexdhexaadinta uu isagu qabtaa, isla markaana waa in aanu cid kale u wakiilan.
2. Dhexdhexaadiyuhu waxaa waajib ka saran yahay inuu hawsha dhexdhexaadinta uu qabto si ka go'naansho leh, kalsooni, iyo dadaal.
3. Dhexdhexaadiyuhu waa inuu geeddi-socodka dhexdhexaadinta markuu ku jiro suurto geliyo in ay dhinacyadu is dhegaystaan, isna ixtiraamaan, sidaasna ay ku dhaqan geliyaan anshaxa dhexdhexaadinta. Sidoo kalena, xilliga ay dhinacyadu hadlayaan, waa inuu siiyo waqti ku filan, si aamusnaan lehna u dhegaystaa.
4. Dhexdhexaadiyuhu hawsha dhexdhexaadinta inta aanu bilaabin ka hor, waa inuu xaqiijiyaa inuu haysto waqti ku filan, isla markaana wuu sameeyey diyaar-garow ku habboon. Sidoo kalena, saacadda iyo maalinta loo cayimay hawsha dhexdhexaadinta waa inuu xaadir ahaadaa.

10. ILAALINTA TAYADA GEEDDISOCODKA DHEXDHEXAADINTA

1. Dhexdhexaadiyuhu waxaa laga filayaa inta aanu bilaabin geedisocodka dhexdhexaadinta ama marka uu bilaabayo geedisocodka dhexdhexaadinta, inuu tixgelin wayn siiyo sidii ay dhinacyadu ku ogaan lahaayeen hannaanka dhexdhexaadinta iyo geedisocodka ay isku daba-yaalaan.
2. Dhexdhexaadiyuhu waxaa laga filayaa in uu leeyahay xirfadda iyo kartida suurto-galinaysa in hawsha dhexdhexaadintu loo wadao si tayao leh.

3. Laga bilaabo maalinta dacwadaas loo asteeyey in lagu dhameeyo dhexdhexaadin, waa in 30-cisho gudohood lagu dhameyaa hawsha dhexdhexaadinta. Si kastba ha ahaatee, haddii ay jirto sabab macquul ah, waxaa la sii jiidi karaa/dari karaa muddo aan ka badnayn 20 cisho.

QAYBTA SADDEXAAD

HABRAACA GEEDDI-SOCODKA DHEXDHEXAADINTA

11. SOO DHAWEYNTA DHINACYADA/DANLAYAASHA

1. Geeddi-socodka gorgortanka ee Dhexdhexaadinta Maxkamadda ku sidkan, ka soo qayb-galayaasheedu waa isla dhinacyada danlayaasha ah.
2. Dhinacyadu/Danlayaashu way ka soo qayb-gali karaan iyaga oo uu qareenkoodu uu la socdo. Si kastaba ha ahaatee, doorka qareenada ee geeddisocodka dhexdhexaadintu isaga oo ah mid xaddidan, ayaa waxa ay hadli karaan oo kaliya marka geedisocodku dhamaado, ee uu dhexdhexaaduhu u fasaxo.
3. Iyada oo ay sideedaa tahay arrinta lagu sheegay qodob-hoosaadka 1aad ee qodobkan, ayaa haddana dhinacyadu/danlayaashu haddii aanay goob joog ahayn geeddisocodka dhexdhexaadinka maxkamadda ku sidkan isla markaana ay door bidaan in la matalo, waxaa iman kara wakiiladooda sharci ee ay u doorteen inay hawsha u dhameeyaan, iyaga oo siinaya caddeyn wakiilasho oo khaas ah.

12. ARRIMAHA MADANIGA EE AAN LAGU DHAMEYN KARIN DHEXDHEXAADINTA MAXKAMADDA KU SIDKAN

1. Iyada oo ay sideedaa tahay arrimaha lagu sheegay qodobka 13aad ee Awaamiirtan, ayaa arrimahan soo socda waxa ay noqonayaan Arrimaha Madaniga ee aan lagu dhameyn karin Dhexdhexaadinta Maxkamadda ku sidkan:
2. Arrimaha la xidhiidha Dacwadaha ka yimaadda sharciga khasaaraha
3. Arrimaha ay Dawladdu dacwoode ama dacwaysane ka tahay. Si kastaba ha ahaatee haddii dhinac ka mid ah dhinacyada/danlayaasha uu yahay ururada horumarinta ee dawliga ah ama dhamaantood ay yihiin hay'adaha Dawliga ah way ka qayb-gali karaan wada xaajoodka geeddisocodka dhexdhexaadinta.
4. Iyada oo hayád dawladeed dacwoode ahaan ama dacweysane ahaan aanay dhinac ugaba ahayn yaa hadana hadii ay arintuntahay mid khusaysa danta guud, ama la ogaado in arintu ay tahay mid dawaldu in ay soo dhaxgasho ay qasabtahay;
5. Haddii uu garsooruhu aamino in arintu ay tahay mid ku dgaysa oo kaliya goáan maxkamadeed;
6. Haddii xalka heshiisiinta iyo natiijada xalka horey heshiis looga gaadhay lagu dhamayn mayo nidaamka dhexdhexaadinta;

13. U ASTEYNTA ARIMAHA MADANIGA EE LAGU DHAMAYNAYO DHEXDHEXAADINTA MAXKAMADDA KU SIDKAN

1. maxkamadaha heer degmo, heer maamul magaalo iyo heer gobol arimaha sida tooska ah loogu keeno ee khusaeya arimahan soo socda ee madaniga waa ijn si waafaqsan habka xeerka madaniga itoobiya inta aan lagudo galin dhagaysiga dacwada ka hor loo gudbiyaa in lagu dhameeyo geedi socodka dhexdhexadinta maxkamada ku sidkan;
    B) Arimaha shaqaalaha iyo loo shaqeeyaha
    T) Arimaha ganacsiga xidhiidhka la leh
    J) Arimaha dhismaha xidhiidhka la leh
    X) Arimaha qoyska

KH) Arimaha dhaxalka

D) Arimaha la xidhiidha masuuliyada ka dhalata heshiishka iyo kuwa ka baxsan heshiishka;

2. iyada oo arinta lagu sheegay qodob hoosaadka koowaad ee qwodobkani ay sideeda tahay ayaa hada garsooraha maxkamadaha DDS ee heer degmo, maamul magaalo iyo heer gobol dacwada khusaysa arimaha madaniga ah ee sida tooska ah loogu keenay in ta aanu goáan ka soo saarin ka hor xaaladaha ku haboon waxa uu garsoorahasi arinta gacanta ku hayaayi u wareejin karaa habka geedi socdka dhexdhexaadinta maxkamada ku sidkan;

b. Heshiiska dhinacyada

t. Haddii garsooraha loo gudbiyay arintu uu aamino in ay arintu ku haboon tahay in dhexdhexaadinta maxkamada ku sidkan lagu eego.

14. HABRAACA HOGAAMINTA GEEDI SOCODKA DHEXDHEXAADINTA MAXKAMADA KU SIDKAN.

Iyada oo laga duulayo qodobka 13aad ee awamiirtan qodobhoosaadkiisa 1aad ayaa arimaha loo soo gudbiyo maxkamadaha ee khusseeya dhexdhexaadinta waxaa lagu qasban yahay in loo raaco habraacyadan soo socda;

1. haddii ay arintu tahay mid mudan in laga bixiyo ujuurada garsoorka, marka ujuurada lagamamaarmaanka ah laga bixiyo dacwadana loom soo diyaariyo siwaafaqsan habka xeerka madaniga sidoo kalena ay maxkamadu iyada oo raacaysa qodobka 231 ee HXMI ay dacwada baadho, lana amro in dacweysanuhu jawaabta keeno sidookalena uu dacweysanuhu jawaabta soo dhaweeyo. Ayaa dhinacyadu inta ay geedi socodka dhexdhexaadinta u baydhaan waxaa la siin balanta la xidhiidha maalinta loo csayimay dhagaysiga dacwadooda;
2. iyada oo laga duulayo arinta lagu sheegay qodob hoosaadka koowaad ee qodobka dhinaca ay soo gaadho yeedhistu waa in maalinta loo cayimay dhagaysiga isaga oo diyaargarawga ku haboona sameynaya uu yimaada xarunta dhexdhexadinta;
3. marka ay arintu soo gaadho xarunta dhexdhexaadinta inta aan lagaadhin maalinta balanta kahor waa in uu sargaalka dhexdhexaadintu liiska dhexdhexaadiyayasha u gudbiyaa dhinacyada si ay hal dhexdhexaadiye uga doortaan haseyeeshee hadii ay dhinacyadu/danlayaashu ay ku guulaysan waayaan in ay dhexdhexaadiye doortaan agaasinka waaxda dhexdhexaadinta ayaa liiska dhex dhexaadiyayaasha ama cida ay hawshan maxkamadu ushaqaalaysiisay uga dhexdooran kuna meelayn;
4. hadii uu agaasimuhu uu jawaabta si cad uga dhex garto in ay qirasho jirto =iyada oo aanan loo baahnayn in dhexdhexaadiye lagu meeleeyo ayaa inta uu arinta sicad dhinacyada ugu sheego siwaafaqsan HXMI si looga bixiyo amarka ama goáanka ku haboon waxa uu arinta ku celin garsooraha;
5. Arrintu inta ay geedisocoka dhexdhexaadinta ku jirto ama heshiiska wali aanay maxkamadu ansixinin hadii uu dhinac sadexaad soo dhaxgal soo dhawaysto inta geedi socodka dhexdhexadinta la joojiyo ayaa lagu celin geedi socoka rasmiga ah ee maxkamada:; iyada oo ay arintaasi sideeda tahay ayaa hadana hadii arinta soo dhexgalka ay maxkamadu buriso/diido islamarkaasna ay jirtay arin hore oo dhexdhexaadinta loogu heshiiyay waxaa maxkamada laga codsan karaa in ay heshiiskaasi ansixiso;
6. Dhexdhexaadiyuhu isaga oo maalinta koowaad ee balanta soo xaadiraya ayuu hirgalinayaa/fulinayaa hawlaha dhexdhexaadinta:: waxaana hawlaha dhexdhexaadinta dhaqan gal ku ah waajibaadyada ku xusan qodbka 15aad ee awaamiirtan geedisocodka dhexdhexaadinta;

15. GEEDISOCDKA DHEXDHEXAADINTA MAALINTA LOO CAYIMAY

Geeddisocodka dhexdhexaadinta maalinta loo cayimay, iyaga oo dhinacyadu/danlayaashu kazoo baxaya/ilaalinaya marka ay soo xaadiraan. Dhexdhexaadiyuhu waxa uu hirgalin qodobadan/arimahan soo socda sida ay ukala horeeyaa:: iyada oo ay arintu sidaasi tahay hadana dhexdhexaadiyaha kama reebana in uu miciinsado tiirarka iyo xirfada dhexdhexaadinimo;

b. Marka ay dhexdhexaadiyaha, dhinacyada/danlayaasha iyo xoghayuhu goobahooda/meesha loogu talogalay ay kala fadhiistaan dhexdhexaadiyuhu isaga oo shaqsi ahaantiisa dhinacyada isbaraya ayuu nuxurka arinta u cadayni/sharixi dhinacyada;
t. Dhexdhexaadiyuhu marka uu dhinacyada nuxurka arinta sharaxo waxa uu dhinacyada/danlayaasha siinwaqti kufilan oo ay figradahooga ku soo bandhigaan isaguna qodobada muhiimka ah wuxuu ku diwaan gashan diwaankiisa:: marka ay dhinacyadu hawraartooda soo jeedinayaana waxa uu siin waqti siman oo ay ku hadlaan;
j. Dhexdhexaadiyuhu waa in xaalad kaste oo jirta hadana dhinacyada siiyaa waqti ku filan in ay dhinacyadu/danlayaashu fikiradooda ku soo bandhigaan, sidookalena ku dhagaystaa si degenaansho leh;
x. Dhexdhexaadiyuhu xiliga wada hadalka furan dhexdeeda hadii ay ku heshiin waayaan kali, kali, waa uu ula kulmi karaa;
k. dhexdhexaadiyuhu dooda iyo wada xaajoodka kadib hadii heshiis lagu guulaysan waayo arimaha laysku fahmiwaayay ee la xidhiidha sharciga ama arimaha kale ee ahmiyada leh nuxur ahaan ayuu ugu diwaangalin karaa;
l. Dhexdhexaadiyuhu waxa uu xil iska saari hawsha dhexdhexaadinta isaga oo habraaca lagama maarka u ah hawsha/ku haboona raacaya;
r. Dhexdhexaadiyuhu hinacyada/danlayaasha ama wakiiladoodu qormada heeshiiska ee qabyada ah ee ay soo diyaariyaan waxa uu fursad u siin in ay soo saxaan soona hagaajiyaansi uu u noqdo mid xanbaarsan qodobada heshiisk:: sidookalena diyaarinta qormada heshiiska wa in loo raaco foomka lagu sheegay qodobka 20aad ee awaamiirtan;
s. arinta loo asteeyayin dhexdhexaad in lagu dhameeyo , marka ay dhexdhexaadin ku dhamaato , inta qoraalka heshiiska la soo diyaariyo labada dhinacna laga sexeexo sidooklaena warqad soo diris ahna uu kulifaaqo agaasinka dhexdhexaadintu ayaa loo gudbin maxkamada ay khusayso si ay u ansixiso si waafaqsan bayaaanka aasaaska maxkamadaha dawlad deegaanka soomaalida ee tisigiisu yahay 206/2013 qodobka 42aad (3);

Sh. Haddi ay suurtagal noqon waydo in is-afgarad heshiis la gaadho, iskuduwuhu waxa uu warbixin u gudbinaya maxkamadda dacwadda eegaysa.

2. Kadib dukumeentiga heshiiska marka ay maxkamaddu ansixiso, waxaa loo fullinaya si lamida habka go'aanada kale ee maxkamadda fulliyo iyadoo la xareynayo codsiga fulinta.
3. Haddii dukumentiga heshiiska ee ay ansixisay maxkamaddu uu wax udhimayo xuquuqda ama danaha dhinacyada saddexaad, ama dhinaca ay khusayso, islamarkaana dhinaca ay xuquuqdooda ama danahooda waxyeelowday waxay ka dalban karaan maxkamadda in dukumentiga heshiiska ee la ansixiyay ay maxkamaddu ka buriso ama hadba xaaladu siday tahay waxay dib u furan karaan dacwadda sida uu dhigayo qodobka 358 ee Habka xeerka madaniga
4. Si loo dhaqan geliyo faqrada 1^{aad} ee qodobkan, Guddiga La-talinta arrimaha dhexdhexaadinta ay maxkamaddu hoggaamiso waxay soo saarayan buug-tilmaameedka nidaamka arrimaha dhexdhexaadinta.

16. JOOJINTA GEEDDISOCODKA DHEXDHEXAADINTA

Dhexdhexaadiyuhu ma joojin karo geeddisocodka dhexdhexaadinta, marka laga reebo xaaladahan soo socda:

1. Marka uu xaqiijo in macaamiishu ama dhinac saddexaad ay u adeegsanayan geeddi-socodka dhexdhexaadinta nidaam ay ku fulliyaan fal dembiyeed ama ay ku qarinayaan.
2. Marka mid ka mida dhinacyada ama labada dhinacba ay abuuraan khilaaf, islamarkaan ay wada xaajodkooda uu u arko mid aan marnaba suurtogal ahayn in hawlahooda heshiiska ay is-afgarad dhexdhexaadnimo ah ku dhameeyaan.
3. Haddii uu dhexdhexaadiyuhu ama macmiilku xanuunsado inta lagu jiro hawsha geeddi-socodka dhexdhexaadinta ama ay soo wajahdo dhibaato gaar ahaaned oo ka madax-banaan.
4. Marka dhinacyada mid ka mida ama labaduba ay dhexdhexaadiyaha qoraal ahaan ugusoo gudbiyaan si u joojiyo hawsha geeddi-socodka dhexdhexaadinta. Taas oo isla wakhti xaadirka lagu beddalayo dhexdhexaadiye kale muddo 3 maalmood oo maalmaha shaqo gudahood si uu usii wado geeddisocodka dhexdhexaadinta.

17. WAREEJINTA GEEDDI-SOCODKA DHEXDHEXAADINTA

Geedhisocodka dhexdhexaadinta dib loogama dhigi karo maalinta loogu talogalay marka laga reebo xaaladahan soo socda.

1. Haddii ayna labada dhinac go'aansan in maalin kale laga dhigo wada-xaajodka
2. Haddii dhexdhexaadiyuhu uu go'aansado in hab-dhaqanka dhinacyada ama shaqa-maalmeedka dhexdhexaadiyuhu ay saamayn karto nidaamka dhexdhgexaadinta;
3. Haddii labada dhinac midkood ama labada dhinacba ay awoodi waayaan inay dhamaystiraan geeddi-socodkii dhexdhexaadinta sababo la xidhiidha awood ka madax bannaan.

18. SAAMAYNTA KA DHALATA MAQNAANSHAHA DHINACYADA EE MAALINTA BALLANTA

1. Haddii dhinac ka mida dhicyadu iman waayo maalinta ballanta ee ugu horreysa geeddisocodka dhexdhexaadinta ama haddii uu iman waayo eedaysanuhu islamarkaana dacwoodaha oo yimaaday, wuxuu dhexdhexaadiyuhu sidaas uu warbixinta oo qoraala u diyaariyay iyo faylkaba ku celinaya fadhi-jilootka dhexdhexaadinta.
2. Haddii dacwooduhu yimaado ballanta koowaad islamarkaana uu eedaysanuhu iman waayo, isagoo xaqiijinaya in ay waraaqdi yeedhistu gaadhay iyo in kale, wuxuu diyaarinaya warbixin uu sidaas uu ku sheegayo, islamarkaana wuxuu kusoo celinaya galdacwadeedka fadhi-jilootka. Haddii sababta eedaysanuhu uu usoo xaadiri waayay ay tahay waraaqdi yeedhista oo aan gaadhin awgeed, waxa uu dibu dhigi karaa hawsha dhexdhexaadinta isaga oo siinaya ballan kale.
3. Marka geeddisocodka dhexdhexaadinta uu dibu-dhac ku yimaado sababo la xidhiidha soo xaadirid la'aanta hal dhinac ama labada dhinacba ah, iyadoo lagu salaynayo sida ku qeexan qodobka 42 farqada (7) ee bayaanka aasaaska maxkamadaha DDS ee tirsigisu yahay 206/2013 waxa ay maxkamaddu sii wadaysa geeddisocodka dhexdhexaadinta dhinacyada, kadib marka ay bixiyaan dhinacyada hadhayi 1000 birr oo ganaax ah. Hase-ahaate, arrintan laguma dabaqayo dacwadaha madaniga ah qaarkood ee lagu dhageysto maqnaanshaha dhinacyada.

19. XARRUMAHA DHEXDHEXAADINTA

1. Geeddisocodka dhexdhexaadinta waxaa lagu fullinaya xarrumaha dhexdhexaadinta ee laga aasaasayo fadhi-jilootyada maxkamadaha dawladda deegaanka soomaalida.
2. Iyadoo ay sideeda tahay arrinta lagu xusay farqada (1) ee qodobkan, haddana guddiga arrimaha dhexdhexaadintu wuxuu ku qaban karaa meel ka baxsan xarrumaha maxkamadaha ka dhex aasaasan.

20. FOOMKA HESHIISKA DHEXDHEXAADINTA

Foomka heshiiska dhexdhexaadinta waxaa diyaarinaya dhexdhexaadiyaha, islamarkaana waxaa loo akhriyaya dhinacyada ama ay akhriyayaan nuqulka heshiiska kadibna ay saxeexayan dhinacyadu. Nuqulkas heshiisku ugu yaraan wuxuu ka koobnaanaya qodobadan soo socda;

1. **Hordhac**: - Taariikhda, magacda dhinacyada, ciwaanada iyo Nuxur kooban oo qeexaya nooca dacwadda iyo qodobada kale la xidhiidha;
2. Asalka dacwadda oo kooban;
3. Nuxurka qodobada heshiiska dhinacyada oo kooban;
4. Arrimaha lagu dabaqayo heshiiska: waa in uu waafaqsan yahay nidaamka xukunka iyo qorista go'aanada ee uu dhigayo Habka Xeerka Madanigu.

QAYBTA AFRAAD

QAAB-DHISMEEDKA IYO SHAQAALAHA HAY'ADEED EE DHEXDHEXAADINTA MAXKAMADDU HOGGAAMISO

21. XAFIISKA ARRIMAHA DHEXDHEXAADINTA

1. Maxkamadda Guud ee dawladda deegaanka soomaalidu waxay aasaasi doonta xafiiska Iskuduwidda arrimaha dhexdhexaadinta ay maxkamaddu hoggaamiso;
2. Maxkamadaha sare ee gobolada iyo Maxkamadaha degmooyinku waxay qabanqaabinayan Xafiiska Iskuduwidda arrimaha dhexdhexaadinta ay maxkamaddu hoggaamiso. Islamarkaana Xafiisyadan Iskuduwidda arrimaha dhexdhexaadinta ay maxkamaddu hoggaamiso ee laga aasaasi doonno maxkamadaha sare ee gobolada iyo degmooyinku waxaa la xisaabtankooda mas'uuliyadeed yeelanaya guddoomiyayaasha maxkamadaha ay ka dhex aasaasan yihin iyo xafiiska iskuduwaha maxkamadda guud ee DDS.
3. Xafiisyada arrimaha dhexdhexaadinta ay maxkamaddu hoggaamiso waa in ay yeeshan iskuduwaha xafiiska iyo shaqaalaha taageerada u gaarka ah hadba sida loogu baahdo.
4. Iskudiweyaasha xafiiska arrimaha dhexdhexaadinta ay maxkamaddu hoggaamiso ee lagu aasaasay si waafaqsan faqradda 1-2aad ee qodobkan waxa ay hawlahooda shaqo u gudanayaan si habsami leh.

22. ISKUDUWAHA ARRIMAHA DHEXDHEXAADINTA AY MAXKAMADDU HOGGAAMISO

1. Qofka iskuduwaha loo shaqaalaysiinayo waa in uu ahaado xirfadle haysta ugu yaraan shaahaadada digriiga (degree) ama shahaadada dhibloomada islamarkaana leh khibrad waayo-aragnimo oo ugu yaraan shan sanno ah, taas oo uu kusoo shaqeeyay xirfadda sharciga, islamarkaana qaatay tababaro la xidhiidha arrimaha dhexdhexaadinta.
2. Iskuduwaha arrimaha dhexdhexaadinta ay maxkamaddu hoggaamiso wuxuu yeelanaya waajibaadyadan shaqoo ee soo socoda;
    b. Wuxuu sameeya daraasadyada iyo baadhista dib-u-habaynta;
    T. Gudashada hawlaha shaqo ee la xidhiidha dhexdhexaadinta, xaalada lasocodka lacagaha diwaanada dhexdhexaadiyeyaasha iyo gudashada waajibaadyada kale la xiriira;
    J. Wacyi-gelinta bulshada ee ku saabsan arrimaha geeddisocodka;
    X. Wuxuu guddiga la talinta arrimaha dhexdhexaadinta ay maxkamaddu hoggamiso usoo bandhiga shuruucda wax ka bedalka ubaahan, isagoo marka hore kala saaraya;

    Kh. Wuxuu soo agaasimaha shirarka Guddida arrimaha dhexdhexaadinta ay maxkamaddu hoggaamiso;

D. Wuxuu hoggaamiya geeddisocodyada heshiisiinta kala duwan ee lagu qabto fadhi jilootyada, islamarkaana wuu ku dabagala;

R. Wuxuu diyaariya qorshayaasha sannadlaha ah, miisaaniyada iyo warbixinnada arrimmaha dhexdhexaadinta ay maxkamaddu hoggaamiso, islamarkaana wuxuu usoo jeediya hoggaaminta maxkamadd;

S. Wuxuu diyaariya tababarada, bandhigyada aqoon-isweydaarsiga iyo siminaarada;

23. XARUNTA DHEXDHEXAADINTA AY MAXKAMADDU HOGGAAMISO

1 Maxkamadaha sare ee gobolada iyo degmooyinku waxay yeelanayaan xarumaha fadhi jilootka madaniga ah ee loogu talo-galay geeddisocodyada arrimaha dhexdhexaadinta;
2 Fadhi jilootyada ku yaala xarumaha adeeg-bixinta dhexdhexaadinta ay maxkamaddu hoggaamiso waa inay lahaadaan xirfadlaha adeeg-bixinta, sarkaalka adeegga hawlaha iyo karaaniga hawlaha heshiisiinta.

24. SARKAALKA ADEEGGA DHEXDHEXAADINTA

Sarkaalka adeega dhexdhexaadinta ee ka hawl-gala maxkamad kasta, ugu horayn waxaa waajib ku ah in uu la socodsiiyo macaamiisha iyo daneeyayaasha dhammaantod shuruudahan soo socda:

1. In uu sharaxida ka siiyo, muhiimada, ujeeddada, faa'iidooyinka uu leyahay khilaafka oo is-afgarad lagu xaliyo, iyo nidaamka dhexdhexaadinta oo lagu dhameeyo;
2. Inuu usheego dhinacyadu in ay iskood uga wada xaajon karaan arrimaha heshiiska ama ay wakiiladooda gaarka ahi ka wada xaajon karaan;
3. Isla marka lagu heshiiyo in khilaafka heshiis isafgarad lagu dhammeeyo, In sarkaalku uu ku wareejiyo nuqulada lagama-maarmaanka ah, dhexdhexaadiyaha ay maxkamaddu ku meelaysay;
4. Xaqiijinta faylasha diwaanada ee la furay in ay yihiin kuwo ka madax-banaan faylasha diwaanada kale ee caadiga ah, islamarkaana isagoo kala saaraya oo habaynaya arrimaha la xaliyay iyo kuwa aan la xalinin, waa in uu si joogto ah warbixinta ula socodsiiya isku-duwaha arrimaha dhexdhexaadinta ay maxkamaddu hoggaaminay``

25. WAAJIBAADKA XOG-HAYAHAARRIMAHA DHEXDHEXAADINTA AY MAXKAMMADDU HOGGAAMISO

Xog-hayaha arrimaha dhexdhexaadinta ay maxkammaddu hoggaamiso wuxuu yeelanayaa waajibaadka soo socda;

1. Furitaanka iyo habaynta faylasha arrimaha dhexdhexaadinta ay maxkamaddu hoggaamiso;
2. Isaga oo la kaashanaya iskuduwaha xarrunta, wuxuu danneeyayaasha/macaamiisha siiyaa liiska dhexdhexaadiyeyaasha si ay uga doortan dhexdhexaadiyaha ay rabbaan;
3. Wuxuu isku xidha dhexdhexaadiyaha iyo macaamiisha islamarkaana ballan u qabanaya;
4. Wuxuu si gaara u uruuriyaa, islamarkaana u habeeyaa diiwaanada dhexdhexaadinta ay maxkamaddu hoggaaminayso;
5. Wuxuu warbixinada toddobaadlaha ah ee arrimaha maamulka ku saabsan u soo gudbinaya iskuduwaha arrimaha dhexdhexaadinta ay maxkamaddu hoggaamiso;
6. Wuxuu fulliya awaamiirta ku saabsan hawlaha heshiisiinta ee garsooruhu ku amro;
7. Diyaarinta iyo samaynta goobta ay ka dhacayso arrimaha dhexdhexaadinta oo jawi degen leh;

QAYBTA SHANAAD
DHEXDHEXAADIYEYAASHA
26. DHEXDHEXAADIYEYAASHA

Waxaa dhexdhexaadiye loogu yeedhaya islamarkaana fullinaya hawlaha dhexdhexaadinta ay maxkamaddu hoggaamiso kuwan soo socda;

1. Cidda buuxisa shuruudaha jagada dhexdhexaadiyenimo islamarkaana loo magacaabay in uu ka shaqeeyo arrimaha dhexdhexaadinta ay maxkamaddu hoggaamiso;
2. Cidda mansab jago oo kale ka haysa maxkamadda, iyo dhexdhexaadiyeyaasha tababarada ku saabsan arrimaha dhexdhexaadinta qaatay;
3. Dhexdhexaadiyeyaasha kale ee magacyadooda lagu daray liiska ay soo diyaarinayso maxkamadda guud ee Dawladda Deegaanka Soomaalidu sida ku cad qodobka 27-aad ee awaamiirtan.
4. Macaamiishu waxay keensan karaan dhexdhexaadiyeyaal iyaga u gaara oo ka madax-banaan dhexdhexaadiyeyaasha arrimaha dhexdhexaadinta maxkamadda ama liiska dhexdhexaadiyeyaasha ee diiwaangashan; Hasa-yeeshe, dhexdhexaadiyuhu ma bilaabi karo arrinta heshiisinta, ilaa uuna isku-duwahu hubinin in uu buuxinayo shuruudaha ku xusan qodobka 26-28 ee awaamiirtan, islamarkaana uu aqbalo mooye.
5. Shaqaalaha ay maxkamaddu uu shaqalaysiinayso arrimaha dhexdhexaadinta ay maxkamaddu hoggaamiso intaysan shaqada gelin ka hor, maxkamaddu waa in ay siiso tababaro ku saabsan arrimaha dhexdhexaadinta.

27. LIISKA DIWAANKA DHEXDHEXAADIYEYAASHA

1. Iyada oo lagu salaynaayo shuruudaha lagu qeexay qodobka 44aad ee Bayaanka aasaaska maxkamadaha Dawladda Deegaanka Soomaalida ee Tirsigiisu yahay 206/2013, qof kasta oo buuxiya waxaa lagu daraya liiska dhexdhexaadiyeyaasha;
    b. Ugu yaraan shahaadada koowaad ee sharciyada;
    T. Shan sano oo waayo-aragnimo shaqo ah;
    J. In uu ku sifoobay akhlaaq wanaagsan;
    X. Xirfadle haysta shahaadada certificate mac'hadyada la yaqiinsanyahay ee loo idmaday bixinta tababarada ku saabsan arrimaha dhexdhexaadinta islamarkaana ka soo qaatay 80 saacadood oo tababar.
2. Waxaa diwaanka dhexdhexaadiyenimada lagu dari karaa xirfadle kasta oo Injineerka, cilmi-nafsiga, beeraha, iyo caafimaadka oo ka baxsan sharciga ee leh xeel-dheeri waayo-aragnimo xirfadeed oo ka badan 10 sanno, islamarkaana buuxiya shuruudaha ku xusan farqada 1 xarafka (b) ilaa (x) ee qodobkan.

28. TIRADA DHEXDHEXAADIYEYAASHA DACWADDIBA QAADAYA

Faylkiba waxaa lagu meelaynayaa hal dhexdhexaadiye oo kaliya. Hase ahaate, iyadoo uu ka duulayo garsooraha faylka dacwadda gacanta ku haya kakanaanta kiiska iyo tirada macaamiisha waxa uu samayn karaa in lagu meeleeyo wax ka badan hal dhexdhexaadiye.

29. AWOODDA IYO WAAJIBAADKA DHEXDHEXAADIYAHA

1. Si kiiska loogusoo bandhigo dhexdhexaadinta ay maxkamaddu hoggaamiso, dhexdhexaadiyuhu waa in uu macaamiisha uqeexo nuxurka qodobadan soo socda;
    b. In Doorka dhexdhexaadiyuhu yahay oo kaliya fulinta waajibaadka ee dhexdhexaadinta heshiiska, laakiin uuna awood u lahayn inuu go'aan ka gaadho isagoo tixraacaya sharciga iyo caddaymaha, iyo inuu dhinacyada si siman udhexdhexaadiyo.

t. In geeddisocodka kiisku ka qayb-galka dhinacyada;
j. Nidaamka hab-dhaqanka ee dhexdhexaadiyenimad uu uhoggaaminayo;
x. Hab-waafaqsan sharci kale ama nidaamka anshaxa maxkamadda ama dhinacyada ay doodu ka dhaxayso haddii ay heshiis gaadhi wayan mooye, dhammaan macluumadka ku saabsan wada hadalada, qoraalada, iyo guud ahaanba dukumentiyadu in ay dowrsoonanayan, sido kale, in aan cidna loogu adeegsanayn caddayn maxkamadeed;

2. Dhexdhexaadiyuhu marka uu si gaar ah ama si wadajir ah ula hadlayo dhinacyada waxa uu ku dhiirigelinaya in dhinacyadu ay sheegan dhammaan waxyaabaha uu rumaysan yahay inay fududaynayaan geeddisocodka heshiiska;
3. Haddii heshiis laga gaadhay arrinta khilaafka dhexdhexaadiyaha iyo xog-hayuhu waxay gacan ka geysanayan diyaarinta heshiiska qabyo-qoraalka ah,
4. Haddii dhinacyadu ay heshiin waayaan, wuxuu dhexdhexaadiyuhu diyaarinaya warbixin kooban oo ah in arrinta lagu xallin kari waayay heshiis, islamarkaana wuxuu usoo bandhigaya maxkamadda. Iyadoo ay tahay nuxurka warbixintu in uu muujiyo khilaafkooda oo kaliya, laguma darayo qodobadi ay dhicyadu kusoo bandhigeen intii lagu jiray dooda. Qodobadi ay soo bandhigay dhinacyadu Inti lagu guda jiray wada-hadalka, dhaarti, iyo doodaha kale maxkamaddu caddayn ahaan looma hayn karo.

30. ADEEGA DHEXDHEXAADINTA BILAASHKA AH

1. Dhexdhexaadiye kasta oo ka diiwaan-gashan liiska dhexdhexaadiyeyaasha waxaa waajib ku ah inuu bixiyo adeega dhexdhexaadinta bilaashka ah ugu yaraan laba kiis sanadkiib.
2. Sida ku cad farqada 1aad ee qodobkan, wuxuu dhexdhexaadiyihu siinaya adeega dhexdhexaadinta bilaashka ah macaamiishan soo socota;
   b. Haddii dacwadda ay soo dhawysteen dad danyar ahi;
   t. haddii kiisku uu yahay kiis aan lahayn ujuuradi garsooraha,
   u. Kiisaska madaniga ah ee lacagaha, islamarkaana ay qiyaastoduna tahay wax ka yar 500 kun oo birr.

31. XUQUUQDA GUNNADA IYO KHARASHADKA

1. Kharash kasta oo dhexdhexaadiyuhu uu galo inta lagu gudo jiro geeddisocodka dhexdhexaadinta waxa qabaya dhinacyadu. Islamarkaana waxaa nidaamka kharash bixinta fullinaya isku-duwaha arrimaha dhexdhexaadinta ay maxkamaddu hoggaamiso.
2. Haddii uuna dhexdhexaadiyuhu ku heshiinin inuu ugudanayo hawsha dhexdhexaadinta dhinacyada si mutadawacnimo ah oo bilaasha ama uuna ahayn shaqaale ka tirsan shaqaalaha maxkamadda ee ku meelaysan arrimaha dhexdhexaadinta ay maxkamaddu hoggaamiso, waxa uu codsan karaa in la siiyo lacagta ujuurada dhexdhexaadinta ee uu qabto.
3. Haddii ay dhexdhexaadiyaha iyo dhinacyada dhexdooda uu heshiis jiro mooye, dhexdhexaadiyuhu marka uu hawsha dhexdhexaadiyenimo guto wuxuu yeelanaya ujurada ku habboon iyadoo lagu salaynayo qiimaha ujurada arrimaha dhexdhexaadiyenimada ee maxkamadda guud ay soo saarto.

32. IS-DIWAANGELINTA IYO HABKA KHARASH BIXINTA SANNADLAHA AH

1. Qof kasta oo buuxiya shuruudaha ku xusan qodobka 27aad ee awaamiirtan, islamarkaana iskadiiwaan geliya liiska diwaanka waxa uu bixinayaa qiimo lacageed oo dhan 300 birr oo diwaangalina iyo 750 Birr oo ah khidmad sanadeedka.
2. Lacagaha khidmada ee diiwangelinta iyo sanadlaha ah ee loo bixiyay hab waafaqsan faqrada 1aad ee qodobkan waxaa looga faa'iidaysanaya, islamarkaana loo adeegsanaya xoojinta arrimaha geeddisocodka dhexdhexaadinta ay maxkamaddu hoggaamiso.

33. WAAJIBAADKA HORUMARINTA NIDAAMKA DHEXDHEXAADINTA

1. Dhexdhexaadiye kasta waxa uu waajib ka saaran yahay ka qayb-qaadashada horumarinta nidaamka dhexdhexaadinta.
2. Dhexdhexaadiyaha wuxuu waajib ka saaran yahay fahansiinta macaamiisha iyo qareenadooda in uu yahay nidaamka dhexdhexaadintu nidaam ikhtiyaariya sida kuwa kale ee xallinta khilaafaadka, samaha iyo nabadaynta.

34. WAAJIBKA DIYAARINTA DUKUMENTIGA HESHIISKA EE HABKA RASMIGA AH

1. Dhexdhexaadiyuhu waa inuu si sax ah udiiwaangeliyaa arrimaha ay ku heshiiyeen dhinacyadu, islamarkaan uu dukumeentiga heshiiska waa inuu habka rasmiga ah ee ugu habboon udiyaariyaa.
2. Waxa ku waajiba dhexdhexaadiyaha in uu dhinacyada u akhriyo heshiiska la diyaariyay, islamarkaan uu ka saxeexo heshiiska dhinacyada marka uu xaqiijiyo inay si sax ah u fahmeen xaashida heshiiska kadib.

35. XIDHIIDHKA UU DHEXDHEXAADIYUHU LA YEELANAYO MACAAMIISHA

1. Dhexdhexaadiyuhu lama yeelan karo macaamisha wax xidhiidha oo toos ah ama mid dadban toona, si uu talo bixin sharci ama qareenimo ahan, islamarkaana ku saabsan arrinta dhinacyada ee loo soo gudbiyey geeddisocodka dhexdhexaadinta oo lagu guda jiro.
2. Inta aan la guda galin geeddisocodka dhexdhexadinta ka hor dhexdhexaadiyaha waxaa ka mamnuuca in uu macaamiisha lacag ka amaahdo ama uuna amaahinin. Hase ahaatee, arrintani ma khusayso bangiyada iyo hay'adaha lacagaha ee la midka ah.

36. WAAJIBAADKA ILAALINTA RABITAANKA XORTA AH EE MACAAMIISHA

1. Dhexdhexaadiyuhu ma aha inuu go'aan ka gaadho geeddisocod kasta oo dhexdhexaadin heshiis ah. Heshiisku waa xaqa ay dhinacyadu u leeyihiin inay si xor ah u go'aansadaan.
2. Dhexdhexaadiyuhu ma’aha in uu si toosa ama si dadban toona in uu dhinacyada ugu hanjabo, ku kaco ama isku diro arrinta uu gacanta ku hayo si ay guud ahaanba ugu heshiiyaan ama isku khilaafaan.

QAYBTA LIXAAD

GUDDIGA ARRIMAHA DHEXDHEXAADINTA AY MAXKAMADDU HOGGAAMISO

37. Aas-aaska guddiga arrimaha dhexdhexaadinta ay maxkamaddu hoggaamiso

1. Maxkamadda guud ee Dawladda deegaanka Soomaalidu iyadoo ka duulaysa awoodda ku saabsan dhisida guddiga dhexdhexaadinta ee lagu siiyay qodobka 42 (7) ee bayaanka aasaaska maxkamadaha DDS ee tirsigiisu yahay 206/2013.T.I. waxaa maxkmadda guud ee DDS laga aasaasay guddig. Hadda kadib loogu yeedhi doono Guddiga dhexdhexaadinta;
2. **Guddigu waxa uu ka koobnaanaya 9 xubnood.**
3. Xubnaha guddigu waxay yelanayaan gunno marka ay ka qaybgalan shirarka. Qiimaha gunadana waxaa go'aamin donna maxkamadda guud.

38. XUBNAHA GUDDIGA DHEXDHEXAADINTA AY MAXKAMADDU HOGGAAMISO

1. Xubnaha guddigu waxay noqonayaan sidan;
   b. Guddoomiye ku xigeenka Maxkamadda guud ee DDS.
   T. Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee DDS ama guddoomiye ku-xigeenka uu u wakiishay guddomiyuhu.

J. Guddoomiyaha Maxkamadda degmada ama guddoomiye ku-xigeenka uu u wakiishay guddomiyuhu.
X. Hal qareena oo matala ururka Qareenada, islamarkaana leh khibrad waayo-aragnimo oo ka badan 10 sanno, taas oo la xidhiidha xallinta isku dhaca khilaafadka ama dhexdhexaadinta.
k. Hal xubin oo ka socda ururada bulshada ee ka shaqeeya hawlaha la xidhiidha arrimaha dhexdhexaadinta.
D. Macalin ka socda xarumaha Tacliinta sare, islamarkaana leh khibrad waayo-aragnimo oo macalinimo ah in ka badan 10 sanno.
R. Madaxa Rigestraarada Maxkamadda guud ee Dawladda Deegaanka Soomaalida.
S. Hal garsoore oo ka ka socda maxkamadaha sare ee gobolada iyo hal garsoore oo ka socda maxkamadaha degmooyinka.

SH. Madaxa xafiiska arimaha dhexdhexaadinta ay maxkamaddu hoggaamiso, ayaa isaga oo aan wax cod ah lahayn ayuu noqonaya xubin iyo xoghaynta guddiga.

2. Haddii ay joogaan kala badh in ka badan xubnaha guddiga, waxay noqonayan kooram.
3. Guddoomiye ku-xigeenka Maxkamadda guud ee DDS ayaa noqonaya shir-guddoonka Guddiga.
4. Marka laga reebo xubnaha kuwa ku xusan faqrada 1aad ee qodobkan xarafka "b" ilaa "j" wuxu noqonaya muddo xileedkodu 2 sanno oo ka bilaabmaysa xiliga la doortay.

39. AWOODAHA IYO WAAJIBAADKA GUDDIGA

Guddigu wuxuu yeelanayaa awoodaha iyo waajibaadka soo socda;

1. Baadhista cabashooyinka iyo go'aan ka gaadhista anshaxeed ee xubnaha.
2. Go’aamiinta qiimaynta iyo xulista xubnaha lagu darayo liiska diwaanka dhexdhexaadinta.
3. Wuxuu si joogto ah u qiimeyaan hawlaha waajibaadka ee dhexdhexaadinta, islamarkaana wuxuu soo jeediya qodobada dibu-habeynta;
4. Qiimaynta waxqabadka xarumaha dhexdhexaadinta;
5. Wuxuu soo jeediyaa talooyinka ishortaaga arrimaha dhexdhexaadinta ay maxkamaddu hoggaamiso;
6. Wuxuu soo dhaweeya cabashooyinka ay soo gudbiyaan dhexdhexaadiyeyaasha, islamarkaana wuxuu qaada tallaaboyinka lagu saxayo;
7. Qiimayta warbixin-xilliyeedka uu soo gudbiyo isuduwaha arrimaha dhexdhexaadinta ay maxkamaddu hoggaamiso;
8. Qiimaynta machadyada bixiya tababbarada arrimaha dhexdhexaadinta ay maxkamaddu hoggaamiso;
9. Samaynta daraasaddada ku saabsan kobcinta xirfadaha, iyo faafinta daabacaada;
10. Wuxuu Maxkamadda guud ee federaalka u gudbiyaa warbixinta waxqabadka ee guddiga iyo warbixinta waxqabadka arrimaha dhexdhexaadinta ay maxkamaddu hoggaamiso sannadkiiba laba jeer, iyo
11. Wuxuu Fuliya hawlaha kale ee uu u xilsaaro Guddoomiyaha Maxkamadda guud ee DDS;

40. NIDAAMKA KAAL-FADHIGA GUDDIGA

1. Guddigu wuxuu kaal-fadhi yeelanaya bishiiba hal mar hadba sida loogu baahdo.
2. Isku-duwaha arrimaha dhexdhexaadinta ee maxkamadda guud wuxuu xubnaha guddiga si horudhac ah ugu diraya ajandaha shirka, islamarkaana wuxuu iclaaminaya taariikhda iyo goobta shirka.
3. Xubnaha guddiga ee ka baxsan xubnaha hoggaaminta maxkamadda haddii ay ka soo qaybgeli waayaan saddex shir oo xidhiidha waxaa laga saaraya xubinimada. Waxaana ka saarista xubinimada lagu ogaysiinay qofka qoraal ahaan, islamarkaana waxaa sida ugu dhakhsaha badan loogu bedelaya xubin kale.
4. Guddigu wuxuu soo saari karaa habraaca nidaamka kaal-fadhiga oo faah-faahsan.

QAYBTA TODDOBAAD

NIDAAMKA ANSHAXA IYO CIQAABTA

41. NIDAAMKA ANSHAXA

1. Macmiil kasta wuxuu soo gudbisan karaa guddiga dacwad anshaxeed ka dhan ah dhexdhexaadiyaha, isagoo u sii marinaya iskuduwaha xafiiska arrimaha dhexdhexaadinta ay Maxkamaddu hoggaamiso.
2. Iskuduwaha arrimaha dhexdhexaadinta ee ay maxkamaddu hoggaamiso wuxuu guddiga usoo gudbinayaa cabashada anshaxeedka iyadoo ay ku lifaaqantahay caddayntu.
3. Guddigu waxay baadhitan ku samaynaya cabashada, islamarkaana waxay kaga go'aan gadhayan muddo 15 maalmood gudahood.
4. Inta lagu gudo jiro baadhista dacwad anshaxeedka, waxaa loo yeedhi karaa dhexdhexaadiyaha lagusoo oogay, si wax looga weydiiyo islamarkaana uu sharaxaad uga bixiyo jawaabaha.
5. Dacwad anshaxeedka haddii loo arko mid sax ah, guddigu waxay cod aqlabiyad leh ku ansixinayaan go'aanka ciqaabta.

42. KHALADAADKA ANSHAXA FUDUD EE DHEXDHEXAADIYAHA

Qodobadan soo socda waxay ka mid yihin khaladaadka anshaxa fudud ee la xidhiidha dhexdhexaadiyaha;

1. Maqnaanshaha ama dib-u-dhaca maalinta ballanta.
2. In uu si asluubleh ula macaamilon waayo macaamiisha, taasoo hoos u dhigaysa faa'iidada adeega dhexdhexaadinta ee ay maxkamaddu hoggaamiso.
3. In uu ku guuldareysto geeddisocodka nidaamka anshaxa.
4. In uu ku guuldareysto diyaarinta dukumeentiga heshiiska si waafaqsan anshaxa xirfadeed.

43. KHALADAADKA ANSHAXA CULUS EE DHEXDHEXAADIYAHA

Qodobadan soo socda waxay ka mid yihin khaladaadka anshaxa culus ee la xidhiidha dhexdhexaadiyaha;

1. Ilaalin la’aanta sirta.
2. Lugoyinta/celcelinta macaamiisha.
3. In dhinacyada aan si siman loola dhaqmin, islamarkaana dhinac loo eexdo.
4. Karti iyo aqoon xirfad la'aaned.
5. Qaadashada laalushka ama xusulduubka, yeelis la’aanta waajibadka faran iyo yeelista waxa aan farayn.
6. Macaamiisha oo lagu qasbo ama cadaadis aan loo baahnayn lagu saaro bixinta ujuurada dhexdhexaadinta iyaga oo aan raali ka ahayn.
7. Dhexdhexaadiyaha iyo mid ka mida macaamisha oo la ogyaha in uu khilaaf dan gaarahaaneedi udhexeeyo oo haddana loo magacaabo dhexdhexaadiye.
8. Isku dayga in dhinacyada lagu heshiisiyo, khiyaamo, qasab/xoog iyo laaluush.
9. In qof kasta lagula doodo ama lala murmo ama lagu aflagaadeeyo shaqada dhexdhexaadinta.
10. Inta lagu guda jiro hawlaha dhexdhexaadinta in la arko isagoo sikhraansan ama isticmaalo maandooriye.
11. La fal-galka galmo oo lala sameeyo macaamiisha, dhexdhexaadinta ka hor ama ka dib.
12. Samaynta falalka kale ee ay guddigu aaminsan yahay in ay yihiin falal anshaxeedka culus.

44. TALLAABOOYINKA CIQAABTA

Dhexdhexaadiye kasta oo la xaqiijiyay in uu ku xad-gudbay waajibaadyada lagu qeexay awaamiirtan, waxaa lagaga talaabo qaadi karaa tallaabooyinka fal dembiyeedka fudud ama culus ee soo socda;

1. Iyadoo lagu xadgudbo dembiyada anshaxa fudud ee ku xusan qodobka 42aad ee awaamiirtan, islamarkaana ay tahay marki ugu horeysay wuxuu yeelanaya digniin Afka ah, haddii lagu helo in ka badan hal marna wuxuu yeelanaya digniin Qoraala.
2. Iyadoo lagu xadgudbo dembiyada anshaxa fudud ee ku xusan qodobka 42aad ee awaamiirtan saddex jeer in aan ka yarayn ama iyadoo hal mar lagu xad-gudbo dembiyada anshaxa culus ee ku xusan qodobka 43aad awaamiirtan wuxuu yeelanaya ganaax lacageed oo aan ka yarayn toban kun (10000) oo birr.
3. Iyadoo ay ku xidhan tahay hadba cuslayska dembiga, marka lagu helo xadgudubka culus in uu geystay waxaa laga tirtiri karaa galka dhexdhexaadinimada, islamarkaana waxaa laga mamnuucaya in mar dambe uu qabato hawlaha dhexdhexaadinta.
4. Haddii uu qareen yahay cidda laga qaaday tallaabada ku xusan faqrada 2aad ee qodobkan, waxa dembiga uu galay iyo tallaabada laga qaaday oo qeexan waraaq lagu ogaysiinaya Ururka Qareenada ama Guddiga Anshaxa Qareenada ee ay khusayso.

45. MAS'UULIYADDA FAL-DEMBIYEEDKA

Waxa tallaabo anshaxeed laga qaadaya dhexdhexaadiyaha haddii lagu helo dembiyada sida; bixinta siraha ama qaadashada laaluushka. Sidoo kale, haddii ay guddigu u aragkan in ay lagama maarmaan tahay waxay go'aamin karaan inay u gudbiyaan macluumaadka lagama maarmaanka ah iyo caddayntaba cidda ay khusayso si ay loogu oogo dacwad ciqaabeed waafaqsan sharciga ciqaabta.

QAYBTA SIDDEEDAAD

UJUURADA DHEXDHEXAADIYEYAASHA

46. UJUURADA DHEXDHEXAADIYAHA

1. Haddii dhexdhexaadiyuhu uu yahay shaqaale ka tirsan maxkamadda, waxa ujuuro ah malahan.
2. Ujuuradu adeegga dhexdhexadinta ee la siinayo dhexdhexaadiyaha waxay salaysnaanaysa heshiiska ka dhexeeya dhexdhexaadiyaha iyo macaamiisha.
3. Haddii aanay jirin wax heshiis ah oo u dhexeeya dhexdhexaadiyaha iyo dhinacyada oo ku saabsan ujuurada addeega ee la siinayo dhexdhexaadiyaha, waxa la raacaya iyada oo lagu salaynayo khidmadda caadiga ah ee dhexdhexaadinta ee ku lifaaqan awaamiirtan, islamarkaana dhinacyadu ay isku dardaraan oo uu bixinayaan si siman.
4. Qiimaha ujuuradu ee loo xisaabinayo sida ku cad faqrada 2aad ee qodobkan waxaa lagu slaynayaa islamarkaana tixgelin gaara la siinaya duruufaha guud ee dhinacyada, kaknaanta dacwadda, geeddisocodka dacwadda in muddo ku dhamaanayso iyo in kale.
5. Haddii ay arintu ku dhammaato heshiis, macmiilkii bixiyay kharashka dhexdhexaadinta waxaa loo soo celinayaa baaqiga kasoo hadha ujuurada dhexdhexaadiyahay iyo kharashaadka kale ee maamulka. Hase ahaate, haddii uu dhexdhexaadiyuhu yahay shaqaale ka tirsan maxkamadda, waxaa go'aaminaysa kharashyada laga jarayo maxkamadda. Haddii ujuurada dhexdhexaadintu ay ka badato kharashka garsooraha, faraqa qiimo ee uu dhexeeya waxaa bixinaya dacwooddaha.
6. Haddii ay arrintu ku dhammaato heshiis la'aan, wax lacaga oo ujuuro ah lama biixinaayo. Hase ahaatee, haddii geeddisocodka arrinku uu ahaa mid muddo dheer socoday, maxkamaddu waxay dhexdhexaadiyaha siin kartaa gunno iyadoo ka duulaysa hadba xaalkada islamarkaana raacaysa nidaamka gunnada ee dawladda.

47. ARRIMAHA LA XIDHIIDHA UJUURADA DHEXDHEXAADIYAHA

1. Ujeeddada lacagta ujuurada dhexdhexaadiyeyaasha ee lagu dhaqan gelinaayo awaamiirtan, waa si dhexdhexaadiyeyaasha ka diwaan gashan liiska maxkamadda looga kabo adeegga xirfadeed iyo wakhtiga ay ku bixiyaan xal ka gaadhista arrimaha dhexdhexaadinta macaamisha.

2. Kharashaadka looga baahan yahay hawlaha adeega dhexdhexaadinta, ka mid ma'aha ujuurada dhexdhexaadiyuhu.
3. Haddii geeddisocodka dhexdhexaadinta oo bilaabatay ay joogsato dhexdhexaadiyuhu ma yeelanayo wax ujuuro ah sabab kasta oo ay joogsatay. Hase ahaatee, haddii habka geeddisocodka heshiisintu uu aha mid muddo dheer qaatay, islamarkaana joogsiga geeddisocodka heshiisinta uuna dhexdhexaadiyuhu sababteeda lahayn, maxkamaddu waxay dhexdhexaadiyaha siin kartaa gunno, iyadoo ku salaynaysa nidaamka gunnada dawladda.
4. Haddii geeddisocodka dhexdhexaadintu uu ujoogsado arrin la xidhiidha karti iyo xirfad la'aanta ama hab-dhaqan xumada dhexdhexaadiyaha awgeed, dhexdhexaadiyuhu ma yeelanayo wax ujuuro ah.

48. HABKA UJUURO BIXINTA

1. Haddii ayna jirin heshiis liddi ku ah mooyaane, dhinacyada is-haya waxay si siman u bixinayan ujuurada.
2. Haddii hawsha dhexdhexaadinta ay fulliyeen dad ka badan hal dhexdhexaadiye waxaa mid kasta gaarki loo siinaya lacagta ujuurada, taaso lagu salaynayo si waafaqsan tacriifka lacag bixinta ee ku lifaaqan awaamiirtan.

49. MABDA'A LACAG BIXINTA

1. Marka nuxurka arrinku uu yahay mid khidmad lacageed yeelanay ama mid aan lacag khidmad lahayn, waxaa lacagta ujuurada ee hawlaha dhexdhexaadinta waxa loo samaynayaa si waafaqsan taariifka khidmadda ee ku qeexan shaxda koowaad ee lifaaqa awaamiirtan.
2. Marka nuxurka arrinku uu yahay mid khidmad lacageed yeelanay ama mid aan lacag khidmad lahayn waxaa lacagta ujuurada ee hawlaha dhexdhexaadinta waxa loo samaynayaa si waafaqsan taariifka khidmadda ee ku qeexan shaxda labaad ee lifaaqa awaamiirtan.
3. Arrimaha aan si cad ugu jirin shaxda taariifka khidmadda waxaa lagu dabaqi doonaa qabta shaxda koowaad.
4. Haddii nuxurka arrinku uu yahay mid khidmad lacageed yeelanaya ama mid aan khidmad lacag lahayn, islamarkaana dhexdhexaadiyeyaal ka badan hal qof ay uxil-saaran yihin waxaa lagu dabaqi doonaa si waafaqsan taariifka khidmadda ee ku qeexan shaxda labaad ee lifaaqa awaamiirtan.

QAYBTA SAGAALAAD

QODOBADA GUUD

50. SAXIIXA XAQIIJINTA

1. Dhexdhexaadiye kasta ka hor inta uuna galin liiska diwaanka dhexdhexaadiyenimo ama inta uuna guda galin fullinta hawlaha dhexdhexaadinta waa inuu saxeexa waraaqda uu ku xaqiijinayo u hoggaansamida mabaad'ida, ilaalinta sirta, iyo in ushaqaynayo si taxadar leh.
2. Xogta shakhsi ahaaneed ee dhexdhexaadiyaha ee lagu qeexay faqrada 1^{aad} ee qodobkan waxa loo dhexgelinaya faylka laga haynaayo.

51. WAX KA BEDDELKA HAB-RAACA

Maxkamadda guud ee Dawladda Deegaanka Soomaalidu waxay wax ka beddeli kartaa awaamiirtan goor kasta oo loo baahdo.

52. QODOBADA KALAGUURKA

Maxkamadaha ayna ka bilaabmin geeddisocodka dhexdhexaadintu ama xarumaha ama fadhi-jilootyada aan si rasmiya looga dhaqan-gelin, waxaa loo qabanaya muddo saddex bilooda laga bilaabo maalinta la ansixiyay awaamiirtan islamarkaana ay ku dhaqan-geliyaan.

53. MUDDADA DHAQANGALKA

Awaamiirtani waxay dhaqan-galaysa laga bilaabo bisha yekaatit 10/2015 T.I. marka ay maxkamadda guud ee DDS ansixiso.

LIFAAQA KOOWAAD:

Taarifka Lacagaha dhexdhexaadiyeyaasha ee arrimaha khidmadda aan lahayn;

SHAXDA KOOWAAD

Nooca Dacwadda	Arrimaha qoyska	Ganacsiga	Madaniga	Arrimaha kale
Khidmadda balanta hore ee koowad	2,000	2,000	2,000	2,000
Khidmadaha dambe ee ku xiga khidmadda ballanta hore ee koowaad	1,000	1,500	1,500	1,500

LIFAAQA LABAAD:

Taarifka lacagaha dhexdhexaadiyeyaasha ee arrimaha khidmadda leh;

Qiimaha dacwadda Lacag ahaan	Khidmadda dhexdhexaadiya boqolkiba (%)	Qiimaha ugu sareeya
(500,001-1,000,000]	1	26,500
(1,000,001-2,000,000]	0.75	34,000
(2,000,001-3,000,000]	0.5	39,500
(3,000,001-4,000,000]	0.25	42000
(4,000,001-5,000,000]	0.125	43250
(5,000,001-10,000,000]	0.0625	46375
(10,000,001-20,000,000]	0.05	51375
(20,000,001-30,000,000]	0.025	53875

ALI BARUD SHEIKH AXMAD

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GUUD EE DDS

DAWLADDA DEEGAANKA SOOMAALIDA

MAXKAMADDA GUUD

Maxkamadda guud ee DDS

AWAAMIITA HABKA DEEQDA WAXBARASHADA IYO TABABARADA GARSOOREYAASHA IYO XUBNAHA MAGACAABISTA

AWAAMIIR LAMBARTA___ /2014T.I.

ARAR

Maadaama ay lagamamaamaan noqotay in lagu kobciyo awooda fulineed ee maxkamadaha heerarkooda kala duwan, iyo in macaamiisha adeega rabta lagu siiyo adeega ay rabaan wakhti kooban iyo nidaam cadaalad ku dheehantahay ayaa waxaa waajib noqotay in lasii joogteeyo waxbarashada iyo tababarada lagu kobcinayo garaadka garsoorayaasha iyo xubnaha magacaabista ah:

Maadaama ay lagama maarmaan noqotay in si cad loo tibaaxo habka loo xulanayo xubnaha ka faa'iidaysanaya waxbarashada iyo tababarada.

Maadaama ay laga maarmaan noqotay in si cad loo tibaaxo waajibaadka saaran iyo xuquuqda ay xubnahani leeyihiin mudada lagu jiro geedisocodka tababarka iyo waliba, waajibaadka adeeg bixineed ee saaran xubnahan kadib marka ay dhamaystaan tababarka ee ku laabtaan goobohoodii shaqo.

Maadaama ay muhiim tahay in sicad loo dhigo shuruudaha looga baahanyahay noocyada tababarada ee kala duwan, ayna fudeydinayso qaab-shaqeedka shaqo oo ay badhi-gantaalayso (taageerayso) mab'da'a cad-cadaanta iyo isla-xisaabtanka ayaa waxa loo baahday in lasoo saaro awaamiirtan fulinta habka bixinta waxbarshada iyo tababarada garsoorayaasha iyo xubnaha magacaabista ah.

Sidaa daraadeed ayuu gudiga maamulka garsoorku ee dawlada deegaanka soomaalidu u soo saaray awaamiirta fulinta habka bixinta waxbarashada iyo tababarada asagoo ka duulaya bayaanka dib loo aas-aasay ee gudiga maamulka garsoorka, bayaan tir……./2014 qodobadiisa 12(1)(M) iyo Qodobka 32.

QAYBTA KOOWAAD

1 CIWAAN GAABAN

Awaamiirtan waxa loogu yeedhi karaa "Awaamiita fulinta Habka bixinta Waxbarashada iyo Tababarada Garsoorayaasha iyo Xubnaha Magacaabista ah"

2. QEEXID

Hadii aanu macnaha eraygu siinayn, awaamiirtan gudeheeda;

1) **"Waxbarshada iyo Tababrada Wakhtiga Dheer"=** waa waxbarasho iyo tababaro la bixiyo mudo dhan hal sano iyo in ka badan taasoo la siiyo garsoorayaasha iyo xubnaha kale ee magacaabista ah si kor loogu qaado aqoonta, xirfada iyo afkaarta xubnahaas, waxbarashadaas/tababarkaas oo lagu siin karo dalka gudihiisa ama dibada.
2) **"Tababarrada Wakhtiga Gaaban"=** waa tababaro lasiiyo garsoorayaasha ama xubnaha kale ee magacaabista ah kaasoo lagu saleeyay goldaloolooyinka ka jira dhanka khibrada/aqoonta, tababarkaas oo lagu siin karo dalka gudihiisa ama dibadiisa.
3) **"Baahida Tababareed"=**waa tababarrada joogta ee la qorsheeyo lana fuliyo sanadka ayadoo lagu salaynayo sidii loo awdi lahaa hadba goldaloolooyinka fulineed ee lagala kulmo shaqada, ama ayadoo laga duulayo qorshaha hay;adeed ee ku saabsan cududa shaqaale.
4) **"Maxkamada Guud"=** waa Maxkamada Guud ee DDS
5) **"Maxkamado"=** waa maxkamada guud ee DDS, maxkamadaha heerarkooda kala duwan.
6) **"Xafiiska gudiga ama xafiis-hoosaadka"=** waa xubin/qayb katirsan maxkamada guud taasoo leh macnaha lagu tibaaxay bayaanka gudiga maamulka garsoorka, xubinkaas oo heerarka kala duwan ka fuliya waxbarashada iyo tababarada asagoo ku salaynaya awaamiirtan.
7) **"Garsoorayaal"=** xubnaha ay Ansixiyaan golaha xildhibaanadu oo maxkamadaha heerarkooda kala duwan kaga shaqeeya garsoorenimo.
8) **"Xubnaha Magcaabista ah"=** waa madax-xafiiseedka, go'aan qore, rijistraal, qareenada, khabirada daraasaadka iyo isbadalka iyo xubnaha kale ee uu gudiga magcaabo.
9) **"Ka faa'iidaysataha waxbarashada ama tababarku"=** waa waa garsoorka ama xubinka magcaabista ah ee loo fasaxay inuu ka faa'iidaysto tababar ama waxbarasho.

3 TILMAANTA SINJIGA

Awaamiirtan gudeheeda meelaha lagu xusay sinjiga Labka ah waxay tilmaan u tahay oo kale sinjiga dhadiga ah.

4 XADKA FULINEED

Awaamiirtan waxay dhaqan gal ku ahaanaysaa garsoorayaasha iyo xubnaha magacaabista ah ee ka hawlgala maxkamadaha deegaanka heerarkooda kala duwan.

QAYBTA LABAAD

WAXBARASHADA IYO TABABARADA WAKHTIYADA DHAADHEER IYO KUWA WAKHTIGYADA GAAGAABAN.

5. BARNAAMIJYADA WAXBARASHADA WAKHTIYADA DHAADHEER IYO SIDA LAGU HELAYO

1) waxa kamid ah barnaamijyada waxbarasho ee caadiga ah(regular), kuwa summerka ah, kuwa loox-jiidka(distance) ah ama kuwa tobaadka dhamaadkiisa ah (IWM) ee ay bixiyaan xarumaha tacliinta sare ee dalka gudihiisa , kuwaasoo ay maxkamada guud daboolayso kharashaadka ku baxaya waxbarashadaas.

2) waa fursadaha shaqo ee ay maxkamaduu guud ee heer federal u qoondayso deegaankeena, taasoo kharashka waxbarashada ay daboolayso dawladu ama xarun waxbarasho oo dalka gudihiisa ah ama deeq-bixiyayaasha kale ama

3) waa fursadaha waxbarasho ee la xidhiidha projectyada ee laga helo laamaha dawlada ama kuwa aan dawliga ahayn.

4) waa furasada waxbarasho ee lagu helo ayadoo si iskaa ah loo raadsanayo kafaalad-qaade (sponsor) ama waa waxbarashada si iskaa ah la iskaga bixiyo kharashaadka ku baxaya taasoo ah mid dalka gudihiisa ama dibadiisa ah.

5) waxa kamid ah fursadaha waxbarasho ee lagu helo siyaabo kasta oo sharci ah kuwaasoo laga heli karo ah dalka gudihiisa ama dibadiisa.

6 SHURUUDAHA LOOGA BAAHANYAHAY IN LA BUUXIYO MARKA LOO TARTAMAYO WAXBARASHADA WAKHTIGA DHEER.

Ayadoo ay tahay inay buuxiyaan shuruudaha lagu xidhayo xubinka tababarka lasiinayo, hadana kuwayowgan hoos ku cad ayaa mudnaanta hore la siin:

1) Xubinkasta oo hela fursada waxbarashada ama tababarka ay dawladu damaanad qaadayso, fursadaas ha ka helo dalka gudhiisa ama dibadiisa e umma tartarmi karo fursadaha cusub, oo waxbarasho ama tababar oo ka baxsan mida uu sponsorka ku helay xataa hadii ay programmkeedu kala duwanyahay.
2) Xubinka u tartamay fursad waxbarasho ama tababar hadii aan la xaqiijin inuu ku guuldaraystay fursada oo uu ka gudbi waayay, ama hadii cidii fursadan siisay aanay xaqiijin in fursadan lagala laabmay, xubinkaas uma tartami karo fursad waxbarasho ama tababar oo kale.
3) Xubinka garsoorka ah ama magacaabista ee raba inuu u tartamo fursadaha waxbarashada ama tababarada dhaadheer, waa inuu xubinkaas hay'ada u adeegayay ugu yaraan mudo 3sanno ah.
4) Xubinka u tartamaya firsadaha waxbarasho looma ogola inuu u tartamo fursadaha waxbarasho ee ka darajo hooseeya mid uu u tartamayo.
5) Xubinkasta oo ku guulaysta tartanka uu u galay fursada waxbarasho, ka hor inta uunsan bilaabin waxbarashada sida uu sharcigu dhigayo waa inuu marka hore heshiis waajibaadiisa cadeynaya la galaa maxkamada guud. Asagoon heshiiskaas la galin maxkamada guud ma bilaabi karo waxbarasho. Waajibaadkiisa oo tafatiran heshiiska uu maxkamada guud la galayo ayaa lagu tibaaxi.
6) Xubinka garsoorka ah ama magacaabista ah kadib marka uu dhamaystirto fursada waxbarasho ama tababar ee dalka gudihiisa ama dibadiisa ka helay dawladuna ka damaanad qaaday, waxa uu fursad waxbarasho oo kale u tartami karaa kaliya marka uu bixiyo adeegyadan hoos ku cad:
   B/ hadii dalka gudihiisa uu ka helay dhigriigiisa koowaad oo ku bartay habka waxbarasho ee habeenkii ah, summerka waa inuu 2sanno adeeg bixiyaa, hadii waxbarashadan ku bartay nidaamka caadiga ah(regular) waa inuu 3sanno adeeg bixiyaa.

T/ hadii dalka gudihiisa uu ka helay fursada dhigriiga labaad(master) oo ku bartay habka waxbarasho ee habeenkii ah, summerka waa inuu 1sano iyo 6 bilood adeeg bixiyaa, hadii waxbarashadan uu ku bartay nidaamka caadiga ah(regular) waa inuu 2sanno adeeg bixiyaa.

J/ hadii dalka gudihiisa uu ka helay fursada dhigriiga sadexaad (PhD) oo uu ku bartay habka waxbarasho ee caadiga ah (regular) waa inuu 4sanno adeeg bixiyaa.

X/ hadii uu dalka dibadiisa ka dhamaystay waxbarshada heerka dhigriiga oo uu ku bartay habka waxbarasho ee caadiga ah waa inuu 3sanno adeeg bixiyaa, hadii uu master (dhigriiga labaad) kasoo bartayna waa inuu waa inuu adeeg bixiyaa 2sanno & 6 bilood, hadii uu PhD kasoo bartayna waa inuu 4sanno adeeg bixiyaa.

7 waxa tirada xubanaha u fadhiisanaya imtixaanka fursada waxbarashada ee dhaadheer, lagu go'aamin ayadoo lagu salaynayo saamiga(ratio) kasoo baxa tirada garsoorayaasha/magacaabista ee ka shaqeeya maxkmada guud, maxkamada sare ama maxkamada degmooyinka.

8 Sida ku cad farqada "7" ee qodobkan xubnaha garsoorayaasha/magacaabista ah ee u fadhiistay imtixaanka , intooda waxbarashada galaysa waxa lagu kala saari ayadoo lagu salaynayo tirada xubnaha ay maxkamada guud u qorshaysatay inay fursad waxbarasho sanadkaas siiso, taasoo lagu kala saarayo sida natiijada ay imtixaanka ka keenaan u kala sarayso.

9 Ayadoo arrinka ku xusan farqada "8" ay sideeda tahay, hadana hadii loo baahdo in la isku dheeli tiro kaalinta dumarka & raga ee waxbarshada galaya, masuuliyiinta maxkamada guud waa ay isku dheeli tiri karaan ayagoo kaalinta dumarka aan ka badinayn 1/3.

7 SHURUUDAHA LOOGU TARTAMAYO WAXBARSHADA IYO DHIBCAHA LAGA QABANAYO.

B/ Natiijada shaqada uu xubinku ka keenayo**……...….30%**

T/Mudada uu adeega bixinayay**…….30%**

J/Dhibcaha Waxbarshada/GPA/**……20%**

X/Tayada kaydka/documentation**……..……15%**

KH/Dumarka waxa u dheer **……...5%**

8. HABKA DHIBCO SIINTA TARTANKA WAXBARSHADA

1. si loo ogaado dhibcaha uu tartamuhu ka helayo 30% , waa inay natiijadu noqoto kala badh iyo inkabadan marka la isku daro natiijada qiimaynta shaqada xubinka oo la qabto laba goor, ama hadii aanu xubinku lahayn natiijada qiimaynta shaqada ee labada goor la qabto, inta qiimaynta natiijada shaqada ee hal mar la qaato ayaa hadii ay kala-badh iyo inkabadan noqoto waxa lagu dhufan 0.3 sidaasna natiijada soo baxda lagu qaadan.

2. Natiijada uu xubinka tartamayaa ka helayo 30% ee ah mudada adeeg bixintu waxay noqon: hadii uu xubinku shaqaynayay mudo 15sanno iyo inkabadan waxaa la siin 30%, ama hadii uu xubinku shaqaynayay 11 ilaa 14sanno iyo 11biloo waxaa lasiin 26dhibcod, ama hadii xubinku shaqaynayay 8 ilaa 13 sanno iyo 11 bilood, waxa lasiin 22dhibcood, ama hadii uu xubinku shaqaynayay 5 ilaa 12 sanno iyo 11 bilood waxa la siin 18 dhibcood, ama hadii uu xubinku shaqaynayay 4 ilaa 11 sanno iyo 12bilood waxa xubinka lasiin 15 dhibcood.

3. sida ku cad farqada 2 ee qodobkan marka natiijada ku saabsan mudada uu shaqeeyay xubinku la bixinayo, waxa lagu xisaabtami oo laga duuli mudada guud ee uu xubinku usoo shaqeeyay hay;ada garsoorka sidaasna lagu siin dhibcihiisa uu istaahilo.

4. Natiijada uu xubinka tartamayaa i ka helayo natiijada laga qabanayo dhibcihiisa waxbarasho(GPA) ga waxa loo xisaabin sidan: xubinku ugu yaraan waa inuu marka hore haystaa 2.0 kadibna natiijada waxabarashadiisa (GPA) ayaa lagu dhufan 5 sidaasna loogu hayn dhibcaha ay u noqoto.

5 natiijada uu xubinka tartamayaa ka helayo dhibcaha laga qabanayo da'yaridiisa 10%, waxa lagu ogaan sidan: ayadoo wakhtiga dhalashada xubinka lagasoo qaadanayo faylka xubinka shaqaalaha ah, ayaa hadii ay da'da xubinku noqoto 55jir iyo inkabadan waxa lasiin 0%, hadii ay da'adiisu noqoto 51jir ilaa 54jirna waxa lasiin 2dhibcood, hadii ay da'diisu noqoto 47 ilaa 50 jir waxa lasiin 4 dhibcood, hadii ay da'diisu noqoto 43 ilaa 46 jir waxa lasiin 6dhibcood, hadii ay da'diisu noqoto 39 ilaa 42 jir, waxa lasiin 8 dhibcood, hadii ay da'diisu noqoto 23 ilaa 38 jir waxa lasiin 10 dhibcood.

6. natiijada uu xubinka tartamayaa ka helayo dhibcaha laga qabanayo xogta faylkiisa 10%, waxa lagu ogaan sidan; hadii uu xogta faylkiisa ay nadiif tahay ama ganaaxa lasaaray lagala noqday hab sharciga waafaqsan, waxa lasiin 10%

7. Natiijada xubinka tartamaya laga siinayo 5 dhibcood ee isku dheelitirka dhadiga iyo labka, waxa lagu ogaan kadib marka loo xisaabiyo sida kor ku cad ayaa 5 dumarka lasiinayo loogu dul dari xubinka dhadiga ah dhibcaha uu keenay ee kale.

9. **SHURUUDAHA LOOGA BAAHANYAHAY FURSADAHA TABABARADA GAAGAABAN**

Mab'da ahaan maadaama tababarrada gaagaban ay yihiin kuwo lagu daboolo goldalooyinka hadba kasoo ifbaxa geedisocodka shaqada, noocyada tababarada iyo tirada ka faa'iidaystayaasha tababaradaasi waxa go'aamin ama xulan maxkamada guud, sidaas daraadeed waxa aan muhiim noqon Karin in tababaradan gaagaaban loo isticmaalo shuruudaha loogu tartamo fursada waxbarashada. Hase yeeshee hadii ay fursado ka yimaada dalka gudihiisa ama dibadiisa loogu baahdo in la kala saaro xubnaha garsoorka/magacaabista ah ee ka faa'iidaysanaya tababarka waxa la isticmaali karaa:

B/ xubinka garsoorka ah ama magacaabista ah ee hada ka hor tababar noocan ah dalka gudihiisa ama dibadiisa ku soo qaatay si uu ugu tartamo mid kale, waa inuu ugu yaraan horta u adeego hay'ada hal(1) sanno.

T/Xubnaha u tartamaya fursadaha tababar ee ay maxkamada guud sida tooska ah u bixiso, fursad kale oo tababar noocay doonto ha noqotee uma tartami karo ilaa uu xubinku ku guuldaraysto tartanka uu ugalay fursada ay maxkamadu bixisay, ama ilaa hay'ada fursadann bixisay ay cadayso in uu wakthiga tababarku dhaafay xubinka kaasoo lagu salaynayo jadwalka wakhtiga tababarka.

J/ Xubnaha u tartamaya fursadu waa inay ugu yaraan hal sanno ku adeego garsoore nimo ama magacaanbista uu yahay.

X/ Mudada hawl gabka ee xubinka tartamaya ugu yaraan waa inay hal sanno ka hadhsantahay.

KH/ hadii loo baahdo in garsoorayaasha lagu tartansiiyo fursadaha tababarada gaagaaban, looguna kala saaro waxa loo isticmaali karaa shuruudaha tartanka waxbarashada ee ku cad isla qaybtan, qodobada 7 iyo 8.

D/ Hadii ay maxkamaduhu iskood u diyaarsanayaan ama ay la kaashanayaan xarumaha tababrada ee dalka gudihiisa ka jira ama iyo kuwa tacliinta sare ee dalka oo ay tababaro ku helayaan maxkamadahaas ayagaa u awood leh go'aansanna karana, hase yeeshee liistada/xogaha oo tafatiran waa inay maxkamada guud soo ogaysiiso.

2. Hadii fursada tababarada gaagaaban laga helo dalka dibadiisa oo aanay u baahnayn xirfad/karti gooni ah oo waajib ah, waxa xubnaha u tartamaya lagu kala saari oo kaliya hab tartan ah ayadoo la raacayo shuruudaha ku xusan qodobka 7 iyo 8.

QAYBTA SADDEXAAAD

NIDAAMKA FASAXA IYO RAADSIGA FURSADA WAXBARASHADA, XUQUUQAHA IYO WAAJIBAADYADA KA FAA'IIDAYSTAYAASHA, IYO WALIBA MASUULIYADA MAXKAMADAHA KA SARAN XUBINKA KA FAA'IIDAYSANAYA FURSADA.

10. Raadsiga Fursada Waxbarashada iyo Fasax Siinteeda.

1) Hadii fursada waxbarasho ee scholarship ka ah uu shakhsigu si iskii ah u helo ama hadii fursadan maxkamada lasiiyo, waxa arrinkan la ogasiin maxkamada guud, maxkamada guud na ayadoo hadba eegaysa sida xaalku yahay waa ay ogolaan kartaa, hase yeeshee hadii fursada waxbarasho ee la helay ay tahay dhigriiga sadexaad (PhD), fasaxa inta gudiga maamulka garsoorka loo soo bandhigo ayaa la ogolaan.

2. Ayadoo arrinka ku xusan farqada 1 ee qodobkan ay sideeda tahay, hadana hadii ay jiraan xubno iskood intay u raadsadeen u helay fursada waxbarasho, imtixaankiina u fadhiistay kuna guulaystay ka hor inta aanay bilaabin waxbarashada waa inay fasax ka helaan maxkamada guud.

11. XUQUUQDA TABABARTAYAASHA

Xubikasta oo kamid ah garsoorka ama xubnaha magacaabista ah, oo loo fasaxay inuu dalka gudihiisa ama dibadiisa tababar/waxbarasho kusoo qaato waxa uu yeelanayaa xuquuqahan hoos ku cad:

1. Hadii kharashka ku baxaya waxbarashada ay maxkamada guud daboolayso, asagoo ku salaynaya heshiiska lala galayo xarunta tababarka/waxbarashada bixinaysa, waxa uu xubinku xaq u leeyahay inuu maxkamada guud waydiisto in ay kharashkaas uga bixiso.
2. Mudada uu waxbarashada ku guda jiro waxa uu xaq u leeyahay inuu helo musharkiisa iyo gunnooyinka kale ee uu sharcigu u xeeriyay.
3. Hadii uu waxbarashada/tababarka awgii uu safaro kala duwan u galo, waxa uu xaq u leeyahay in lasiiyo kharashaadka safaradaas (noolka) & habeen dhaxa ayadoo lagu salaynayo awaamiirta bixinta kharashaadka.
4. Marka uu dhamaysto waxbarashada hadii looga baahdo inuu qoro buuga qalinjabints(research), oo aan xarunta uu waxkabarto aan laga siin kharashka buuga lagu qorayo oo dhamystiran, ama hadii lacagta xaruntu siisay ay ka yartahay lacagta deegaanku u siiyo mawduucyo la mid ah kan buuga uu ka qorayo, farqiga u dheexeeya ayuu xaq u leeyahay inuu yidhaah ha la isiiyo ayadoo la raacayo awaamiirta bixinta kharashaadka
5. Isla marka uu tababarka/waxbarashada soo dhamaysto ee uu ku soo wargaliyo maxkamada, waxa uu xaq u leeyahay in ugu mudo 15maalmood gudeheed ah lagu meeleeyo boos shaqo, mudadaas oo ka bilaabmaysa maalinka warbixintu soo gaadhay maxkamada.

12. **WAAJIBAADKA XUBINKA**

1. Waxa ku waajib ah xubinka fursada helay inuu goobta waxbarashadu/tababarku ka dhacayo uu ku sugnaado oo uu lasocdo tababarka/waxbarashada.

2. Waxa ku waajib ah in waxbarshada/tababarka lasiiyay uu si habsami leh u la socdo dadaal na u ugalo sidii uu natiijo wacan uga keeni lahaa.

3. Marka ay fursadu tahay waxbarashada uu wakhtigeedu dheeryahay, waxa xubinka ku waajib ah inuu hadba sida loogu baahdo kasoo warbixiyo heerka ay marayso waxbarashadii loo diray.

4. Marka uu waxbarashadiisa dhamaystirto ee uu soo qalinjabiyo, waa inuu mudo aan ka badnayn 15maalmood gudeheed kusoo wargaliyaa goobtiisii shaqo.

5. Marka uu waxbarashada dhamaystirto ee uu soo qalanjabiyo, waa inuu waajibaadkiisii kasoo baxaa ayadoo lagu salaynayo heshiiskii uu galay wakhtigii uu waxbarashada bilaabi rabay.

6. Waxa ku waajib ah inuu ka shaqeeyo goobta ay ku meeleyso maxkamada guud.

13. WAAJIBAADKA MAXKAMADAHA

1. Marka ay jiraan fursado lasiiyo maxkamadaha oo aanay ogayn maxkamada guud, ama hadii ay jiraan tababaro lagu helo heshiisyada mashaariicaha (projectyo) awgeed, waxa ku waajib ah maxkamada fursadan heshay inay ogaysiiso maxkamada guud oo ay fursadan dhaqangaliso kaliya marka ay maxkamada guud ogolaato.

2. Xubinka garsoorka ah ama ka magacaabista ah ee fasax ama shaqo awgeed uga maqnaa tartanka lehna karti uu ku tartamo, waa inuu tartanka ka qaybgalo.

3. Waxa ku waajib ah inay tartamada tababarada u fuliso hab waafaqsan awaamiirta la xidhiidha, xogaha xubnaha ku guulaysta tartankana waa in cida ay khusyaso loo gudbiyaa loogu gudbiyaa goorta ugu haboon.

4. Hadii aanay jirin cid tartamaysa ama cid buuxinaysa shuruudaha tartanka, inta aanay gabagaboobin mudada tartanku waa in la ogaysiiyaa cidii fursada ina siisay.

5. Hadii geedisocodka tartanka ama natiijada tartanka laga qabo cabasho, waa in cabashooyinkaas lagu baadho jawaabna lagaga bixiyaa mudo ka yar 3maalmood.

6. Waa in la xaqiijiyo in garsoorayaasha ama xubnaha magacaabista ah ee ku guda jira tababarada gaagaaban iyo kuwa dhaadheer, ay buuxiyeen foomamka kiliiraansiga, heshiiska waajibaadka iyo wakiilka mushaharka.

7. Waa in la dabagalo in xubnaha soo dhamaystay waxbarashada/tababarka ay iskasoo warbixiyeen, oo hadii ay iskasoo warhixiyeenna waa in mudo 15 maalmood gudeheed ah loogu meeleeyo booska shaqo ee ku haboon.

8. Xubinkasta oo waajibaadkiisa ugasoo bixiwaaya sida ku cad heshiiskii lala galay ka hor inta aanu waxbarashada/tababarka bilaabin, waa in sida ugu dhakhsaha badan loo ogaysiiyaa arrinkan xafiiska cadaalada ayadoo la isku raacinayo heshiiskii lala galay iyo docukumentyada kale ee muhiimka ah.

14. OGAYSIIS UGU YEEDHIDA TARTAMAYAASHA

Marka laga hadlayo nuxurka ogaysiiska, ayadoo ay sidooda yihiin shuruudaha xarunta tababarka/waxbarashada bixinaysaa ay ku xidhayso xubinka fursada la siiyay hadana ogaysiiska loogu yeedhayo xubinka waxa uu ka koobnaan karaa xogahan hoos ku xusan:

1. Nooca Tababarka
2. Goobta Tababarka
3. Wakhtiga tababrka la bixinayo iyo mudada ay qaadanayso
4. Tirada ka qaybgalayaasha tababarka ee loo baahanyahay
5. Nooca iyo heerka aqoonta e looga baahanyahay xubinka, xirfada u gaarka ah ee uu leeyahay iyo khibrada shaqo ee looga baahanyahay, sijiga, goobta iyo goorta tababarka
6. Goobta la isku diwaangalinayo, goorta la isdiwaangalinayo iyo saacada diwaangalinta.
7. Taariikhda, bisha iyo sanadka uu ogaysiisku soo baxay.

15 MUDADA UU OGASIISKU DHAGANAANAYO IYO NIDAAMKA DIWAANGALINTA XUBNAHA

1. Hadii aanay xaga wakhtiga cidhiidhi ka jirin, ugu yaraan ogaysiisku waxa dheganaanayaa mudo 10maalmood oo isdaba joog ah kuna dheganaanayaa barta ogaysiiska loogu talo galay.
2. Hadii uu xaga wakhtiga cidhiidhi ka jiro oo tababarku deg-deg yahay, si aan fursada loo beer darraynin waxa uu ogaysiisku dhegenaan 5maalmood oo isdaba joog ah, maalmo shaqona ah ayadoo loo eegayo hadba sida xaalku yahay.
3. Mudada 10 ama 5 maalmood ee isdaba-jooga ah ogaysiiskuna dhegenaanayo, diwaangalintu waa inay garab socoto oo ay dhamaystiranto.

16. TAAGEERADA AY ISTAAHILAAN DADKA NAAFADA AH IYO DUMARKU

Ayadoo ay sideeda tahay dhibcaha badhi-gantaalka ah ee lasiiyo gabdhaha wakhtiga tartanka, hadana:

1. Hadii xubnaha sinjiga kala duwan ah ay keenaan dhibco siman ama isku-mid ah, mudnaanta waxa lasiin dumarka.

2. Hase yeeshee ayadoo ay sideeda tahay arrinka lagu xusay farqada 1 ee qodobkan, hadii ay dumar garsoorayaal ah ama kuwo xubnaha magacaabista ah ka tirsan ay tartanka ka qaybgalaan oo ay keenaan dhibco gaadhaya 50% iyo in ka badan, mudnaan bay leeyihiin.
3. Ayadoo ay sidooda yihiin arrimaha ku xusan farqada 1 ee qodobkan, hadii dumarka tartamaya ay ayagu dhibco isku-mid ah keenaan waxa lagu lakala saari natiijada ay ka keenaan shaqada ay hayaan.
4. Hadii ay dhibco isku-mid ah ka keenaan dhanka ka midho dhalinta shaqada, waxa lagu kala saari mudada ay adeega bixinayeen sida ay u kala badantahay.
5. Hadii ay mudada ay adeega bixinayeena ay kukala hadhi waayaan, bakhtiyaa-nasiib ayaa loo tuuri.

QAYBTA AFRAAD

QODOBADA GAARKA AH

17. Garsooraha iskii shaqada iyo mushaharka uga taga ee waxbarashada si iskii ah u wata, marka uu soo dhamaysto waxbarashada hadii uu soo codsado inuu ku soo laabto shaqada, maxkamada guud ayaa arrinka usoo bandhigi gudiga maamulka garsoorka.

18. Xubnaha waxbarashada wata dadaalka ay wadaan awgii hadii ay keenaan dhibcaha aadka u sareeya (excellent performance) oo sidaa daraadeed fursad loo siiyo inay wataan waxbarashada ama hadii ay jiraan su'aalo noocaas ah oo loo soo bandhigo, waxa su'aalaha noocan ah loo soo bandhigi oo ka go'aan gaadhi maxkamada guud.

19. xubinka u tartamay tababar dalka gudihiisa ama dibadiisa ah ee helay fursada kuna guulaystay, hadii aanu ka faa'iidaysan tababarkii uu ku guulaystay ama hadii uu tababarka intuu bilaabay uu dhexda kaga hadhay, ayaa inta sababta loo soo bandhigo maxkamada guud ayaa hadii ay macquul noqonwaydo sababtu, tababar kale uma tartami karo mudo 6 bilood ah waa hadii uu ugu horayntiiba fursada hore aanu bilaabin, hadii inta uu bilaabay waxbarashada hore uu dhexda kaga baxayna mudo 1 sanno ah uma tartami karo fursad kale.

20. hadii cabashooyin ka jiraan nidaamka bixinta fursadaha waxbarasho/tababar inta cabashadan loo gudbisto hadba gudoomiyaha maxkamada ee aagaas, ayuu xal ka gaadhi, hadii go'aanka gudoomiyaha cabasho laga qabona, gudoomiyaha maxkamada ee ka saraysa ayaa loola tagi cabashadaas, hadii go'aanka dambe uu xubinku ku qanci waayona waxa uu cabashadiisa u gudbisan gudoomiyaha maxkamada guud. Go'aanka uu gudoomiyaha maxkamada guud ka gaadho arrinkan waxa uu noqon midka ugu dambeeya.

21. Ayadoo arrinka ku xusan qodobka 20 uu sidiisa yahay, hadana hadii cida soo cabanaysa ay tahay garsoore ka tirsan maxkamada ama xubin magacaabis ah waxa uu cabashadiisa u gudbisan xafiiska maamulka garsoorka, hadii uu go'aanka xafiiskaas kasoo baxa uu ku qanci waayo waxa uu cabashadiisa ula tagi karaa gud.maxkamada guud, go'aanka uu gudoomiyuhu bixinayaana waa ka ugu dambeeya.

22. Ayadoo arrimaha ku xusan qodobka 20 iyo 21 ay sidooda yihiin, hadii cabashadu ku saabsantahay fursad waxbarasho oo PhD (dhigriiga sadexaad) ah, racfaanka ugu dambeeya waxa ku go'aan gaadhi gudiga garsoorka ee heer deegaan.

23. Hadii uu xubin waxbarashadiisa ka bilaabay nidaamka waxbarasho ee habeenkii, todobaadka (week end) ama xagaaga(summerka) uu borogramkii uu bilaabay la xidho, oo uu fursad kalena waayo waxa uu waxbarashadiisa ka wadan karaa nidaamka caadiga ah (regular).

24. Hadii xubin garsoorka kamid ah ama xubin magacaabis ah oo fursad waxbarasho lasiiyay uu asagoon waajibaadkiisii ku cadaa heshiiska gaba-gabaynin, shaqo dawladeed oo kale ama magacaabis

la siiyo, sida xogaha kaleba loogu cadeynayo mudada waajibaadka ee u hadhsan waxa lagu tibaaxi warqada kiliiraansiga ah ee la siinayo.

25. Xubnaha waxbarashada wata ee sababo aan macquul ahayn usoo gudbista codsi shaqo ka tagis ah, waxa laga qaadi kharashkii waxbarashada awgeed lagaga bixiyay ka hor inta aan laga aqbalin codsigooda.

26. Fursadaha waxbarasho ee laga helo dalka gudihiisa ama dibadiisa kaasoo lagu helayo dadaalka uu shakhsigu si iskii ah u samaynayo, waxa la bilaabi karaa ama la dhaqangalinkaraa fursadaas kaliya marka ay maxkamada guud aaminto fursadaas una fasaxdo xubinka. Xubinka garsoorka ah ama magacaabista ah ee fursad tababar si iskii uga helay dalka dibadiisa ama gudihiisa loona fasaxay inuu ka faa'iidaysto, waajibaadyada iyo xuquuqaha xubnaha ee kucad awaamiirtan dhaqan-gal bay ku ahaanayaan xubinkaasna.

27. Ayadoo ay sideeda tahay arrinka ku xusan qodobka 26 ee awaamiirtan, waxay maxkamada guud u fasixi kartaa xubnaha tababarada iyo fursadaha waxbarasho ee laga helay dalka dibadiisa, waa kaliya hadii fursad noocan ah aan laga helayn dalka gudihiisa, hadii tababarka noocan ah aanay maxkamaduhu bixinayn, hadii tababarka laga helayo xirfad ama aqoon cusub/gaar ah iyo hadii ay jiraan waxyaalo gaar ka dhigaya tababarka noocan ah.

28. Hadii uu xubinka garsoorka ama magacaabista ah uu u tartamo fursado waxbarasho ama tababar oo uu intuu laba goor galo imtixaanka uu ku guuldaraysto, waxa uu fursad kale u tartami karaa oo kaliya kadib marka uu hal wareeg oo waxbarasho loo tartamayo ay dhaafto.

29. AWAAMIIRTA AAN DHAQANGALKA AHAYN

Awaamiir kasta ama qaab-shaqeed kasta oo lid ku ah awaamiirtan, dhaqan gal kuma ahaanayaan arrimaha lagu xusay awaamiirtan.

30. AWOODA WAX KA BADAL EE AWAAMIIRTAN

Awaamiirtan waxa wax lagaga badali karaa fadhiga gudiga maamulka garsoorka oo kaliya.

31. WAKHTIGA AWAAMIIRTU DHAQANGALAYSO

Awaamiirtan waxay dhaqangalaysaa marka uu gudiga maamulka garsoorku ansixiyo shir.gudoonka gudiguna sexeexo lana daabaco.

Mawliid Kaasow Axmed

Gudoomiyaha Maxkamada Guud ee DDS

DAWLADDA DEEGAANKA SOOMAALIDA

MAXKAMADDA GUUD

Maxkamadda guud ee DDS

AWAAMIIRTA HABKA XULASHADA IYO MEELAYNTA GARSOORKA.

AWAAMIIR LAMBARTA___ /2014T.I.

ARAR

Maadaama loo baahday im maxkamadaha Dawlad Deegaanka Soomaalida lagu xoojiyo garsoor waxbartay, anshax wanaagsan leh, khibrad iyo xirfad ba u leh hawlaha garsoorka.

Maadaama madax-banaanida garsoorka la ilaalin karo laguna dhaqmi karo marka la isku-dubarido xubno garsoor oo tayo leh, oo adeega ay hay'ada garsoorku bixinaysona ka dhigi kara mid hufan, sal balaadhan oo ku dheehan madax-banaani iyo isla-xisaabtan taasoo kaalin mug-weyn ka qaadanaysa aaminaada/kalsoonida ay shacabku ka qabaan hay'ada garsoorka.

Maadaama ay muhiim tahay in nidaamka xulashada & meelaynta garsoorka lagu hago hab cad-cadaan leh, sal balaadhan oo kalsooni ku dheehantahay kaasoo ay waliba ka qaybqaadan karaan khuburada ka baxsan hay'ada garsoorka.

Maadaama muhiim loo arkay in salka loo dhigo nidaam ku haboon kor u qaadida kaalinta dumarku ay ku leeyihiin hay'ada garsoorka.

Maadaama muhiim loo arkay in la dajiyo nidaam tartan ah oo natiijo lagu helayo, kaasoo lagu dhiirigalinayo garsoorka mudada dheer ka shaqeeyay hay'ada garsoorka si khibrada garsoor loogu gudbiyo hadba heerarka maxkamadaha ee kala duwan.

Ayuu gudiga maamulka garsoorka ee DDS asagoo ka duulaya Bayaanka aas-aasida Gudiga Maamulka Garsoorka ee Dawlada Deegaanka Soomaalida ee …….2014 qodobadiisa 12(1) (M), 26(3) uu soo saary awaamiirtan.

Qaybta Koowaad

1. **Ciwaan Gaaban**

   Awaamiirtan waxa lagu magacaabi karaa "Awaamiirta ku soo Baxday Habka Xulashada iyo Meelaynta Garsoorka maxkamadaha DDS" ee tirsigeedu yahay:……..2014.

2.Qeexid

Hadii eraygu aanu macne kale samaynayn, awaamiirtan gudeheeda :

1. **"Gole"** waa Golaha Xildhibaanada ee Deegaanka Soomaalida.
2. **"Bayaan"** Bayaanka aas-aasida Gudiga Maamulka Garsoorka ee Dawlada Deegaanka Soomaalida.
3. **"Gudi"** waa Gudiga Maamulka Garsoorka ee Heer deegaan ama gudiga Heer Gobol.
4. **"Garsoore"** waa xirfadle sharci oo hab waafaqsan sharciga, guddigu ugu xulay goluhuna ugu ansixiyay inuu adeeg bixin garsoor ka bixiyo ama garsoorenimo kaga shaqeeyo qaab dhismeedka maxkamadaha kala duwan ee deegaanka.
5. **"Xubin Magacaabis ah"** waa xirfadle sharci oo uu gudigu u xulo kuna meeleeyo xafiis hoosaadyada, waaxaha iyo boosaska kale duwan ee maxkamadaha, waxaana kamid ah: masuuliyiinta xafiis hoosaadyada, gadh-wadeenada g/socodyada, registraalada, qareemada dawlada, kal-kaaliyayaasha garsoorayaasha, kalkaaliyayaasha registraalada, iyo xirfadlayaasha kale.
6. **"Xulasho"** Waa geedisocodka lagu tartansiinayo xubnaha u tartamaya inay garsoore nimo ku adeegaan, kuwaasoo la horgeeyo golaha deegaanka si ay u ansixiyaan.

3 Xadka Dhaqangalka

Awaamiirtan ayadoo dhaqan gal ku ahaanaysa laga bilaabo geedisocodka xulashada xubnaha garsoorka u noqonaya maxkamadaha heerarkooda kala duwan, ilaa hor gaynta xubnaha golaha xildhibaanada ee deegaanka si ay u ansixiyaan ayay hadana hadba sida ay ku haboontahay waxay dhaqan gal ku ahaanaysaa awaamiirtu habka xulashada xubnaha uu goluhu ansixinayo.

4. Ujeedada

Ujeedada awaamiirtan waa in shuruudaha ay ku tartamayaan/loolamayaan xubnaha loo magacaabayo in garsoore ay ka noqdaan maxkamadaha deegaanka, laga dhigo kuwo (shuruudaha) sii diyaarsan oo lasii ogyahay ka hor inta aanu dhicin tartanka xubnaha garsoorka noqonaya, in nidaamka xulashada xubnaha garsoorka noqonaya lagu saleeyo mab'da cad-cadaanta iyo in la xaqiijyo in xubno huwan anshax wanaagsan, lehna aqoon iyo waayo aragnimo ku filan loo magcaabo garsoorenimada maxkamdaha deegaanka.

5. Awoodaha iyo Shaqooyinka Gudiga

Ayadoo ay awoodaha iyo masuuliyada gudiga ee lagu xusay shuruucda kale ay sideeda tahay, hadana gudigu waxa yeelan awoodahan iyo shaqooyinkan lagu xusay awaamiirtan:

1. Waxa uu si guud ula socon nidaamka xulashada xubnaha garsoornimada u tartamaya.
2. Waxa uu u kuur gali fikirka uu soo dhigayo shir gudoonka gudigu ee ku saabsan aas-aaska gudiga xulida garsoorka, waxa uu go'aamin aas-aaska gudiga xulida garsoorka.
3. Waxa uu go'aamin ogaysiisyada/baaqa lagu baafinayo boosaska shaqada garsoorenimada iyo habka ogaysiisyadan lagu gaadhsiinayo xubnaha u tartamaya garsoorenimada, iyo waliba waxa uu gudigu go'aamin nuxurka shuruudaha lagu kala saarayo xubnaha.
4. Waxa uu baadhi warbixinnada iyo afkaarta go'aamada ah ee ay soo gudbinayaan guddiga ku meelgaadhka ah, wuuna ka go'aan gaadhi.
5. Waxa uu go'aamin in xubnaha ugu natiijada sareeya marka la eego shuruudaha lagu kala saarayo loo magacaabo garsoorenimo, waxana uu liistada xubnahan u gudbin golaha xildhibaanada si uu goluhu u ansixiyo.
6. Hadii loobaahdo waxa uu gudigu awoodaa inuu fulinta nidaamka xulashada garsoorka u wakiisho guddi hoosaad hawshaas u fuliya.

6. Awoodaha iyo shaqooyinka Xafiis Hoosaadka

Ayadoo ay sideeda yihiin awoodaha iyo shaqooyinka xafiis-hoosaadyada ee lagu xusay bayaanka, hadana xafiis hoosaadku waxa uu yeelan awoodaha iyo shaqooyinkan lagu xusay awaamiirtan:

1. Waxa uu diwaangalin xubnaha soo codsanaya inay u tartamaan garsoorenimo ama asagoo wakiilasho samaynaya ayuu suurto galin karaa in xubnahan la diwaangaliyo.
2. Guud ahaan waxa uu isku dubariddi geedisocodka xulashada, had iyo jeerna waxa uu shirgudoonka gudiga uga warbixin heerka uu marayo geedisocodka xulashadu.
3. Waxa uu baadhi cadeyamaha kala duwan ee ay soo dhaweystaan tartamayaashu, asagoo ku salayanaya shuruudaha waajibaadka ah ee awaamiirta lagu xusay.
4. Waxa uu isku-habayn cadeymaha ay soo dhaweystaan xubnaha tartamaya, si haboonna waa loo xafidi, marka uu goluhu waydiiyona waa uu u gudbin.
5. Waxa uu isku dubaridi diyaarinta, bixinta iyo sixida imtixaanaadka qoraalka ah ee laga qaadayo xubnaha garsoorenimada u tartamaya, arrinkana waxa uu uga warbixin shir gudoonka gudiga.
6. Waxa uu qaabili cabashooyinka ku saabsan natiijada imtixaanka qoraalka ah, waa uu baadhi, wuuna ka go'aan gaadhi cabashooyinkan asagoo sida ku cad qodobka 25/3/ ee awaamiirtan kala tashanaya guddiga imtixaanaadka.
7. Waxa uu hadba sida ay ku haboontahay soo ururin afkaarta/talooyinka dadweynaha, waa uu isku-habayn, jawaabaha kasoo baxana asagoo sida warbixinada oo kale iskugu habaynaya raacinayana guud ahaan natiijada tartanka ayuu u gudbin shirgudoonka gudiga.

7. Aas-aaska Gudiga ku Meelgaadhka ah ee Xulashada.

1. Gudigu waxa uu awoodaa inuu inta lagu guda jiro heerarka kala duwan ee geedisocodka xulashada garsoorayaasha, uu aas-aaso gudi ku meelgaadh ah ama in la aas-aaso gudi heer gobol ah kaasoo qaata masuuliyada geedi-socodka xulashada garsoorayaasha.

2.Gudigu waxa u yeelan xubno dhan sadex(3) ilaa shan(5) xubnood.

3. Xubnaha gudiga waxa dooran gudiga maamulka garsoorka asagoo shir-gudoonka gudiguna uu soo dhigayo.

4. Gudiga maamulka garsoorka ayaa dooran gudoomiyaha gudiga iyo xoghaynta gudigaba.

5. Hadii uu gudigu awoodi waayo inuu iskuwada raaco go'aamada, waxa dhaqan gal noqonaya go'aanka ay u codeeyan xubnaha ugu tirada badan gudigu.

6. Ayadoo ay sideeda yihiin shuruudaha lagu xusay qodobkan farqadiisa 1aad ilaa 5aad, gudiga ku meelgaadhka ahi waxa uu u fulin shaqooyinka hab waafaqsan awaamiirtan loogu igmaday xafiis hoosaadka, asagoo gudigu ka duulaya ammarada kasoo baxa shir gudoonka gudiga garsoorka.

8. Qorshaha Sanadlaha ah ee Baahida Cududa Shaqaale

1. Waxa boosaska shaqo e garsoorenimada ah, ama boosaska shaqo ee garsoorenimo ee soo cusboonaada xubnaha u tartamaya loo soo xuli, ayadoo lagu salaynayo qorshaha cududa shaqaale ee uu gudiga maamulka garsoorku ansixiyo horraanta sanad kasta.

2. Ayadoo ay sideeda tahay arrinka lagu xusay qodobka farqadiisa 1aad, hadii uu gudiga maamulka garsoorku aamino in ay jirto baahi cudud shaqaale waxa uu had iyo jeer go'aamin karaa, in la sameeyo xulashada garsoorka ayadoo lagu salaynayo awaamiirtan.

3. Shirgudoonka gudiga maamulka garsoorku waxa uu codsi nuxurkiisu yahay in lasoo xulo garsooreyaal u gudbin karaa gudiga maamulka garsoorka, asagoo shir gudoonku ka duulaya baahiyaha garsoor ee ay maxkamaduhu qabaan.

4. Gudigu asagoo eegaya hadba muhiimada codsiga ee loo soo gudbistay, ayuu go'aamin karaa aas-aaska gudi ku meelgaadh ah iyo in la bilaabo diwaangalinta xubno u tartama garsoorenimo.

9. Shuruudaha Xubinka Tartamaya

1. Ayadoo ay sideeda yihiin shuruudaha waajibka ah ee ku xusan awaamiirtan, hadana gudiga Maamulka garsoorku waxa uu ansixin karaa shuruudaha xubnaha u loolamaya garsoorenimada, kuwaasoo uu soo dhigo shir gudoonka gudiga maamulka garsoorka.

2. Shuruudaha la ansixiyayna waxa la gaadhsiin gudiga xulida iyo xafiis hoosaadka.

10. Furasad Siinta Xubnaha U Tartamaya Garsoorenimada.

1. Ogaysiisyada ku soo baxaya boosaska shaqo ee garsoorenimada inta ay diyaariyaan gudiga maamulka garsoorku, ayaa lagu dhajin goobaha ogaysiiska loogu talo galay ee maxkamadaha ama xafiis-hoosaadka, ama lagu daabici madbacaadaha kale ee sida fudud ku gaadhaya dadweynaha, laguna faafin xog-baahiyaha electronics ah iyo qalabyada kale ayaa sidaas dadka lagu gaadhsiin.

2. Ayadoo ay sideeda tahay arrinka ku xusan qodobkan farqadiisa 1aad, waxa uu gudigu awood u leeyahay inuu soo dhajiyo ogaysiisyo gudaha ah hadii uu u arko in ay muhiim tahay.

Ayadoo lagu salaynayo qodobkan farqadiisa 2aad, tartamayaasha uu gudigu fursada siinayo waxa kamid ah:

B/Xeer-ilaaliyayaasha

T/Garsoorayaasha maxkamadaha magaalooyinka

J/Sharciyaqaanada ka hawlgala hay'adaha dawlada ama la taliyayaasha.

X/Macalimiinta Dugsiyada Sharciyada ee Jaamacadaha.

KH/Macalimiinta iyo ardeyda xarumaha tababrada xirfadlayaasha hay'adaha cadaalada.

D/ Masuuliyiinta xafiis-hoosaadyada iyo qorayaasha go'aamada

R/Qareemada

4. Xubnaha loolamaya ee lagu xusay farqada 3 ee qodobkan waa inay buuxiyaan shuruudaha waxbarashada iyo waayo-aragnimada ee ugu hooseeya laguna xusay qodobka 13 iyo 14 ee awaamiirtan.

11. NUXURKA OGAYSIISKA

Ogaysiiska shaqada garsoorenimadu waa inay buuxiso:

B/Shuruudaha ku cad bayaanka qodobkiisa 20

T/Heerka Maxkamada

J/Shuruudaha ugu hooseeya ee lagu kala saaro xubnaha.

X/ Cadeymaha ay tahay inay soo dhaweystaan xubnuhu.

KH/Tirada cudada shaqaale ee loo baahanyahay iyo

D/Xogaha kale ee loo baahanyahay.

12. MUDADA UU OGAYSIISKU DHAGANAANAYO IYO DIWAANGALINTA.

1. Ogaysiis kasta oo boosaska shaqo ee garsoorenimada maxkamadaha heerarkooda kala duwan loo soo dhajiyaa i, waxay dhaganaanayaan oo dadku kusoo tartami karaan mudo aan ka yarayn 10maalmood oon kala go'lahayn ahna maalmo shaqo.

2. Mudada uu ogaysiiskan dhaganaanayo ee ku cad farqada 1 ee qodobkan tartamayaashu waa inay buuxiyaan foomka 1aad ee buuxinta shaqada ee ku lifaaqan awaamiirtan, ayagoo ku buuxinaya nidaam aan culays ku ahayn tartamayaasha oo ay waliba soo raacsadaan cadeymohooda looga baahanyahay.

QAYBTA LABAAD

NIDAAMKA QIIMAYNTA IYO SHURUUDAHA

QAYB-HOOSAADKA KOOWAAD

SHURUUDAHA WAAJIBAADKA AH:

13. HEERKA AQOONTA

1. Xubinkasta oo u tartamaya inuu garsoroore ka noqdo maxkamadaha gobolada iyo maxkamada guud waa inuu haystaa ugu yaraan heerka degriiga koowaad ee culuunta sharciyada, waana inuu soo dhaweystaa cadeynta tilmaamaysa inuu gudbay imtixaanka heer qaran ee looga baahanyahay sharci yaqaanka dhamaystay dhigriiga koowaad ee sharciyada.

2. Xubinkasta oo u tartamaya inuu garsoroore ka noqdo maxkamadaha degmooyinka waa inuu haystaa ugu yaraan heerka diplomaaga ee culuunta sharciyada, waana inuu soo dhaweystaa cadeynta tilmaamaysa inuu gudbay tijaabooyinka looga baahanyahay sharci yaqaanka dhamaystay heerka diplomaha ee sharciyada.

3. Ayadoo heerka aqoonta ee lagu xusay farqada 1 iyo 2 ee qodobkan ay yihiin kuwa ugu hooseeya ee looga baahanyahay xubinka tartamaya, ayadoo loo eegayo hadba tirade xirfadle sharci ee loo baahanyahay waxa mudnaanta loo kala siin hadba sida ay u kala dhibco sareeyaan iyo sida ukala heer sareeyaan xubnuhu.

14. WAAYO ARAGNIMADA IYO TABABARADA LOOGA BAAHANYAHAY XUBNAHA LOO MAGACAABAYO GARSOORENIMADA HEERARKA KALA DUWAN EE MAXKAMADAHA.

14.1**. Maxkamadaha Degmooyinka**

Waxa maxkamadaha degmooyinka garsoorenimo loogu magacaabi karaa xubnaha buuxiya shuruudaha hoos kucad:

B/ Xubin kusoo shaqeeyay garsoorenimo/xeer ilaalin/qareen IWM ugu yaraan mudo 4sanno ah, ama

T/ Ayadoo ay sideeda tahay shuruuda ku xusan farqada “B” ee qodobkan, hadana waxa uu gudiga garsoorku u soo xuli karaa garsoorenimo xubnaha ka shaqeeyay hay’adaha dawlig ah ee kale kuwaasoo haysta aqoonta sharci ee looga baahanyahay.

J/ Marka lasoo xulayo xubnaha u loolamaya garsoorenimada, dumarku mudnaan gaar ah bay yeelanayaan.

14.2.**Maxkamadaha Gobolada**

Waxa boosaska shaqo ee garsoorenimada maxkamadaha sare u tartami kara xubnaha haysta khibradaha hoos ku xusan:

B/ Xubin garsoorenimo kaga soo shaqeeyay degmooyinka ama maamul magaalooyinka ugu yaraan mudo 6sanno ah.

T/ Xubin maxkamada sare kaga shaqeeyay qareenimo, registraal iwm mudo 4sanno ah oo haysta aqoonta sharci ee looga baahanyahay.

J/xubin kusoo shaqeeyay macalin jaamacadeed ama tababare sharci kasoo noqday xarunta tababarada xirfadlayaasha hay’adaha cadaalada, kana soo shaqeeyay ugu yaraan mudo 6sanno ah.

X/ Xubin hay’adaha kale ee dawliga ah kaga soo shaqeeyay la talin sharci ama u ahaa qareen dawli ah uguna shaqeeyay ugu yaraan mudo 6 sanno ah.

Kh/Xubin x/ilaaliye heer deegaan ah soo ahaa mudo 2sanno ah.

D/ Ayadoo ay sidooda yihiin shuruudaha ku xusan xarfaha “B ilaa KH” ee farqada 2 ee qodobkan , hadii uu xubinku garsoorenimo kaga soo shaqeeyay maxkamada sare, asagoo hada shaqo kale ku dambeeyay sida x/ilaalin, qareen, la talin iwm garsoorenimadiisa horena khibrada waa loogu dari.

14.3. Maxkamada Guud

Xubinka buuxiya kuwa ugu hooseeya shuruudahan hoos ku xusan ayaa garsoorenimo ugu tartami kara maxkamada guud:

B/xubin maxkamada sare garsoorenimo kaga soo shaqeeyay oo ku soo shaqeeyay ugu yaraan mudo 6sanno ah.

T/Xubin maxkamadaha degmooyinka ama kuwa maamul magaalooyika kaga soo shaqeeyay garsoorenimo mudo aan ka yarayn 8sanno

J/Xubin maxkamada guud kaga shaqeeyay qareenimo, registraal iwm kuna shaqeeyay ugu yaraan 6sanno.

X/xubin kusoo shaqeeyay macalin jaamacadeed, ama tababare kasoo ahaa xarunta tababarada xirfadlayaasha hay’adaha cadaalada kuna shaqeeyay mudo 8sanno ah.

KH/Xubin xeerilaaliye heer deegaan soo ahaa ugu yaraan mudo 4sanno ah

4.Hadii uu xubinku garsoorenimo kaga soo shaqeeyay maxkamada sare ama maxkamada guud, asagoo hada shaqo kale ku dambeeyay sida x/ilaalin, qareen, la talin iwm garsoorenimadiisa horena khibrada waa loogu dari.

15. KA QAYBGALINTA QAREEMADA FURSADA GARSOORENIMADA

1/Hadii uu xubin qareen ahi uu doorbido inuu qareennimadiisa iska daayo oo uu garsoore ka noqdo heerkii maxkamadeed ee uu garsoorka ka ahaa hada ka hor, ama heerka ka sareeya kaasoo uu xubinku buuxinayo shuruuda looga baahanyahay heerka kasareeya heerkii uu garsoorenimo kaga soo shaqeeyay, wuu u tartami karaa garsoorenimada maxkamada uu garsoore nimo kaga soo shaqeeyay ama garsoorenimada maxkamada heerka ka sareeya.

2/ Hadii xubinka garsoorenimo usoo tartamay uu ku soo shaqeeyay garsoorenimo ama khibradaha sharci ee kale ka hor inta uunsan shaqadiisa qareenimada ah bilaabin, ayadoo la xaqiijinayo inuu xubinku buuxiyay shuruudaha u yaala heerka garsoorenimo ee uu u tartamayo, waa la aqbali karaa codsigiisa, khibradiisana waa loogu dari mudada uu soo shaqeeyay.

3/ Ayadoo ay sidooda yihiin shuruudaha ku xusan farqada 1 iyo 2, waxa codsiga tartanka garsoorenimo ee uu soo dhaweysto xubinka qareenka ahi la aqbali karaa marka uu soo dhaweysto cadeyn tilmaamaysa inuu xubinka leeyahay anshaxa looga baahanyahay garsooreyaasha, gudiga garsoorkuna uu baadho cadeyntaas kadibna gudigu aqbalo.

16. XUBNAHA MAGACAABISTA AH.

1. Xubinka magacaabista ah hadii uu inta aanu qabanin masuuliyada uu hada hayo ka hor uu soo ahaan jiray garsoore, oo uu soo gudbisto codsi ah in garsoorenimadiisii lagu soo celiyo, codsigaas waa laga aqbali ayadoo wax shuruud ah aan lagu xidhayn. Marka uu arrinkan oo kale jirona gudiga waa la ogaysiin.

2. Ayadoo ay sideeda tahay arrinka ku xusan farqada /1/ ee qodobkan, hadana hadii uu xubin xafiis madaxeed ama go'aan qore ku soo shaqeeyay uu u tartamo garsoorenimo maxkamad heerkiisa ah, waayo aragnimada uu ku helay shaqadan uu hayay garsoorenimada ka hor ayaa looga soo qaadi inuu ku helay garsoorenimada heerka maxkamada uu u tartamay.

17.SHURUUDAHA WAAJIBAADKA AH

1 Marka uu xubin u soo tartamayo garsoorenimo, waa inuu buuxiyaa ugu yaraan shuruudaha heerka waxbarashada iyo waayo-aragnimada ee kor ku xusan kuwooda ugu hooseeya, waana inaan shuruudahaas la baal marin.

2 Ayadoo arrinka ku xusan farqada /1/ ee qodobkan ay sideeda tahay, hadana hadii tartamayaal badan ay garsoorenimo u soo tartamaan oo ay buuxiyaan shuruudaha ugu hooseeya ee heerka waxbarashada iyo waayo-aragnimada, ayadoo la eegayo hadba tirada garsoora ee loo baahanyahay waxa mudnaanta lasiin xubnaha ugu natiijada sareeya xaga waxbarashada.

3.Marka ay muhiim noqoto in la kala doorto xubno heerkooda aqoonta iyo khibradoodu ay isku mid yihiin, waxa mudnaanta la siin xubinka shaqada xidhiidhka dhaw la lahaa.

4. Khabiirrada ka shaqeeya xafiisyada ka baxsan hay'ada garsoorka hadii ay isku diwaangaliyaan inay u tartamaan garsoorenimo, ayadoo ay tahay inuu gudiga maamulka garsoorku ogolaado codsigooda tartanka ka hor inta aanay isdiwaangalin, hadana waa inay xubnahani ka keenaan xafiiska ay ka shaqeeyaan cadeyn qoraal ah oo tilmaamaysa in xafiiska ay ka shaqeeyaan raali ka yahay in xubnahan loo magacaabo garsoorenimo oo ay ku shaqeeyaan.

18. DACWADAHA ANSHAXA IYO GANAAXYADA

1 Ayadoo ay shuruudaha waajibaadka ah ee ku xusan awaamiirtan sideeda yihiin, hadana xubinka lagu dacweeyay anshax darro ee lagu ganaaxay, kaasoo sida ay dhigayaan shuruucda ku haboon aan dhamaysan mudadii ganaaxa uma tartami karo garsoorenimo.

2 Ayadoo uu sidiisa yahay arrinka ku xusan farqada /1/ ee qodobka, xubinka lagu dacweeyay anshax darro ee aan dacwadiisaasi wali wax go'aan ah laga gaadhin wuu u tartami karaa garsoorenimo. Hase yeeshee hadii ay dacwadan ay gabagabowdo ka hor inta uunsan dhamaanin tartanku oo xubinka lagu helo khaladkiisa, tartanka waa laga saari.

3. Ayadoo lagu salaynayo farqada/2/ ee qodobkan hadii dacwada lagu soo oogay xubinku aanay xal helin mudada loogu talo galay, oo uu xubinkuna keensaday natiijo u suurto galin karta in garsoore loo qaato, gudiga maamulka garsoorka ayaa isla-marka ay dacwadu gabagabowdo ka go'aan gaadhi magacaabista xubinka.

19.TALAABOOYINKA TOGAN

1. Ayadoo ay sidooda yihiin arrimaha lagu xusay qaybaha kore, hadii ay tartamayaashu keensadaan natiijo isku mid ah si loo kobciyo kaalinta ka qaybgalka dumarka iyo dadka naafada ah, inta dhibcohooda loogu biiriyo shan/5/ dhibcood ayaa sidaa lagu xisaabin natiijada tartamayaasha.

2.Ayadoo lagu salayanayo farqada/1/ ee qodobkan, hadii marka natiijada shan/5/ dhibcood loogu daro lawaayo tiro dumar ah ama dad naafo ah oo ka wada qaybgala tartanka, waxa laga magacaabi dumarka ama dadka naafada ah ee dhibcaha ugu sareeya keensada ayadoo laga duulayo fikirka/afkaarta masuuliyiinta maxkamada guud ay ku tilmaamayaan in xubnahaa natiijadaas keensaday ay masuuliyadooda kasoo bixi karaan.

3. Ayadoo ay sideeda yihiin arrimaha ku xusan farqada 1 iyo 2 ee qodobkan, hadana hadii ay xubnaha dumarka ah ee tartamaya iyo tartamayaasha kale noocay doonaan ha ahaadeene ay keensadaan natiijo isku mid ah, waxaa mudnaanta lasiin dumarka.

QAYBTA SADEXAAD

IMTIXAANAADKA

20. UJEEDADA IYO NUXURKA IMTIXAANKA

1. waxa imtixaan laga qaadi tartamayaasha buuxiya shuruudaha waajibaadka ah ee kor ku xusan.

2. Inta lagu guda jiro geedisocodka xulashada garsoorayaasha nuxurka imtixaanka ee laga qaadayo tartamayaashu, waa inuu noqdo mid ku qotoma xaqiijinta in tartamayaashu ay shaqada garsoorenimo u leeyihiin aqoon ku filan, inay yihiin kuwo firfircoon, anshax wanaagsan, in si cadaalad ah ay u tartamaan, inay yihiin kuwo ixtiraama sharciga, in lagu ogaado sumcadooda iyo waliba waxyaabaha muhiimka ah ee kaleba.

21. Nooca Imtixaanka

1. Imtixaanka lagu kala saarayo tartamayaashu waxa uu noqon karaa mid qoraal ah, mid qawl(af-wax laga waydiiyo) ama waxa uu noqon karaa isku-dhafka labada noocba.

2. Ayadoo ay sideeda tahay arrinka ku xusan farqada /1/ ee qodobkan, hadana hadii uu gudiga maamulka garsoorku u arko inay muhiim tahay, waxa uu go'aamin karaa in tartamayaasha lasiiyo tababar gaaban oo uu imtixaankuna kamid yahay.

22. FULINTA IMTIXAANAADKA

1. diyaarinta iyo sixitaanka imtixaanka waxa masuuliyad ahaan u qaadan gudiga ku meelgaadhka ah

2. Natiijada tartamayaasha lasiinayo oo faah-faahsan ayay tahay inuu gudiga maamulka garsoorku ansixiyo, kadib marka uu shirgudoonka gudigu u soo jeediyo gudiga maamulka garsoorka.

23. QIIMAYNTA NATIIJADA SHAQADA

1. Hadii aanu gudigu si kale u gaa'min qiimaynta natiijada shaqada ee tartamayaasha laga qaadayo waxa lagu salayn, sida ku cad qodobkan 25 farqadiisa 2

2.Ayadoo ay sideeda tahay arrinkan ku xusan farqada /1/ ee qodobkan, hadii la xaqiijiyo in xubin garsoorenimo u tartamay uu heerka ugu hooseeya ee qiimaynta faylka ee ku cad lifaaqa 7^{aad} ee awaamiirtan uu ka keensado 10% iyo inka saraysa inkastoo ay dhibcaha laga rabaa u buuxsamayaan hadana waxa loogu dari natiijadiisa 2%

3.Hadii ay jiraan xubno u tartamaya garsoorenimo oo xanuun awgii, dhalmo ama sababo kale oo macquul ah uga maqan shaqada taasoo sababtay inaan lagu qiimayn natiijada shaqada ee faylasha khuseeya, waxa

natiijada qiimaynta ee shaqadiisa la xidhiidha lagu qiimayn ayadoo la qiimaynayo shaqada uu qabtay mudadii uu shaqada ku jiray/jirtay.

4. Xubnaha u tartamaya garsoorenimo ee ka shaqeeya shaqooyinka lagu xusay farqada /2/ ee qodobka 10, waxa qiimaynta shaqadooda laga dhigi mid u dhiganta qiimaynta shaqada garsoorka.

5. Gudiga ku meelgaadhka ah ee uu gudiga maamulka garsoorku magacaabayo ayaa si uu qiimaynta shaqada uga dhigo mid la mid ah qiimaynta shaqada ee garsoorayaasha sida kucad farqada /3/ ee qodobkan uguna buuxiyaan natiijada qiimaynta hab cadaalad ah, ayaa waxa uu gudiga ku meelgaadhka ahi ay diyaarsan cheklist u haga habka qiimaynta. Marka ay xaaladani jirto geedisocodka diyaarinta cheklistayada iyo natiijada ugu dambaysta ah ayuu u gudbin shir gudoonka gudiga.

24. IMTIXAANKA QORAALKA AH

1. Hadii aanu gudigu si kale u go'aamin, xubnaha u tartamaya garsoorenimo waxa laga qaadi imtixaan qoraal ah oo ay soo diyaariyaan khuburo sharci uyaqaanno ah, oo uu gudiga garsoorku soo xusho kuwaasoo khibrad u leh diyaarinta imtixaanaadka, khuburadaas ayaana sixi imtixaanka qoraalka ah.

2.Ayadoo ay khubrada loo soo xulay imtixaanku go'aaminayaan nuxurka iyo afkaarta uu imtixaanku ka koobnaanayo, hadana imtixaanku waa inay ka mid ahaadaan shuruucda ama qodobada, hababka xeerarka, hab-qoraaleedka iyo sababaynta(legal writing and reasoning) had iyo jeer doodaha dhaliya si loo cabiri karo aqoonta iyo khibrada xubnaha tartamaya.

3.Ayadoo ay sideeda tahay arrinka ku xusan farqada /2/ ee qodobkan, waxa uu shir-gudoonka gudigu awaamiir ku siin karaa gudiga diyaarinta imtixaanaadka inay imtixaanada u kala diyaariyaan hadba ayagoo eegaya heerka maxkamadaha ee loo kala tartamayo. Kaasoo ay tahay inuu imtixaanku noqdo mid u dhigma heerka maxkamada.

4. Cida imtixaanka soo diyaarisay, maalinka imtixaanka ka mid ma noqon karaan qaadayaasha imtixaanka (invigilator). Sidaa awgeed shir gudoonka gudigu waxa uu ku meelayn karaa cid kale oo qaada imtixaanaadka.

5. Cida qaadaysa imtixaanku waxay u samayn xubnaha qaadanaya imtixaanka lambaro ama koodh u gaar ah, waxayna masuuliyadeeda qaadayaan xafidida sirta lambarrada ama koodhadhka.

25. NATIIJADA IMTIXAANKA

1.Imtixaanka laga qaadayo xubnaha tartamaya ayadoo laga qabanayo 100%, hadana hadii aanu gudiga maamulka garsoorku si kale u go'aamin qiimaynta natiijada shaqada waxa laga qaban 40% halka imtixaanka qoraalka ahna laga qabanayo 60%.

2. Ayadoo ay sideeda tahay arrinka ku xusan farqada /1/ ee qodobkan, hadana gudi laga kala xulayo xubnaha gudiga maamulka garsoorka, xafiiska maamulka garsoorka iyo hadii loo baahdo khabiiro kale ayaa iyadoo liistada qiimaynta shaqada ay tahay sida kucad lifaaqa 2 ee awaamiirtan, waxay 40% ee qiimaynta natiijada shaqada u kala siin sida hoos kucad:

B/Natiijada shaqada (tayada go'aamada, tirada go'aamada……..) 30&

- Tayada Go'aamada= 20%
- Tirada Go'aamada (waxa kamid ah xukunada, ammarada iyo kuwa lagag go'aan gaadhay in ay gudbi karaan iyo in aanay gudbi karayn.)

T/Dadaal badni iyo inuu ruux ku dayasho leh yahay…..3%

J/Nidaamka Adeeg bixinta……4%

X/ U heelenaanta isbadal inuu sameeyo xubinku…….3%

3. Arrimaha ku xusan qodobkan farqadiisa /2/ xarfihiisa B ilaa X, waxa loo buuxin ayadoo la tixraacayo shuruudaha iyo heerka natiijada ee lagu tibaaxay foomamka ku cad lifaaqyada 3aad ilaa 7aad ee awaamiirtan.

4. Xubnaha tartamaya ee ka natiijo roon xubnaha kale ee la tartamaya, inta si ku meelgaadh ah loogu sii qaato inay mudnaanta leeyihiin, ayaa wakhti gaaban gudihii waxa natiijadooda lagu ogaysiin oo lagu shaacin hadaba sida ay ku haboontahay ayadoo lagu dhajinayo meelaha ogaysiisyada lagu dhajiyo, daabacaadaha sida fudud ku gaadha dadweynaha, warbaahinta electronics ka ah ama jidka kale ee ku haboon.

26. NIDAAMKA SOO GUDBINTA CABASHADA

1. Cabashooyinka ay dulucdoodu tahay inuu khalad ka jiro natiijada imtixaanka, waxa loo soo dhaweyn gudiga maamulka garsoorka taasoo uu shir-gudoonku usoo dhigayo gudiga.

2. Cabashada waa in lagu soo gudbistaa shan maalmood gudohood oo ah maalmaha shaqada, kuwaasoo ka bilaabmaya marka la shaaciyo natiijada imtixaanka.

3. Gudiga asagoo la tashanaya cida ay khusayso ayuu cabshada kaga go'aan gaadhi mudo sadex (3) Maalmood oo shaqo gudohood ah. Go'aankaasina kama dambays buu ahaanayaa.

4. Marka cabasho laga keensado natiijada qiimaynta shaqada, waxba lagama badali karo lagamana hagaajin karo ilaa uu khalad ka jiro xaga qoraalka(qalindaar) ama xisaabinta natiijada mooyee.

27. NATIIJADA KAMA DAMBAYSTA AH EE TARTAMAYAASHA

1.Xubnaha tartamaya ee natiijada 100% ah, ka hela dhibcaha ugu sareeya ee uu gudigu xaqiijiyo inay karti u leeyihiin garsoorenimada ayaa natiijadooda lagu ogaysiin habka ogaysiinta/shaacinta natiijada ee uu gudigu go'aaminayo.

2.Ka hor inta aan la shaacin natiijada imtixaanka, hadii ay jirto afkaar ama talo ku saabsan xubanaha tartamay ee natiijada ugu roon keensaday lana xaqiijiyay inay karti u leeyihiin garsoorenimada; afkaartaas/taladaas oo uu soo gudbiyo xafiiska maamulka garsoorka sida ku cad qodobka 6 farqadiisa 7 ee awaamiirtan ayuu shirgudoonka gudigu inta uu afkaartaas/taladaas iyo natiijada imtixaanka isasoo raaciyo uu soo hordhigi gudiga maamulka garsoorka.

3. Inkastoo xubnaha tartamay ay natiijo fiican keensadeen, hadana hadii ay jiraan afkaar ama talooyin dadweyne oo aan wanaagsanayn kuwaasoo ku saabsan xubnaha tartamay ee natiijada ugu fiican keensaday, gudiga maamulka garsoorku waxa uu awood u leeyahay inuu cid gudigu magacaabo u diro inay soo baadhaan afkaartan ama talooyinka ku saabsan xubanaha.

4. Ayadoo ay sideeda tahay arrinka ku xusan farqada 3 ee qodobkan, hadii ay jiraan cabashooyin, xogo, afkaar ama talooyin kala duwan oo shaki abuuraysa ama aan wanaagsanayn oo soo noq-noqda kuna saabsan xubinkan, oo xataa inta la baadhay lagaga talaabo qaaday, ayuu gudiga maamulka garsoorku asagoo baadhaya nuxurka cabashooyinka, afkaarta, xogaha iyo talooyinka ayuu hadii u aamino in magacaabista xubinkan ay wax u dhimayso fikirka ay dadweynuhu ka haysataan cadaalada, waxa xubinka gabi ahaanba laga mamnuuci karaa tartanka garsoorenimada.

QABTA SADEXAAD

QODOBADA GAARKA AH

28. WAX KA BEDELKA AWAAMIIRTA

Gudiga Maamulka Garsoorka ee DDS ayaa wax ka badali kara awaamiirtan hadii uu u arko muhiim.

29. WAKHTIGA DHAQAN GALKA AWAAMIIRTA.

Awaamiirtan waxay dhaqan galaysaa laga bilaabo maalinka uu gudiga maamulka garsoorku ansixiyo **…./…..**/2014

MAWLIID KAASOW AXMED

GUDOOMIYAHA MAXKAMADA GUUD

LIFAAQ 1

FOOMKA CODSIGA GARSOORENIMADA EE MAXKAMADAHA DDS

Xaalada Gaar ahaaneed ee codsadaha

1.1.Magaca oo sadexan:……

1.2.Wakhtiga dhalashada: Maalinka……Bisha……Sanadka……

1.3.Goobta uu hada ku noolyahay:

Dalka:……..…Magaalada……M/hoosaadka……..Xaafada……

1.4Sinji Lab ☐ Dhadig ☐

1.5 Jinsi (Nationality) ……

1.6Qawmiyada:……

1.7 Da'ada:……

1.8 Xaalada Guur: Xaas leh ☐ Xaas ma leh ☐

1.9.Luuqada: Dhexdhexaad; Wanaagsan; Aad u Wanaagsan; Aad & Aad u Wanaagsan

Luuqada	**Ku hadalka**	**Dhagaysiga**	**Qoraalka**	**Akhriska**
Af-Soomaali				
Af-Axmaari				
Af-Ingiriis				

2. HEERKA AQOONTA CODSADAHA:

Heerka Aqoonta	***Magaca Dugsiga/xarunta***	***Wakhtiga wax aad ku baratay***	***Natiijada/Dhibcaha***
Dugsiga hoose			
Dugsiga Dhexe			
Dugsiga sare			
Dhiploma			
Dhigriiga 1aad			
Dhigriiga 2aad			
Dhigriiga 3aad/PhD/			

3. Waayo-aragnimada Shaqo ee Codsadaha

Magaca xafiiska	**Mudada aad ka shaqaysay**	**Booska shaqo**	**Sababta aad uga tagtay shaqada**

4 Hadii aad tababarro ka qaybgashay tibaax

Magaca xaf.tababarka bixiyay	**Mawduuca Tababarka**	**Wakhtiga aad Tababarka qaadatay laga bilaabo……..…ilaa…….**

Waxaan sexeexayga ku muujinayaa in xogta aan kor ku xusay ay sax tahay.

Magaca Codsadaha ***Taariikhda***

…… ……..

LIFAAQA 2

FOOMKA BUUXINTA QIIMAYNTA NATIIJADA SHAQADA

			U heelanida isbadalka				**Firfircooni & ku dayo leh**				**Adeeg bixinta**					
TT	Magaca tartamaha oosad exan	Natiijada Q/Shaqada(Tayada & tirada go'aanka)	Kartidisa curineed	bolisiga dawlada/ waxkabadalka nidamka cadaalada	Kaqaybgashada fulintaqiimaynta garsoorka	Uqaabilidahabmiisaamanarrimahasaamaynayadantaguud & kuwadawlad	Isfahankaa & wadashaqayntabahwadaagta	Firfircoonidashaqada & inuukudayashomudanyahay	Kamadaxbananaku-tidhikuteen & kooxaysi	Kamadaxbananabalwadahaxunxun	Rabitaankaqaabilaadamacaasmiisha/ixtiraam, iskug-mid mayihiin.	Xalintadhibatooyinkaxagashaqada	Kudadalidafahankacabashadamacaamisha, uguadeegidasidaadufahantay.	Ushaqayntasidhakhsoah, kharash yar & tayoleh	Wadar	heerka

LIFAAQA 3.

FIRFIRCOONIDA IYO KU DAYO LAHAANSHO 3%

Natiijada xubinka lagu siinayo anshax wanaaga waxa gashi u noqon oo laga duuli afkaarta ama fikirada ay xubinka ka dhiibtaan gudiga wax-kabadalka nidaamka cadaaladeed ama Gudiga Maamulaka Marsoorka ama Gudi-hoosaadka, ama/iyo bulshada qaybeheeda kale.

Sidaa daraadeed waxa dhibcaha loo buuxin sida ku cad sanduuqa hoose:

				Fir-fircoonida & ku dayosho lahaanshaha 3%				
TT	Magaca xubinka oo sadexan	Sinij	Gobolka	Isfahanka & wada-shaqaynta bahwdaagta0.75%	Firfircooni & tusaale u noqoshada kuwa kale 0.75%	Ka madax banana ku tidhi-kuteenka & koxaysi 0.75%	Ka madax banana balwadaha xun-xun0.75%	Natiijada 3%

Lifaaqa 4

Adeeg bixinta xubinka 3%

Natiijada xubinka lagu siinayo anshax wanaaga waxa gashi u noqon oo laga duuli afkaarta ama fikirada ay xubinka ka dhiibtaan gudiga wax-kabadalka nidaamka cadaaladeed ama Gudiga Maamulaka garsoorka ama Gudi-hoosaadka, ama/iyo bulshada qaybeheeda kale.

Sidaa daraadeed waxa dhibcaha loo buuxin sida ku cad sanduuqa hoose:

				Adeeg bixinta xubinka 3%				
TT	Magaca xubinka oo sadexan	Sinij	Gobolka	Rabitaanka qaabilaada macaamiisha; si naxariis leh, sikugu mid ahaanssho. 0.75%	Xalinta dhibaatooyinka shaqada soo darsa 0.75%	Fahan u yeelashada arrinka macaamiisha & xal u raadinta0.75%	U fulinta shaqada si dhakhsoah, dhitaysi leh, tayo leh0.75%	Natiijada 3%

LIFAAQA 5

U HEELANAANTA ISBADAL INUUKEENO XUBINKU. 3%

Natiijada xubinka lagu siinayo anshax wanaaga waxa gashi u noqon oo laga duuli afkaarta ama fikirada ay xubinka ka dhiibtaan gudiga wax-kabadalka nidaamka cadaaladeed ama Gudiga Maamulaka Marsoorka ama Gudi-hoosaadka, ama/iyo bulshada qaybeheeda kale.

Sidaa daraadeed waxa dhibcaha loo buuxin sida ku cad sanduuqa hoose:

				U heelanida isbadal inuu keeno 3%				
TT	Magaca xubinka oo sadexan	Sinij	Gobolka	Dadaalka uu u galocurinta & inshaqada la dardargaliyo 0.75%	Aqbalay nidaamka isbadalka geedisocodka cadaalada & polisyada dawlada 0.75%	Dadaal ku bixinta in la dhaqangaliyo habka tartansiinta garsoorka0.75 %	U qaabilidahab miisaamanarrimaha saamaynaya danta guud & kuwa dawlad 0.75%	Natiijada 3%

Lifaaqa 6

Tirada Faylasha 10%

1. Tirada faylasha waxa laga qabanayaa 10%
2. Inta tirade faylasha ee amar iyo xukun lagu xidhay lagu dhufto 0.75 ayaa tirade soo baxda la isku dari.
3. Tirada faylasha ee Go'aan ama xukun ku xal hela inta lagu dhufto 1 ayaa tirade soo baxda la isku dari.
4. Ayadoo natiijada lagu qiimaynayo 11 ka bilood ayaa natiijada sida soo socota loo buuxin.
    - ✓ Ayadoo laga duulayo heerka natiijada ugu hooseeya (satandard) ee u yaala maxkada uu garsoorku ka hawl galo, ayaa marka tirade faylasha ee uu ka shaqeeyay (I tus oo I taabsii) ay sii kordhaanba inta lagu xisaabiyo dhibcaha loogu talagalay ayaa kadib natiijada u soo baxda (ratio) loo buuxin.

      Tusaale: Kasoo qaad garsoore ka gawl gala maxkamad degmo ayaa bishii laga rabaa inuu dhamaystiro bishii 35fayl oo 11 bilood noqonaya 385. Garsoorka hadaba fuliya 11 bilood 385 waxa uu heli 20%. Ayadoo qaaciidadan la raacayo garsoorka 11 bilood dhameeya 300 fayl waxa ay noqon natiijadiisu sidan: 300*20=6000/385=15.58. maxkamadaha kalena sidaas baa lo xisaabin.

    - ✓ Hadii maxkamada uu garsoorku ka hawl galo aanay shaqo badan lahayn, sidaa daraadeed uu garsoorku buxin waayo heerka natiijada ee uyaala maxkamada(standard), waxa garsoorkaas natiijadiisa loo xisaabin ayadoo laga duulayo hadba tirade faylasha ee maxkamadaas soo gasha.

      Tusaale: hadii ay maxkamad heer degmo ah ay sanadkii soo galaan tiro faylal ah oo dhan 2000oo fayl, ayna maxkamadaas ka hawl galaan 6garsoore, marka faylalkaas la xisaabiyo natiijada garsoorayaashu waa ay ka yartahay heerkii u yaalay maxkamada. Sidaa daraadeed hadii uu jiro garsoore kamid ah 6 oo u tartamaya inuu garsoore ka noqdo maxkamad sare, ma haboona in dhibcihiisa oo yar awgood looga reebo tartanka garsoorenimada, sababtoo ah dhibcaha waxa yareeyay

waa tirade faylasha maxkamada soo gala. Hadaba garsoorkan waxa natiijadiisa lala beegsan oo lagu xisaabin waa tirade gayslasha ee soo galay inta uu ka shaqeeyay. Sidaa awgeed maxkamada degmada garsoorka ka shaqeeya waxa laga sugayay inuu ka shaqeeyo 11 bilood 333 fayl, laakiin tirade faylasha oo yar awgeed waxa ku soo hagaagtay 300 oo fayl waxayna xisaabtu noqon 300*20= 6000/333=18

				Tirada Faylasha ee garsoorku ka shaqeeyay sanadka.						
TT	Magaca xubinka oo sadexan	Sinij	Degmada	Amar/may gudbikaraan mise magudbikaraan	Tirada Amarrada*0.75%	Xukun 0.75 %	Tiradexukunka *0.75 %	Tirada Go'aan*0.75	wadar	Natiijada 5%

LIFAAQA 7.

HABKA QORAALKA GO'AANKA/TAYADA GO'AANKA

- ✓ Garsoore kasta faylalka ciqaabta ah iyo kuwa madaniga ah ee ka go'aan gaadhay baa bakhtiyaa nasiib loo soo xulan lana baadhi.
- ✓ Mabaa'diida salka u ah baadhida faylka ee laga duulayo waxa lagu xusay sanduuqa hoose.
- ✓ Qodobkasta natiijadiisa ayuu leeyahay
- ✓ Guud ahaan tayada faylka waxa laga qabanayaa I waa 20% hase yeeshee ayadoo laga duulayo heerarka ku qoran sanduuqa hoose iyo hadba nooca faylka ayaa loo xisaabin looguna buuxin.
- ✓ Hadii uu garsoorku ka shaqeeyay kaliya madaniga ama ciqaabta, waxa dhibcihiisa laga xisaabin kaliya fadhiga uu ka shaqeeyay. Marka ay sidan jirto dhibcaha ku xusan sanduuqa waa la isku riix-riixi karaa.

DAWLADDA DEEGAANKA SOOMAALIDA

MAXKAMADDA GUUD

Maxkamadda guud ee DDS

AWAAMIIRTA HABKA BIXINTA KHARAASHAADKA

AWAAMIIR LAMBARTA___ /2014T.I.

ARAR

Maadaama marka ay maxkamada guud ee DDS fulinayso shaqooyinka kala duwan ay tahay inay bixiso kharashaadka hawlahaas, haseyeeshee aanay maxkamadu hada ka hor lahayn awaamiir u gaar ah oo khusaysa nidaamka kharasha bixinta ayaa ayadoo lagu jaangoynayo xeerarka/shuruucda kale ee bixinta kharashaadka waxa dadaal loogu soo jiray in gol-daloolooyinkaas la awdo. Hase yeeshee hawl kasta/shaqo kasta oo u baahan in kharash laga bixiyo maxkamadu waa ay sii awoodi wayday inay kusii wado ayadoo lahayn awaamiir la xidhiidha bixinta kharashaadka. Sidaa awgeed ayaa loo baahday in lasoo saaro awaamiirtan iyadoo looga gol leeyahay in lagu awdo goldalooyinkaas lasoo darsi jiray maxkamada.

Maadaama loo baahday in la bixiyo kharashaadka ku baxa hawlaha iyo khabiirada sida qorayaasha ku soosaara qoraalada magaazinada shuruucda, khuburrada qoraalada/cilmi baadhisyada tafatira, tafatirayaasha go'aamada/arrimaha kale, khuburada diyaarisa mawduucyada tababarka lagu bixiyo, macalimiinta tababarada bixisa, iyo waliba marka la dhiiri galinayo cilmibaadhayaasha ama qorayaasha ay maxkamada guud u isticmaalayso hawleheeda.

Maadaama loo baahday in si cad loo dhigo fulinta kharashaadka ku baxa garsoorka iyo xubnaha magacaabista ee ku jira waxbarasho ama tababarro gaagaaban, sida kharashka waxbarashada ku baxaya, ka habeen dhaxa iyo kharashka safarka.

Maadaama loo baahday in si cad loo dhigo cadadka kharashaadka ee la siinayo xubnaha gudiga maamulka garsoorka marka ay shirkooda caadiga ah yeeshaan, iyo in sicad loo dhigo cadadka kharash ee la siinayo xubnaha gudiga maamulka garsoorka ee heer deegaan, iyo kuwa heer gobol ee aan ahayn garsoorayaal iyo magacaabis marka ay hawlaha gudiga u baxaan ee meelo kala duwan ay safrayaan.

Ayuu gudiga maamulka garsoorka ee DDS asagoo ka duulaya awoodiisa lagu siiyay bayaanka aas-aaska gudiga maamulka garsoorka DDS ee tirsigiisu yahay ……./2014 qodobadiisa 12(1) iyo 32 uu soo saaray awaamiirtan bixinta kharashaadka kala duwan ee maxkamada guud.

QAYBTA KOOWAAD: QODOBADA GUUD

1 CIWAAN GAABAN

Awaamiirtan waxa lagu magacaabi karaa “Awaamiirta Bixinta kharashaadka ee Maxkamada Guud ee DDS”, …..2014

2.QEEXID

1.“Maxkamad” waxa loola jeedaa maxkamada guud, Maxkamadaha sare iyo Maxkamadaha Degmiiyinka ee DDS

2.“Gudi” waa Gudiga Maamulka Garsoorka ee Heer deegaan ama Gudiga Heer Gobol

3.“Garsoore” waa xirfadle sharci oo hab waafaqsan sharciga, guddigu ugu xulay goluhuna ugu ansixiyay inuu adeeg bixin garsoor ka bixiyo ama garsoorenimo kaga shaqeeyo qaab dhismeedka maxkamadaha kala duwan ee deegaanka.

4.“Xubin Magacaabis ah” waa xirfadle sharci oo uu gudigu u xulo kuna meeleeyo xafiis hoosaadyada, waaxaha iyo boosaska kale duwan ee maxkamadaha, waxaana kamid ah: masuuliyiinta xafiis hoosaadyada, gadh-wadeenada g/socodyada, registraalada, qareemada dawlada, kal-kaaliyayaasha garsoorayaasha, kalkaaliyayaasha registraalada, iyo xirfadlayaasha kale.

5. **“Magaazin Sharci”=** waa magaazinka sharci ee ay maxkamada guud ee DDS sanadkiiba hal soo saari karto.

6. **“Gudiga Editorialka”=** waa gudi ay maxkamada guud magacawdo oo go’aamiya shaqada daraasaadyada iyo cilmibaadhisyada ee ku soo baxa magaazinka, kaasoo si guudna u maamula habka diyaarinta magaazinkan.

7**.”Qoraal”** waa qoraalada iyo daraasaadyada/cilmi-baadhisyada ay baahiso maxkamada guud, qiimaynnada mawduucyada kooban, qoraalada kusoo baxa magaazinka maxkamada guud ama waa qoraalada/casharada loo diyaariyo tababarada.

8 **“Waxbarasho ama tababarro dhaadheer”=** waa waxbarasho ama tababar kaasoo qaata mudotodobaadyo, bilo iyo inkabadan ah, kadibna lagu helo shahaado.

9. **“Tababarada gaagaaban”=** waa tababrada la siiyo mudo ka yar hal bil oo ay ka mid yihiin workshopyada ama siminaarrada IWM.

3. UJeedada Awaamiirtan

Ujeedada awaamiirtan waa in dadka ka qayb-qaadanaya dadaalka lagu horumarinayo adeega garsoor ee deegaanka la dhiirri-galiyo, in bixinta kharashaadka hawlaha lagu tibaaxay awaamiirtan lagu saleeyo cad-cadaan iyo in la xaqiijiyo sharci ahaantooda.

4.XADKA DHAQAN-GALKA

Awaamiirtan waxay dhaqan gal ku ahaanaysaa kharashaadka la bixinayo ee la siinayo qorayaasha magaazinka sharciga, tafatirayaasha qoraalada shuruucda la xidhiidha, tafatirayaasha qodobada muhiimka ah, diyaariyayasha tababarrada iyo macalimiinta tababarada, soo jeediyayaasha cilmibaadhisyada/daraasaadyada, kharashaadka lasiiyo xubnaha gudiga maamulka garsoorka, kharashaadyada lagu bixiyo waxbarashada iyo tababarada, diyaariyayaasha iyo khuburada saxa imtixaanada.

QAYBTA LABAAD

FULINTA/BIXINTA KHARASHAADYADA KHUSEEYA DIYAARINTA MAGAAZINKA SHURUUCDA, TAFATIRAYAASHA MAWDUUCYADA, QORAALADA CILMI-BAADHISYADA/DARAASAADYADA AH, DIYAARINTA CASHARADA TABABARADA GAAGAABAN IYO BIXINTA TABABARADAN.

5. Marka ay maxkamada guud bixinayso kharashaad la xidhiidha qodobada/arrimaha kor ku xusan, waxa bixinta kharashaadka loo fulin sida soo socota:

1. Hadii magaazinka ay ku soo baxayaan qoraalo, diyaariyaha iyo soo jeediyaha qoraalka daraasaadka/cilmi baadhista waxa lasiin karaa lacag dhan ilaa 10,000birr. Cida soo jeediyaha qoraalkaas ah ama nakhtiimaha waxa lasiin karaa lacag dhan ilaa 5,000birr. Boordhiga editoriyaalka ka ah magaazinka waxa midkiiba lasiin lacag gaadhaysa ilaa 5000birr.

2. Khabiirka taftirid tayaysan ku sameeya(case commenter) go'aamada maxkamada iyo arrimaha sharciga la xidhiidha waxa la siin lacag dhan ilaa 5000birr.

3 Hadii ay maxkamada guud u baahato, go'aansatona in cilmi baadhis loogu sameeyo mawduuc ka baxsan mawduucyada sare lagu xusay, qoraaga cilmibaadhista waxa ay maxkamada guud siin lacag dhan ilaa 20,000birr.

4 Ayadoo uu sidiisa yahay arrinka ku xusan farqada 3 ee qodobkan, hadana hadii mawduuca cilmibaadhista lagu samaynayaa i uu yahay mid gaar ah, khabiirka cilmi-baadhistan samaynayaana uu aqoon durugsan u leeyahay mawduucan looguna baahdo aqoontiisaa darteed iyo muhiimada gaarka ah ee mawduucu leeyahay, oo cimi-baadhistu ay qaadanayso mudo dheer sidaa daraadeedna ay lacagta kor lagu xusay ugu filnaan waydo waxay maxkamada guud awoodaa marka ay masuuliyiintu maxkamadu go'aamniso, in ayadoo la xidhiidhaysa xafiiska maaliyada iyo horumarinta dhaqaalaha ay lacagtaa kordhiso.

5. Khabiirada u diyaariya qoraalada koob-kooban, waxa ay maxkamada u siin kartaa khabiirkaas qoraalka u diyaariyay lacag dhan ilaa 7500birr.

6 Qoraalka lasoo diyaariyay hadii tababar lagu bixinayo, khabiirka qoraalka soo diyaariyay ee tababarka ku bixinaya ama khabiir kale oo asagu tababar ahaan uun u bixinaya waxay maxkamadu awooda inay siiso maalinkiiba lacag dhan 1000birr waa hadii uu khabiirku haysto dhigriiga koowaad, hadii uu khabiirku haysto dhigriiga labaadna (masters) waxay maxkamadu siin kartaa maalinkiiba lacag dhan 1500birr, hadii uu khabiirku haysto dhigriiga sadexaad/PhD/ na waxay maxkamadu siin kartaa lacag dhan 2000birr maalinkiiba.

7. Arrimaha ku xusan farqada 5 iyo 6 ee awaamiirtan hadii uu fulinayo khabiir ka tirsan maxkamada guud, oo shaqadiisa caadiga ahi ay tahay inuu tababarro bixiyo lacagaha kor ku xusan asaga ma khuseeyaan.

Qabyta Sadexaad

Abalada/gunooyinka Maalmaha Kulanka ee lasiiyo Xubnaha Gudiga Maamulka Garsoorka ee heer deegaan iyo kuwa heer gobol, iyo waliba Gudi-Hoosaadyada.

6. Abalada/gunooyinka lasiiyo xubnaha gudiga maamulka garsoorka marka ay kulan yeeshaan iyo marka ay hawlo-shaqo awgood meelo ugu kala safraan waxa loo fulin hab waafaqsan sida qodobadan soo socda.

1. Marka ay gudiga maamulka garsoorka ee heer deegaan ay kulan yeeshaan waxa gunno ahaan loo siin xubnaha gudiga heer deegaan 5000birr halka kulanba, xubnaha heer gobolna waxa hal mar markay fadhiistaan la siin 2500birr.

2. Ayadoo ay sideeda tahay arrinkan ku xusan farqada /1/ ee qodobkan, hadii ay jiraan xubno ka tirsan gudiga maamulka garsoorka oo ka imanaya meel ka baxsan goobta xarunta u ah gudiga, gunooyinka noolka iyo habeen dhaxa xubnahan la xidhidhiidha waxa lagu fulin hab-waafaqsan xeerarka kale ee ay khusayso.

3 Marka xubnaha gudiga maamulka garsoorka ee heer deegaan ka tirsan ee aan ahayn garsoorayaal iyo magacaabis, ay hawlo shaqo ugu baxaan meelo ka baxasan xarunta gudiga, safarkaasoo uu go'aamiyo gudiga maamulka garsoorku waxa gunooyinkooda iyo abalkooda lagu salayn sida ku cad awaamiirta bixinta kharashaadka safarada iyo habeen dhaxa, kaasoo cadadkiisu lamid noqonayo abalka iyo gunooyinka loo fasaxay xubnaha garsoorka maxkamada guud.

4 Marka xubnaha gudiga maamulka garsoorka ee heer gobol ka tirsan ee aan ahayn garsoorayaal iyo magacaabis, ay hawlo shaqo ugu baxaan meelo ka baxasan xarunta gudiga, safarkaasoo uu go'aamiyo gudiga maamulka garsoorku waxa gunooyinkooda iyo abalkooda lagu salayn sida ku cad awaamiirta bixinta kharashaadka safarada iyo habeen dhaxa, kaasoo cadadkiisu lamid noqonayo abalka iyo gunooyinka loo fasaxay xubnaha garsoorka maxkamada sare.

Qaybta Afaraad

Bixinta Kharashaadka Khuburada Diyaariya, Saxana Imtixaanaadka

7. Marka ay maxkamada guud doorbido inay xubnaha shaqooyinka u tartamaya kukalasaaarto imtixaan, khuburada diyaarinaysa imtixaanka ee saxaya shaacinayana natiijada imtixaankaas iyo xubnaha imtixaanka ka qaada tartamayaasha waxa kharash bixintooda loo fulin hab waafaqsan qodobadan hoos ku cad:

1.Marka ay maxkamada guud doorbido inay xubnaha garsoorenimada u tartamaya kukala saarto imtixaan, khubrurada diyaarinaysa imtixaanka ee saxaysa shaacinaysana natiijadu hadii ay yihiin khabiiro ka tirsan isla maxkamada guud waxa lasiin karaa kharash dhan 6000birr. Hadii khabiiradaas ay ka yimaadeen meelo ka baxsan maxkamadana waxa lasiin lacag dhan 8000birr. Hase yeeshee hadii dadka imtixaanka qaadanayaa I ay yihiin in ka badan 100xubnood waxa khabiirada sare lasiin 2000birr oo dheeri ah.

2.Ayadoo ay sideeda tahay arrinka ku xusan farqada 1 ee qodobkan, hadii uu khabiirka qaadaya imtixaanku uu u safrayo meel ka baxsan goobta uu ku noolyahay oo uu imtixaanka awgii u tagayo, waxa la siin xubinkaa gunnooyonka habeen dhaxa iyo transportation ayadoo la raacayo shuruucda ku haboon.

3. khabiirada kale ee imtixaanka qaadaya waxa lasiin midkiiba 2000birr. Hase yeeshee khabiirada imtixaanka qaadayaa halkii qol ba waa inaanay ka badan 2 imtixaan qaade.

4. Ayadoo ay sideeda tahay arrinka ku xusan farqada 3 ee qodobkan, hadii uu khabiirka qaadaya imtixaanku uu u safrayo meel ka baxsan goobta uu ku noolyahay oo uu imtixaanka awgii u tagayo waxa la siin xubinkaa gunnooyinka habeen dhaxa iyo transportation ayadoo la raacayo shuruucda ku haboon.

Qaybta Shanaad

Bixinta Kharashaadka waxbarashada iyo Tababarada

8. Kharashaadka khuseeya waxbarashada iyo tababarada dalka gudihiisa laga bixiyo ama nidaamka bixinta mushaharku:

1. Xubinka garsoorka ama magacaabista ah ee loo fasaxay inuu xarumaha tacliinta ee dalka gudihiisa ka barto heerka waxbarashada dhigriiga koowaad, dhigriiga labaad(masters) iyo dhigriiga sadexaad/Phd/ waxa ay maxkamada guud ka bixin hadii ay awoodo kharashaadkooda waxbarashada ku baxaya/tuition fee/, kharashaadka isdiwaangalinta ah iyo kharashaadka la bixiyo marka imtixaanka la galayo, kharashaadka marka ay jidka kusii jiraan ee ay waxbarashada tagayaan ama ay kusoo jiraan ayagoo buuxinaya foormaadyada muhiimka ah.

2. Ayadoo ay sideeda tahay arrinka ku xusan farqada koowaaad ee qodobkan, hadii aanay maxkamada guud la lahayn heshiis gaar ah xarunta tacliinta bixinaysa, xubinka waxbarashada wada lagama bixinayo kharashka jid marka ah ee uu wadada kusii jiro hadii uu sanadkiiba in ka badan 2 goor uu u tagayo foormaat buuxin ama uu uga soo noqonayo.

3.Ardeyda dhigriiga labaad(Masters) ama PhD wada hadii loo baahdo inay ardeydaas ay qoraan buuga qalin jabinta ayadoo la raacayo nidaamka waxbarashada ee jaamacadaas, waxay maxkamada guud ka dabooli

ardeydaas kharashka ay buuga ku qorayaan hadii ay awoodo, kaasoo lamid ah kharashka ardeyda kale ee xafiisyada dawlada laga bixiyo marka ay buugaas qorayaan.

4. Kharashka qorista buuga ku baxaya ee lagu tibaaxay farqda /3/ ee qodobkan waxaa la bixin oo kaliya hadii aanay jaamacada ardeydu wax ka barataa I bixinayn kharashka buuga. Hase yeeshee hadii lacagta ay jaamacadu ardeyda siinaysaa I ka yartahay lacagta ay dawlad deegaanku u go'aamiyeen aredyda, maxkamadu waxay bixin kala duwanaanshaha hadii ay awoodo.

5. Xubnaha waxbarashada loox jiidka ah, ta habeenkii(evening), mid todobaadka ah(week-end) iyo mida distance ga ah loo fasaxay inay ka bartaan xarumaha tacliinta sare ee dalka gudihiisa ama inay tababarro ku qaadaataan waxay ay maxkamada guud siin mushaharkooda iyo gunnooyinka sharciga ah oo dhan.

6. Xubinka dadaalka uu iskii u sameeyay ku hela fursad waxbarasho oo caadi ah (regular) ama tababar, kaasoo loo fasaxay inuu waxbarashadaas ama tababarkaas ka faa'iidaysto ayadoo lagu salaynayo awaamiirta waxbarashada iyo tababarada, waxa kharashaadkiisa dhaqan gal ku noqonaya qodobada awaamiirtan ee kor ku xusan.

7. Wabarashada iyo Tababarada Dalka Dibadiisa ah**:**

Hadii ay waxbarashadu tahay mid wakhti dheer qaadanaysa ama hadii ay fursadu tahay tababar gaaban, oo fursadan lagu helay dhanka dawlada /government sponsor/ ama lagu helo fursada dadaalka uu shakhsigu sameeyo kadibna loo fasaxay inuu ka faa'iidayato, waxa fulinta kharashaadka loo raaci hab waafaqsan habka ay dawladu u fuliso bixinta kharashaadka xubnaha magacaabista ee kale.

Qaybta Lixaad
Qodobada Gaarka ah

10. Awaamiirta aan dhaqan galka ahayn

Awaamiir kasta oo lid ku ah arrimaha lagu xusay awaamiirta dhaqan gal ma ahaanayaan.

11. Wax ka badalka Awaamiirta

Gudiga maamulka garsoorku hadii uu muhiim u arko waxa uu badali karaa awaamiirtan.

12. Mudada ay Awaamiirtu dhaqangal noqonayso

Awaamiirtan waxay dhaqangalaysaa laga bilaabo maalinka ay ansixiyaan gudiga maamulka garsoorku.

Mawliid Kaasow Axmed

Gudoomiyaha Maxkamada Guud

\

DAWLADDA DEEGAANKA SOOMAALIDA

MAXKAMADDA GUUD



Maxkamadda guud ee DDS

AWAAMIIRTA HABKA KULAMADA GUDDIGA MAAMULKA GARSOORKA

AWAAMIIR LAMBAR___ /2014T.I.

ARAR

Si awoodaha iyo waajibaadyada gudiga maamulka garsoorka ee lagu qeexay bayaanka aas-aaska gudiga maamulka garsoorka ee tirsigiisu yahay ……..,2014 qodobkiisa 12 loo fuliyo, gaar ahaana si loo xaqiijiyo madax-banaanida iyo la-xisaabtanka xubnaha garsoorka iyo kuwa magacaabista ah, gudiguna ugu kuur galo ugana go'aan gaadho arrimaha maaraynta la xidhiidha ayaa waxa muhiim noqotay in la soo saaro awaamiirtan.

Maadaama muhiim loo arkay in si cad loo dhigo, habka dajinta ajendayaasha gudiga, nidaamka maaraynta kulanka gudiga, geedisocodka go'aan gaadhista iyo fulinta go'aamada gudiga taas oo shaqada gudiga midho-dhal ka dhigaysa.

inkastoo hadii la cadeeyo nidaamka xafidida iyo maamullka macluumaadka gudiga maamulka garsoorka ay u suurto galinayso in la qabto shaqooyin tayo leh, waxa intaas dheer oo ay faa'iido ka tahay in xubnaha gudiga maamulka garsoorku mudada ay gudiga kamidka yihiin ay ogaadaan/la socdaan habka kulamada gudiga ee ay ka qayb-qqadanayaan ay u socdaan, kaasoo xubnaha gudiga u suurto galiya inay kasoo baxaan kaalintooda sidaa awgeed ayaa loogu baahday in lasoo saaro awaamiirtan kulamada gudiga.

Sidaa daraadeed ayuu gudiga maamulka garsoorka ee DDS uu soo saaray awaamiirtan asagoo ku salaynaya awoodiisa lagu tibaaxay bayaanka aas-aaska gudiga maamulka garsoorka, tirsi……../2014 qodobadiisa 12(1)(M) iyo 25(5)

QAYBTA KOOWAAD: QODOBADA GUUD

1 CIWAAN GAABAN

Awaamiirtan waxa lagu magacaabi karaa “Awaamiirta Habka Kulamada ee Gudiga Maamulka Garsoorka ee DDS” , Tirsi ……./2014

2. QEEXID

Erayada iyo Weedhaha lagu xusay awaamiirta gudeheeda, waxa loo adeegsan qeexitaanada ku cad bayaan gudiga maamulka garasoorka……. Hase yeeshee erayada ama weedhaha aan qeexitaanadooda laga dheehan karayn bayaanka waxa lagu qeexi sidan:

1. **“Kulan”** waa kulanka caadiga ah ama midka deg-dega ah ee ay yeeshaan gudiga maamulka garsoorka ee DDS ama gudiga heer gobol.
2. **“Dokument hadal qoraaleed”** waa hadal qoraaleed ay diyaariyaan xafiiska maamulku, ayna sexeexaan xubnaha gudiga maamulka garsoorku kaasoo yeesha tiro-taxan.
3. **“Fooramka gudiga”** waa marka xubnaha gudiga ay kala badh in kabadan (50+) inkabadan usoo xaadirto kulanka
4. **“Codka Muhiimka ah”** waa marka hal ajende ay gudigu u codeeyaan ee tirada codadka gudigu isle’ekaato.
5. **“Kulan deg-deg ah”** waa kulan loogu baahdo marka uu gudiga lasoo darso arrin aan lala sugi karayn go’aamintiisa kulanka caadiga ah ee gudiga.

3. XADKA DHAQANGALKA AWAAMIIRTAN

Awaamiirtan waxay dhaqan-gal ku ahaanaysaa kulamada caadiga ah iyo kuwa deg-deg a ah ee ay yeeshaan gudiga maamulka garsoorka ee heer deegaan iyo gudiga maamulka garsoorka ee heer gobol.

4. TILAMAAMAHA SINIJGA

Awaamiirtan gudeheeda meelaha lagu tibaaxay sinjiga Labka ah waxay tilmaan u tahay oo kale sinjiga Dhadiga ah.

QAYBTA LABAAD

5.MABAA'DIIDA KULAMMADA GUUD EE GUDDIGA

1.Kulanka gudiga maamulka garsoorku waa inuu salka ku hayaa, in si miisaman loo xaqiijiyo madax-banaanida, la-xisaabtanka iyo ka midho dhalinta hawlaha maxkamadaha.

2.Marka ay xubnaha gudiga maamulka garsoorka kulankooda yeelanayaan, waa inay fikirkooda si xor ah u dhiibtaan, midba midka kale fikirkiisa dhagaysto oo uu ixtiraamo, hadii fikir lagu kala duwanyahayna waa in ayagoo xubnuhu wada hadalo samaynaya laga doodo fikirka/mawduuca lagu kala duwanyahay, kadibna ayadoo la abaarayo kaliya fikirka oo la ixtiraamayo shakhsiga waa in la taageero ama laga horjeesto fikirka.

3. Xubinka kastana marka uu hadlayo ama uu fikir dhiibanayo waa inuu gacanta bixiyaa oo marka shir gudoonku u ogolaado uun uu hadlaa.

4. Inkastoo ay haboontahay ka hor inta aan mawduuc laga go'aan gaadhin si qoto dheer loo dhuuxo, hadana ma haboona in wakhti aan ku haboonayn nuxurka mawduuca oo ka badan inta uu mawduucu u baahanyahay loo isticmaalo maadaama ay tahay wakhti lumis.

5.Marka xubinkasta oo gudiga kamid ahi uu fikirkiisa nuxurka mawduuca ku saabsan dhiibanyo, waxa loo baahanyahay in uu ka hadlo, fikir ka dhiibto, su'aal ka dhiibto ama sharaxaad ka dhiibto kaliya nuxurka mawduuca markaas taagan. Ma haboona in lagu dul wareego oo nuxurka aan la taaban.

6.Xubinku marka uu fikirkiisa dhiibanayo waxa uu xaq u leeyahay in sida kuwa kale loo dhagaysto lana ixtiraamo, oo aan lagu kala salaynin masuuliyada uu xubinku hayo ama shaqada xubinka, waana inaan fikirka xubin qabo qasab lagu marsiinin kuwa kale ee waa in la fahansiiyo ama laga fikir duwanaado.

7. Xubin kastoo gudiga maamulka garsoorka kamid ahi marka uu gaadhayo go'aan ayadoo ay tahay inuu ku xisaabtamo masuuliyada la saaray oo salka ku haysa madax-banaanida iyo isla-xisaabtanka garsoorka, waa inuu xor ka ahaado faragalinta siyaasadeed iyo kuwayowga kala duwan ee kale.

8.Xubin kasta oo gudiga garsoorka ka tirsan kama hadhi karo kulamada gudiga ilaa ay lasoo darasto xaalad awoodiisa ka baxsan ama inuu shir-gudoonka gudigu fasaxo mooyee.

9. xubinkasta oo gudiga garsoorka kamid ah marka hawl-gudi loo diro waa inuu aqbalo hawshaas loo xil saaray, waana inuu kasoo baxo waajibaadkaas la saaray.

6. KU DHAQANKA SAACADAHA IYO YEEDHITAANADA KULANKA

1. Gudiga maamulka garsoorku labadii bilood ba hal mar bay fadhiisan, hase yeeshee hadii loo baahdo shir-gudoonku kulan deg-deg ah waa uu iskugu yeedhi karaa.

2. Gudiga maamulka garsoorku ee heer gobol sadexdii bilood hal mar bay fadhiisan, hase yeeshee hadii loo baahdo shir-gudoonku kulan deg-deg ah waa uu iskugu yeedhi karaa.

3. Hadii xubnaha gudiga maamulka garsoorka kala badh(50+) ay ajende diyaariyaan oo ay isku raacaan kulan deg-deg ah gudiga loo qabto, shir-gudoonka gudigu mudo 15maalmnood gudeheed ah buu iskugu yeedhi karaa xubnaha gudiga si ay kulan u yeeshaan.

4.Xubnaha gudiga marka kulan ay yeelanayaan loogu yeedho waa inay goorta la faray iyo goobta la faray ay iskugu yimaadaan.

5. Xubin kasta oo gudiga ka tirsan waa inuu kulanka ka qayb ahaado ilaa ajendeyaasha kulanka lawada dhamaystirayo, hase yeeshee hadii ay xaalad awoodiisa ka baxsan lasoo daristo waa inuu ka fasax qaataa shir gudoonka gudiga.

6. Hadii aanay jirin xaalad gaar ah, wakhtiga uu kulanku soconayaa I waa wakhtiga(saacadaha) uu shir-gudoonku qabto ama ajandeyaashu ku dhamaadaan.

7. Hadii aanay jirin xaalad kalifaysa, ajendaha loogu talo galay kulanka gudiga looma gudbin karo kulan kale oo ka baxsan ka taagan, hadii se ay jirto xaalad kalifta in ajende loo wareejiyo kulanka xiga, marka la iskugu yimaado kulanka xiga waxa u horayn oo laga doodi lana go'aamin ajendihii soo wareegay.

7. XAQIIJINTA IN FOORAMKA KULANKU BUUXSAMAY

1.Shir gudoonku gudigu kahor inata aanu furin kulanka gudiga, waa inuu xaqiijiyo in kala-badh in kabadan(50+) oo xubnaha gudiga ahi ay soo xaadireen**.**

2. Hadii xubnaha gudiga ee soo xaadira ay ka yaraadaan kala badh kulankaasi ma qabsoomayo.

3. Xubnaha kulanka u soo xaadira waa in magacaantooda laga diwaangaliyaa oo la xafidaa.

8. OGAYSIINTA IYO SHAACINTA AJENDAYAASHA

1. ka hor inta aanay xubnaha gudigu kulankooda yeelan waa in ajendaha kulanka iyo qoraalada(document) laba maalmood ka hor kulanka ay helaan. Hadii cid ka mid ah xubnaha gudiga maamulka garsoorka ay hayaan ajande dheeri ku ah ajendayaasha kale, waa in xubinkaas uu soo ogaysiiyo shir gudoonka.

2. Kadib marka uu shir gudoonku xaqiijiyo in fooramku buuxsamay, waa inuu ajendayaasha kulanka mid mid u soo dhigaa asagoo soo koobaya.

3. Kadib marka ay xubnaha gudigu maamulka garsoorku u codeeyaan ama ay kasoo horejeestaan ajendayaasha kulanka, shir gudoonku waa inuu xubnaha gudiga ujiheeyo inay u codeeyaan anixinta ajendayaasha ama laalida ajendeyaasha. Hadii uu jiro ajende ay xubnaha gudiga maamulka garsoorku sii gudbiyeen, waa inay si kooban u soo faah-faahiyaan kadibna waa in xubnaha gudigu ay ansixiyaan ama ay laalaan.

9.GEEDI-SOCODKA WADA-XAAJOODKA

1.Ayadoo loo eegayo sida ay ukala horeeyeen ayaa ajendayaasha looga wada xaajoon, wada xaajoodka kadibna ajandaha waa lawada ansixin karaa ama inta wax laga badalo ayaa la ansixin karaa ama waaba laga guuri karaa ama baadhitaan dheeri ah in loo yeesho ayaa la go'aamin karaa ama waxa loo balamin karaa in gashi loo soo ururiyo.

2.Marka uu xubinka gudiga kamidka ahi u codeynayo ansixinta ama uu u codeynayo laalida ama uu u codeynayo wax ka badalka ajandaha, waa inuu ku saleeyaa codeyntiisa cadeyn ku filan iyo sharciga ku haboon oo kaliya.

3. Marka ay ajandayaasha la go'aaminayo ee la ansixinayo ama wax laga badalayo ama jiho kale loo dhigayo waa in go,aankaas cod buuxa lagu meelmariyaa, hadii ay taasi dhici waydona waa in cod aqlabiyad ah lagu meel-mariyaa.

4. Marka ay gudigu ajende go'aaminayaan hadii codadka lagu go'aaminayaa ay isle'ekaadaan, waxa ansaxmi oo meel mar noqonaya dhanka uu codka shir-gudoonku raaco.

5.Hadii ajendayaasha lagu go'aamiyo cod aqlabiyad ah waa in codadka tirada yare e kasoo horjeestay kuwa badan, fikirkooda loo diwaangaliyaa.

10. Dhaqan-galinta Go'aamada iyo Ansixinta Hadal Qoraaleedka

1. Marka ajandayaasha la go'aamiyo waa in maalinka ku xigta maalinka la go'aamiyay, ay shir-gudoonka iyo madax-xafiiseedku bilaabaan dhaqan-galintooda ayadoo loo eegayo hadaba dabciga ajandaha.

2.Hadal qoraaleedka ku saabsan ajendayaasha kulan lagu yeesho, waa in hadal-qoraaleedkaas oo qoran la hor keeno gudiga kulan midkaas ku xiga, kadibna ay sexeexaan xubnihii gudiga ee kulankii hore ka qaybgalay. Hase yeeshee waa in hadal qoraaleedka oo diyaarsan la sii gaadhsiiyo xubnaha, hadii wax laga badalayona inta la hagaajiyo waa in sidaas lagu ansixiyaa.

3. Dokumenga Hadal qoraaleedyada waa in ayagoo lasiiyay tiro taxan uu xafiiska maamulka garsoorku xafidaa meel haboona dhigaa.

4. Dkumentyada hadal qoraaleedyada marka ay xubnaha gudigu sexeexaan kadib, waa in bog kasta oo dokumenga kamid ah lagu dhufto shaambada maxkamada.

11. KA BIXIDA KULANKA/SHIRKA

1. Xubinkasta oo ka tirsan gudiga maamulka garsoorka hadii ay ku dhacaan xaaladahan soo socda waa laga saari kulanka gudiga hadii:

B/xubinkasta oo ka tirsan xubnaha gudiga lagu soo oogo dacwada anshax ah ama hadii uu magacaabis helo ama hadii uu u tartamayo fursad waxbarasho ama hadii xubinka arrin ku saabsan loo fadhiyo.

T/. Hadii cida arrinkooda la eegayaa ay ehel ama xidid dhaw mid uun la tahay

J/Hadii cida arrinkeeda loo fadhiyo iyo xubinka ka midka ah gudiga ay arrin maxkamada ka socda isku hayaan.

X/Hadii arrinka gudigu eegayo uu xubin ka tirsan gudigu garsoor ka soo ahaa.

KH/Hadii uu xubinku arrinka dacwada la xidhiidha uu hada ka hor marag kasoo ahaa, ama hadii dacwada anshuxu si uun u khusayso xbinka.

D/ Hadii uu jiro arrin ka baxsan kuwan aan kor ku soo sheegnay, kaasoo sababa in xubinka shirka laga saaro marka uu gudigu isla-qaato.

2. In arrinka hab maamul ahaaneed lagu eego ma sababayso in xubinka laga saaro shirka gudiga.

3. Xubin ka mid ah gudiga maamulka garsoorku asagoon tixraacaya arrimaha lagu xusay farqada /1/ ee qodobkan, waxa uu shir-gudoonka gudiga usoo dhigi karaa in xubin ka tirsan gudiga laga saaro shirka gudiga. Kadib shir-gudoonka gudigu waxa uu aarinkan u soo dhigi gudiga sidaasna lagu eegi.

4/ Ayadoo laga duulayo qodobkan hadii ay shir-gudoonka gudiga iyo ku-xigeenkiisu ay shirka gudiga ka baxaan , waxa sii wadi oo shirka sii hogaamin xuinka kamid ah garsoorayaasha laga soo xulay maxkamada guud ee gudiga maamulka garsoorka kamid ah, hadii uu heerku yahay gudiga maamulka garsoorka ee maxkamada sare waxa sii wadi oo hogaamin xubin ka tirsan garsoorka maxkamada sare oo ah xubinka ugu shaqada fiican kana tirsan gudiga.

12. ANSHAXA XUBNAHA GUDIGA MAAMULKA GARSOORKA

1.xubnaha gudiga maamulka garsoorku mudada ay gudiga xubno ka yihiin, waa inay ku dhaqmaan qodobadan anshax ee soo socda:

B/ Waa inuuna si ugu talo gal ah u odhan hadalo aan la xaqiijin ama been ah.

T/Waa inaanu si ugu talo gal u magac bi'inin dadka kale.

J/ waa inaanu hadalo fal waxyeelaynaya nidaamka haboon ee shirka, ama mid isku-dhac abuura oo wax u dhima sumcada dadka kale ama waa inaanu ku kicin fal waxyaabahan tilmaamaya.

X/ waa in si aan haboonayn looga dhax galin ama aan looga hakid galinin fikirka uu xubin kale wato.

KH/ Waa inaanu faafinin siraha gudiga maamulka garsoorka.

D/ inta lagu guda jiro kulanka gudiga waa inaanu la iman wax ka baxsan ajandaha gudiga, waa inaanu mobile isticmaalin, waana mamnuuc inuu asagoo qayilay(jaad cunay) uu soo galo kulanka.

R/Falalka anshax darrada ah ee kale waa ka mamnuuc.

2. Xubinka gudiga ka tirasan ee ku kaca falalka anshax darrada ee kor lagu tibaaxay, ayadoo la eegayo hadba muga falka waxa lagu qaadi karaa talaabooyinka hoos kucad:

B/ Digniin AF ah baa lasiin karaa

T/ Digniin Qoraal ah baa lasiin karaa

4. Hadii uu xubinka ku kacay falalka kore, oo aanu ku saxmin talaabooyinka anshax ee laga qaaday oo uu ficilada anshax darrada ah ku cel-celiyo intoo hab qoraal ah lagu oagysiiyo cidii uu wakiilka u ahaa oo xataa cadeymaha loo raaciyo, ayaa laga codsan inay xubinkan mid kale kusoo badalaan.

13. AWAAMIIRTA AAN DHAQAN GALKA AHAYN.

Awaamiir kasta ama ficilada dhaqamiga ah ee lid ku ah awaamiirtan, dhaqan gal kuma ahaanayaan arrimaha lagu xusay awaamiirtan.

14. WAX KA BADALKA AWAAMIIRTA

Gudiga maamulka garsoorku waxa uu u awood leeyahay inuu wax ka badalo ama guud ahaanba uu laalo awaamiirtan.

15. WAKHTIGA DHAQANGALKA AWAAMIIRTA

Awaamiirtan waxay dhaqan galaysaa laga bilaabo maalinka gudigu ansixiyo ee shir-gudoonkuna sexeexo.

MAWLIID KAASOW AXMED

GUDOOMIYAHA MAXKAMADA GUUD

DAWLADDA DEEGAANKA SOOMAALIDA

MAXKAMADDA GUUD

Maxkamadda guud ee DDS

AWAAMIIRTA HABRAACA GEEDDI-SOCODKA JILOODKA

AWAAMIIR LAMBARTA___ /2014T.I.

ARAR

Maadaama uu dastuurka dawlada deegaanka soomaalidu masuuliyada garsoor ee uu saaray maxkamaduhu ay tahay mid sare masuuliyadan gudashadeedana loo baahanyahay in la abuuro laguno dhaqmo milgo iyo anshax hayád ahaaneed;

Maadaama oo ilaa waqti xaadirka aanay jirin awaamiir khusaysa habraaca jiloodyada isla markaasina lagu xisaabtamayo in aan lagu dhaqmi Karin geedi socod dacwadqaadiseed (jilood) oo aan lahayn habraan sugan oo cadcadaan leh;

Maadaama ganaaxa la saarayo loo adeegayaasha ku xadgudba habraaca geedisocodka dacwad qaadista maxkamaduhu uu ahaa mid aan lahayn habraac sugan loona baahanyahay islamarkaasana ay lagamamaarmaan tahay in la helo habraac sugan oo lafilankaro

Maadaama oo loobaahanyahay in habraaca dacwad qaadista (jiloodk) ay ogaadaan, ixtiraamaan laguna hogaamiyo garsooreyaasha, dhinacyada ishaya, macaamiisha (loo adeegayaasha) kasooqayb galayaasha fadhiga iyo bahda maxkamadaba, si loo xaqiijiyo kalsoonida ay shacabku ku qabaan hayada garsoorka iyada oo loohogaansamayo Lana suurtogalinayo in loo hogaansamo habraaca geedisocodka dacwad qaadista (jiloodka)

Ayaa maxkamada guud ee DDS iyada oo ka duulaysa awooda lagu siiyay bayaanka tirsigiisu yahay 206/2013 waxay soo saartay awaamiirtan;

QAYBTA KOOWAAD: QODOBA GUUD

1. CIWAAN GAABAN

Awaamiirtan waxaa loogu yidhi karaa awaamiirta habraaca geedi socodka dacwad qaadista (jiloodka) maxkamadaha DDS ee tirsigeedu yahay---------

2. QEEXID.

Haddii ay jumlada uu kujiro aanu macno kale siinin awaamiirtan habraaca geeddi socodka dacwad qaadista (jiloodka) maxkamadaha Dawladda Deegaanka Somaalida dhexdeeda; 1. **Maxkamad'** waxaa loola jeedaa maxkamadaha lagu aasaasay dastuurka Dawlada Deegaanka Soomaalida iyo bayaanka aasaaska maxkamadaha DDS ee tirsigiisu yahay206/2013 ee ah maxkamada guud, maxkamadaha sare(gobolada) iyo maxkamadaha degmooyinka iyo kuwa maamul magaalooyinka

2. **Guddi":** waxaa loola jeedaa gudiga garsoorka e lagu aasaasay bayaanka tirsigiisu yahay 2016/2013
3. **Hogaamin"** waxaa loola jeedaa gudoomiyayaahsa iyo gudoomiye ku xigeeenada maxkamada guud, maxkamadaha sare iyo maxkamadaha degmooyinka
4. **Garsoore"** waxaa loola jeedaa garsooreyaasha heer deegaan, heer gobol, heer degmo iyo heer maamul magaalo ee uu magacaabo golaha deegaanku waxaa kale oo kujira garsooreyaasha guddigu sii hawlgaliyo ee aan wali goluhu ansixinin
5. **Xubnaha magacaabista"** waxaa loola jeedaa xubnaha uu gudiga garsoorku magacaabo iyada oo laga duulayo bayaanka aasaaska guddiga maamulka garsoorka
6. **Shaqaalaha maamulka** waxaa loola jeedaa shaqaalaha lagu maamulo bayaanka aasaaska maxkamadaha deegaanka ama shuruuckale
7. **Jilood"** Waxaa loola jeedaa goobta ama qolka uu garsooruhu ama ay garsooreyaashudacwada ku qaadan dhinacyada ku dhagaysto, adeeg bixinta garsoorka ku bixiyo, markhaatiyada ku dhagaysto sidookalena goáanada lagu bixiyo isla markaasina ah goobta dacwad qaadista loo askumay.
8. **Booliska jiloodka"** waxaa loola jeedaa xubnaha booliska ah ee komishinka booliska heer degmo, heer gobol, heer maamul magaalo ay ugu soo meeleeyaan jiloodka si uu u sugo amaanka jiloodka.
9. **Anshax sugaha hanaanka jiloodka:"** waxaa loola jeedaa shaqaalaha katirsan maxkamada ee lagu meeleeyo in uu sugu anshaxa jiloodka (hanaanka dacwad dhagaysiga.
10. **Xeerilaaliye"** waxaa loola jeedaa xeerilaaliyaha loo magacaabo si waafaqsan xeerarka xafiiska cadaalada waxayna noqonayaan xeerilaaliyayaasha heer degmo, heer gobol, heer maamul magaalo iyo kuwa deegaanada iy federaalak ee loomagacaabo si waafaqsan xeerarka hayada hooga cadaaladeed.
11. **Qareen"** waxaa loolla jeeda xubinka fasax sharci uga haysta hayáda ay khusayso islamarkaasina ah xirfadle sharci iyo xubinkaste oo aan xataa haysanin fasax qareenimo balse wakiil ka ah xafiisyada dawlada, shirkadha gaarka loo leeyahay, iyo hayda'ha horumarinta si uu maxkamada uga doodo waxaana kujira waxaana kamaid ah wakiilada ciidamada federaalka , kuwa komishinada booliska iyo qareenada dawlada
12. **Turjumaan"** waxaa lola jeedaa. Xubinka maxkamadaha horteeda ka bixiya adeegbixinta turjumaanimada yaqaanana luu qada shaqo ee deegaanka, mida qaranka iyo luuqaadaha caalamiga ah iyo kuwa miidaarka (sign language)
13. **Macaamiisha"** waxaa loola jeedaa. Waxaa loola jeedaa macmiil kaste oo maxkamada arin u yimaada ama dhinacyada isu haya dacwada gacanta lagu hayo waxaana ka mid ah, dacwoodaha, dacweysanaha, codsadaha, xeerilaaliyaha, qofka soo dhawaysta cabasho, jawaabceliyaha, soo dhexgalayaasha, dhinacyada soo dhawaysta codsiga dhinac iskaga dhigida goáanka /ka soo horjeedka racfaanlaha, racfaansanaha.

14. **Markhaati”** waxaa loola jeedaa qofka lagu xusay dacwada ama jawaabta dacwada ama ku yimid amar maxkamadeed si uu mxakamada horteeda uga bixiyo marag furkisa waxaana kujira oo ka mid ah markhaatiya khabiirada ah
15. **Boolis”** waxaa loola jeedaa xubinka booliska ah ee maxkamda ku horyimaada amar maxkamadeed waxaana ka mid ah booliska federaalka, booliska deegaanka, heer degmo, heer gobol iyo heer deegaan, heer maamul magaalo, asluubta, booliska taraafikada iyo booliska jibriga.

3. JINSIGA

Awaamiirtan dhexdeeda arinkaste oo loola jeedo jinsiga labka ah sidookale wuu qabanayaa jinsiga dhediga ah

4. XADKA DHAQANGALKA

Awaamiirtani waxay dhaqan gal ku tahay dhamaan xubnaha ka qayb qaata geedi socodka dacwad dhagaysiga (jiloodka) gaar ahaan garsooreyaasha, xubnaha guddiga garsoorku magacaabo dhinacyada is haya, markhaatiyada, turjumaanka, shaqaalaha maamulka maxkamadaha, booliska ilaalada geedi socodka maxkamada, shaqaalaha anshax sugayaasha geedi socodka dacwad dhagaysiga. Ka soo qayb galayaasha/ dhagaystayaasha, booliska, seerrilaaliyayaasha, qareenada ama qofkaste oo xataa yaanu dhex joogin jiloodka (qolka dacwad qaadista balse ku sugan gudaha dayrka xafiiska

QAYBTA LABAAD

UJEEDOOYINKA IYO YOOLKA AWAMIIRTA HABRAACA JILOODKA

5. UJEEDDADA

Ujeeddada awaamiirtan habraaca jiloodku waa in la dhiso Lana hirgaliyo hay’ád ay dhaqan utahay anshax iyo milgo sare taasi oo suurto galinaysa in maxkamaduhu awoodda iyo masuuliyadaha uu sharcigu saaray u gutaan si haboon iyada oo macaamiisha la fahan siinayo hanaanka u dajisan jiloodka (geedi socodka dacwad dhagaysiga)

6. YOOLKA/HADAFKA

Yoolasha laga leeyahay awamiirta habraaca jiloodka waa kuwan soo socda;

1. In la hirgaliyo hanaan lagu hogaamiyo maxkamadaha iyo jiloodyada(ggedi socdka dacwad dhagaysiga);
2. Iyada oo oo anshaxa iyo milguhu sal u yahay in la dhiso hab dhaqan horey u socod leh
3. In la suurto galiyo habraac jilood oo cadcadaan iyo toosnaan leh;
4. In la suurto galiyo habraca jiloodka in garsooreyaasha, dhinacyada is haya, dadka ku sugan gudaha jiloodka si ay ula socdaan geedi socodka dacwad qaadista, ay u ogaadaan looguna hogaamiyo;
5. Si loo xaqiijiyo kalsoonida shacabka;

QAYBTA SADDEXAAD

7. HABRAACA JILOODKA (DACWAD DHAGAYSIGA KA HOREEYA)

1. habraaca jiloodka (dhagaysiga dacwadda ka hor)

Inta aan jiloodka (dhagaysiga dacwadda) la bilaabin kahor waxaa haboon in la eego hawlaha yaala/dajisan waana in tirsiga galka balanta leh, saacada loo mudeeyay, magacyada dhinacyada, nooca dacwada, iyo ujeedada galka loo balamiyay lagu soo bandhigo saxaarad ogeysiiska ama iskiriin talafiishin ah

2. Jilooltyada, xafiiska garsoorka, xafiiska rejisteraalka, xafiiska xogta, xafiiska maamulka shaqaalaha, iyo dhamaan xarumaha ay macaamiishu adeega ka doonanayaan waa in sicad xafiiska hortiisa magaciis loogu dhajiyaa.
3. Inta aan jiloodka la bilaabin kahor waa in masuuliyiinta adeeg bixinta jiloodka, xirfadlayaasha, iyo shaqaalaha maxada ee ay arintu khusayso ay xaqiijiyaan nadaafada jiloodka, laydhka qolka jiloodka,galdacadeedka maalintaasi balansan, buuga ajendaha garsoorka,baajka la duldhigo miiska ee muujinaya magaca garsooraha,shuruucda, warqadaha jiloodka,qalimaanta,cod duubayaasha, dubaha iyo dhamaan arimaha kale ee looga baahan yahay jiloodku in ay dhamaystiranyihiin
4. Xeer ilaaliyaasha fadhiga ciqaabta, qareenada,macaamiisha, eedaysanayaasha, iyo cidii kaleba inta aan jiloodka la bilaabin ka hor waa in ay sii galaan gudaha hoolka jiloodka iyaga oo garsoorka hortiisa ka soo jeedsanayana waa in xeer ilaalintu dhinaca midigta martaa, eedaysanayaashuna dhinaca bidixda, iyaga oo dhex galaya sanduuqa loo diyaariyay,qareenada difaacuna waa in ay dhinaca bidixda eeadysanayaasha agtooda maraan,markhaatiyaduna goob loo diyaariyay oo 2 mitir garsoorka ka durugsan waa in ay fadhiistaan turjumaankuna waa in uu dhinaca ku hayaa markhaatiga ama cida uu ka turjumayo, xukun qoruhuna waa in uu miiska garsoorka hortiisa meel loo diyaariyay fa dhiistaa sidoo kalena dhegaystayaashuna waa in meesha loogu talo galay ay ee loo cayimay ay fadhiistaan
5. Dacwadda madaniga ahna dacwooduhu jiloodka waxa uu ka marayaa dhinaca midigta, dacweysanuhuna waxa uu ka marayaa dhinaca bidixda, qareenkuna dhinaca midig ama dhinaca bidix ayaa wuxuu kamarayaa cidda uu qareenka u yahay ee wakiilatay. markhaatiyadu waxay fadhiisan meel 2mitir u jirta garsoorka oo loo diyaariyay, turjumaanku waxa uu fadhiisan markhaatiga ama cida uu ka turjumayo agtiisa/dhiniciisa, xukun qoruhu waxa uu fadhiisan goob loo cayimay/diyaariyay oo miiska garsoorka ka soohorjeedkiisa ku began, sidookalena dhagayastayaashu waa in ay sii fadhiistaan goobta loogu talo galay ee loo diyaariyay.

QAYBTA AFRAAD

HABRAACA JILOODKA

8. SAACADA LA BILAABAYO IYO HANAANKA LOO BILAABAYO JILOODKA

1. Iyada oo saacadaha shaqo ee ay dawladu xeerisay sideeda tahay jiloodka waa in la bilaabo galinka hore 3:30 galinka danbena wuxuu bilaabmaya 8:00.
2. Iyada oo laga duulayo xaaladaha cimilada deegaanka saacadaha uu qodobka sare ku xusan xeeriyay waa la badeli karaa
3. Garsooruhu isaga oo ku dhufanaya dubaha waa in uu ku dhawaaqo furanka jiloodka;

9. UADEEGISTA MACAAMIISHA SIDA LOO KALA HOREYSIINAYO

Garsooruhu isga oo balama ku salaynaya awaamiirta maareynta geeddisocodka dacwadaha, waa in uu mudnaanta siiya arrimaha ama dacwadaha ay tahay in mudnaanta la siiyo sidoo kalena macaamiisha u kala horeysiiya isaga oo raacaya sida ay xeerinayso awaamiirta maarenta /fulinta dacwaduhu;

10. HABKA DHAARTA

1. Garsooraha ama shaqaalaha maamulka maxkamaduba iyaga oo natiijada iyo ujeeddada fahan siinaya waa in ay dhaarta u fuliyaan si waafaqsan qodobada xidhiidhka la leh ee ay xeerinayaan habka xeerka ciqaabta iyo habka xeerka madanigu
2. Maadaama ay Dhaartu doorka ugu wayn ku leedahay marka la ga eegayo dhina xaqiijinta runta iyo sugida cadaalada ayaa, waxaa waajib ku ah qof kaste, dhinacyada is haya, turjumaanka in ay u dhaartraan hanaan ay ugu qasaban yihiin in ay runta sheegaan
3. Dhaarta iyada oo lagu hor gudanayo garsoorha ama maxkamada horteeda ayaa waxaa dhaarta qaadi garsoorhaha laftigiisa ama shaqalaha maxkamada. Waxaana dhaarta lagu qaadi fadhi furan horteeda waxaana loo qaadi si ay maqlayaan dhammaan bahwadaagta maxkamaddu;

11. IN LOO ISTAAGO IXTIRAAMIDA GARSOORKA

1. Geeddi-socodka dhexdiisa marka la akhrinayo goáan, ganaax, xukun, amar, dacwada iyo jawaabta dacwada la is waydaarsanayo, dooda lagu jiro, ladhagaysanayo markhaatiyada macaamiisha, cabashada macaamiisha la dhagaysanayo ama uu garsooruhu arin gacanta ku hayo waa in dhinaca ay arintaasi khusaysaayi waqti suurto gal ah u istaagaa ixtiraamida garsoorka.
2. Iyada oo arinta lagu sheegay qodob hoosaadka sare ku xusan sideeda yahay, ayaa iyada oo laga duulayo kolba sida ay xaaladu tahay hadii ay arintu dheeraato/waqti badan qaadato macmiilka hadlaya mooyee macmiilka kale waa uu fadhiisankaraa. Hadii dhinacyada dacwada sida dacweysnayaasha ama dacwoodayaaashu badan yihiin dhinaca maraga ama dooda laga dhagaysanayo mooyee dhinaca kale way fadhiisan karaan. Sidookale sababo la xidhiidha xanuun, Uur, ama naafanimo darted hadii aanu qofku u istaagi Karin garsooruhu in uu fadhiisto waa uu u fasixi karaa

12. CODKA OO KOR LOO QAADO

1. Garsooruhu marka oo jiloodka hogaaminayo waa in uu codkiisa gaadhsiiyaa/ama u hadlaa si ay dhamaan dhagaystayaashu maqlikaraan
2. Xeerilaaliyayaasha,qareenada, matkhaatiyada iyo , dhinacyada dacwada iyo macaamiishuba doodooda marka ay jeedinayaan.; waa in ay u hadlaan si ay maqlikraan garsooraha, iyo dhinacyada kale ee qaybta ka ah dacwada;

13. HABKA LABISKA

1. Garsooreyaashu marka ay jiloodka galayaan waxay xidhanayaan dharka garsoorka waxayna ukala xidhanayaan sidan soo socota

2. Garsoorka maxkamadda guud ee DDS waxay xidhan goon madaw (dharka jiloodka) oo midab bullug ah oo luqunta ilaa lugaha gaadhaya leh qoortana lagaga xidhay karabaati cad islamarkaasina qoortana

kuleh wareeg dahabi ah sidookalena labada gacmood ee goonkana ay kaga yaalaan saddex liid oo cadaan ah;

3. Garsoorka Maxkamadda sarena waxay xidhan goon madaw oo midab buluug ah oo qoorta ilaa lugaha gaadhaya leh, sidookalena laba diilimood oo wareeg dahabi ah qoorta ku leh sidoo kalena goonka gacmihiisa laba liid oo buluug ahi ay kaga yaalaan;
4. Maxkamadaha degmooyinka ama maamul magaalooyinkana goon madaw oo midab buluug ah oo qoorta ilaa lugahagaadhaya ku leh qoortana lagaga daray hal wareeg oo dahabi ah. Sidookalena gacmaha hal liid oo buluug ah ku leh

2, iyada oo arinta lagu shegay qodobjoosaadka sare ku xusan ay sideeda tahay ayaa hadana marka la dhagaysanayo arin ciqaab ah oo khusaysa caruurta daýarta ah arimaha lagu sheegay qodob hoosaaadkaasi lama dhaqan galinayo/dabaqayo. Sidooklaena arimaha qoyska, fadiyada caruurta iyo haweenka arimaha khuseeya ee caruurta laxidhiidha marka gacanta lagu hayo garoorka, dhinacyada dacwada isu haya, xirfadlayaasha sharicga, iyo waliba anshax sugayaasha jiloodku kolba sida ay lagama maarmaanka u tahay wa ay iska dayn karaan xidhashada dharka jiloodka.

3, xeerilaaliyayaasha deegaanku iyada oo goonka uu xafiiskoodu aqoon sanyahay inta uu soo xidho jiloodkana soo xaadiroay sideedatahay ayaa waxay xidhanayaan goon buuxa/dhamaystiran oo madaw, luquntuna/qoortuna cas tahay. Qareenaduna goon madaw oo buuxa/dhamaystiran oo liid ama qoor qabad cadaan ah leh. Qareenka difaacuna/dawladuna goon madaw oo buuxa/dhamaystiran qoortana ay cagaar tahay hadii midabka goonka labadalayo waa in xafiiskaasi/haydaasi badelaysaa ay soo ogeysiiso maxkamada.

4, Arimaha lagu sheegay qodob hosaadka 1aad iyo 2aad ee qodobkan iyada oo ay sideeda tahay garsoorayaasha, xeerilaaliyayaasha iyo qareenadu waxay gudaha ka xidhan: Raga dhar dhamaystiran oo dun/maro ama suuf ah, kloodh iyo surwaal, shaadh iyo karaabaad, sidookale dumarkuna dirac, shaadh iyo goon/haaf ama cabaayad, funaanad ama shaadh, sidooklaena waa in goonka siibad ama sureero ilaa luquntа lagu xidhaa;

5, wakiilu dacwo kaste (dhameeye) haduu rag yahay waa in uu xidhaa dhar buuxa koodh iyo surwaal ama shaadh iyo surwaal iyo karaabaat. Sidookale haday dumartahay waa in ay xidhataa dhar buuxa/dhamaystiran Dirac iyo shalmad, shaati, funaanad iyo goono/haaf ama cabaayad hoostana shad ama funaanad uga jirto;

6, arinta lagu sheegay qodob hoosaadka 4aad iyo 5aad ee qodobkani iyada oo ay sideeda tahay garsooraha, xubinka magacaabista ah, xeerilaaliyaha, iyo qareenka waxaa ka reeban in ay xidhaan dabagaab, jiinis, dhar goo goán, garan, dharka qoraalo kala duwan ay ku qorqoran yihiin ama kabo sandal ah;

7, garsoore kaste, kalkaaliyayaasha garsoorka, qareenka iyo xeerilaaliyaha waxaa kareeban in ay timaha bixiyaan, timaha gun guntan sameystaan. Sidookalena hadii ay dumar tahay waa in aanay samaysan timo aan wajigeeda laga arki karan koofiyadna waa in aanay xidhan;

8, booliska jiloodkuna waa in uu xidhaa dhar u gaara oo haanankan sare lagu sheegay waafaqsan ama muujinaya in uu yahay sharci ilaaliyaha jiloodka

9 rejistreraalka, anshax sugaha jiloodka cod duubayaasha ama shaqaalaha kale ee maxkamada ee jiloodka lahalmaala waa in ay xidhaan dhar loo asteeyay ama goon ku haboon sharafta iyo karaamada jioloodka islamarkaasina ay maxkamadu diyaarisay iyada oo laga duulayo awaamiirta gunooyinka garsoorka ee maxkamadaha islamarkaasina kharashkooda ay maxkamada guud daboolayso

10 shaqaalaha maamulka ama taakulaynta ee maxkamadaha qaab labiskooda caadiga ah si kaduwan in ay u dhaqmaan kuma qasbana haseyeeshee awaamiirta gunooyinka iyo labisku shaqaalaha ay xeerinayso saacadaha shaqada iyo goobta shaqada marka ay ku sugan yihiin waxaa waajib kasaaran yahay in ay xidhaan dharka loo asteeyay

11. iyada oo arinta lagusheegay qodobkani ay sideeda tahay: garsooreyaasha, xubnaha magacaabista ah, xeerilaaliyayaasha, qareenada, booliska iyo waliba shaqaalaha maamulka ee maxkamada waxaa ka reeban in ay

jiloodka soo galaan iyaga oo labisan khamiisyada aadka u gaagaaban, daba gaabka ama saraawiisha dhajiska ah kuwaasi oo nusqaamin kara ama hawlaha jiloodka carqalad/tash galin kara ama aanan la jaanqaadaynin/kuhaboonayn sharafta iyo karaamada jiloodka;

12 dhagaystayaasha am am aka soo qaybgalayaasha, dhinacyada dacwada isu haya looma ogoloa inay soo xidhaan dhar ay ku qoran yihiin qoraalo caksi ah, ama geedi socodka maxkamada saameyn ku yeelan Kara, ama inay jidhkooda soo xardhaan toona.

13 hadii aanu dhaqtar caafimaad u qorin qofna loma ogola inta uu muraayado madaw oo aan indhihiisa laga arkaynin inta uu soo xidho in uu jiloodka soo galo

14 garsooraha, xubnaha gudigu magacaabo, xeerilaaliyaha ama qareenka looma ogola in ay soo xidhan koofiyad qarinaysa muuqaalkiisa shaqsi ahaaneed ama isaga oo qoorta ay kaga marantahay jubad/iskaarfi in uu jiloodka soogalo;

15 qofkaste looma ogola in uu jiloodka soo galo isga oo xidhan dhar si buuxda indhihiisa iyo wajigiisa u qarinaya;

16 iyada oo arimaha lagu sheegay qodob hoosaadka 14 iyo15aad ee qodobkani ay sideeda tahay: ayaa hadana garsooraha, xubnaha guddigu magacaabo, xeerilaaliyaha, ama qareenkun dharka dhaqanka ama diinta la xidhiidha inta ay soo xidhaan jiloodka waa ay soo gali karaan :: si kastaba ha ahaatee danlayaasha jiloodka ama dhinacyada dacwada isu haya iyaga oo iyaguna soo xidhana kara hadana qofkaste oo iayaga kamid ah hadii loobaahdo waxaa lagu amri karaa si aanan diintiisa iyo dhaqankiisa ka hor imanaynin in uu inta sare faydo;

17 xeerilaaliye kaste ama qareenkate waa in uu goonkiisa dibada kusoo xidhi jiloodkana soo galo isaga oo xidhan waaxaana ka reeban in jiloodka dhexdiisa ay goonka ku xidhaan ama isga bixiyaan.

18, qofkate oo ay kujiraan xubnaha gudigu magacaabo iyo shaqaalaha taakulayntuba/maamulka waa in aanay ku buuqin ama fal deganaanshaha jiloodka buuq galinaya ku smaynin jiloodka ama qolka garsoorka

19, Waxaa mamnuuc ah oo la reebiyay in goon jactadsan ama usgag ah jiloodka lala tago;

14. QALABYADA MAMNUUCA AH

Qofkaste oo jiloodka dhagaysanaya/ka sooqaybgala inta uuna jiloodka soo galin ka hor waxaa lagu qasbi in uu telefoonada gacanta (mopile phones) ama qalabyada kale ee elgterooniga ah ee codka dhalinkara uu damiyo.

15. IXTIRAAMIDA JILOODKA

Qofkaste oo shaqaalaha maxkamadda ah: booliska: loo adeegayaasha: dhinacyada dacwada ku doodaya: ama macaamiisha kaleba marka ay jiraan arimahan soo socda iyaga oo madax hoos dhigaya waa in ay muujiyaan ixtiraamka ay jiloodka u hayaan;

1. Garsooruhu marka uu baxayo ee uu dhmeeyo shaqada jiloodka/soo gabagabeeyo geedi socodka dacwad dhagaysiga
2. Marka la sheego in garsooruhu jiloodka soo galayo ama jiloodka ka baxayo
3. Macmiilkaste/danle kaste oo dhagaysanaya sI waafaqsan xeerka jiloodka
4. Marka uu garsooruhu akhriyo amar, gungaadh, xukun ama goáan islamarkaasina dhameeyo

16. HABKA LOO MAAMUUSO MARKA LOO YEEDHAYO GARSOORKA

1. Hogaaminta maxkamada ama masuuliyiinta sar sare waqti kaste iyada oo sida ay u kala horeeyaan loo kala horeysiinayo waa in ay garsoorka ula hadlaan si ay qadarin ku dheehantahay xusayana magacooda oo buuxa, iyo masuuliyadooda islamarkaasina raacinaya hadii uu rag yahay ‘’mudane’’ hadii ay dumartahayna ‘’marwo’’

2. Qofkastena waxaa waajib ka saran yahay hadii uu garsoore lahadlayo jiloodka gudihiisa iyo jiloodka dibadiisaba in uu ugu yeedho mudane garsoore hadii rag yahay hadii ay dumartahayna ‘’marwo’’

17. KU GARSOORIDA JILOOD FADHI FURAN

1. Marka laga reebo arrimaha uu sharcigu amray in fadhi xidhan lagu eego arinkaste waa in lagu eego/qaado fadhi furan;
2. Qofkastaayi waxa uu xaq u leeyahy in uu jiloodka soo galo oo uu dhagyasto ama la socdo gedi socdka jiloodka: haseyeeshe hadii la soo buuxiyo: dhinacyada dacwada isu haya qoyskooda ama dooda gacanta lagu hayo cida ay khusayso waa in la soo galiyaa;

18. HANAANKA BALAN BIXINTA

1. Garsoore kaste waa in uu u cuskadaa ama raacaa balansiinta galdacwadeedyada, kalahoreysiinta, iyo goáan/xal siintaba mudo xiliyeedka lagu dajiyay awaamiirta maareynta dacwadaha ee maxkamadaha DDS
2. Garsoore kaste marka uu ballan siinayo galdacwadeed waa in saacada, maalinta, bisha iyo fadhigaba isaga oo eegaya uu ku cadeeyaa.
3. Hadii aanan galka la goáamin/xal uuna helin, ama la dhamaystirin ama sida uu sharcigu xeeriyay aanan si kumeelkaadh ah galka loo xidhin xidhsiimahaasina galka aanan lagu diwaan galin waa in garsooruhu geedi socodka balanta danbe iyo waxa uu u mudaysanyahba macaamiisha ogeysiiyaa sidaasna galka ku diwaan galiyaa.

19. FALALKA JILOODKA MAMNUUCA KA AH

Qofkaste waxaa mamnuuc ka ah in uu jiloodka gudihiisa ku sameeyo arimahan soo socda.

1. Marka uu garsooruhu jiloodka wado/geedi socodka kujiro in qofna qofka dhiniciisa fadhiya cod uu qofkale maqli karo ula sheekaysto, qosolk iyo moobaaylka oo lagu hadlo
2. In jiloodka dhexdiisa lagu akhriyo joornaal ama qoraalkaste iyada oo loo akhrinayo si codka lamaqlayo, ama qofka muuqaalkiisa qarinaysa ama dareenka dadka kale soo jiidanaysa.
3. In jiloodka cod ahaan, calaamad/miidaarin ahaan ama qaab kastaba loogu buuq ama dooda lagu sameeyo fal aan haboonayn
4. Marka laga reebo biyaha in sharaabyada kale lagu dhex cabo, wax lagu dhax cuno,jaad lagu dhax qayilo,sigaar lagu dhax cabo, xanjo lagu dhax calashado ama la dhax seexdo
5. Iyada oo kasooqaybgalayaasha jiloodku xaqa ay u leeyihiin inay fadhiistaan ay sideeda tahay: hadana, in loo fadhiisto haanaan isu gudubka xanibaya iyada oo labada lugood isweyfaar laysku dul dhiganayo, in miiska lagu dul fadhiisto. In lagu dul fadhiisto aaladaha loo gu talo galay in ay dadka ka joojiso xaga jiloodka .
6. In jiloodka lala soo galo qalabka wax guba, hubka, ulaha ama walxaha la laadlaadsado, waxaase ka reeban qalabka anshax sugaha jiloodka,booloika maxbuuska ama eedaysanaha jiloodka keenay ama dhibaato khaas ah darted usha la cuskado/ qofka usha taageersanaya
7. Marka laga reebo warbaahinta uu garsooruhu ama hogaaminta saree e maxkamadu u fasaxay qofna jiloodka dhexdiisa isaga oo isticmaalaya moobaayl gacmeedkiisa, kaameeradama fiidyoo sawirleh sawir ama cod duubid kuma dhex samayn karo
8. Shandadaha, iyo boorsooyinka waaweyn iyo qalabkaste oo oo shanqadh ama cod aan loo baahnayn u keeni kara hanaanka suubanaanta iyo anshaxa jiloodka in jiloodka lala soo galo. Waxaana la reebiyay qaabkay doontaba ha noqotee wax kaste oo amaanka iyo xasiloonida jiloodka khal khal galinaya.

20. ANSHAXA GARSOORAHA LOOGA BAAHAN YAHAY

1. Ilaalinta anshaxa fadhiga jiilootka iyo
2. Diyaarinta diiwaanada dacwadaha, islamarkaana uu xaqiijinayo joogista dhinacyada, sidoo kalena isagoo hubinaya in diiwaannada loo diyaariyay siday u kala horreeyeen.
3. Ilaalinta saacadaha shaqada iyo yeedhinta hoggaaminta dhageysiga. Haddii uu ku habsaamo sabab macquulgala awgeed waa inu ixtiraama danleyda islamarkaana uu raali galiya.
4. Fadhi-guddoonka chilootku si uu u ogaysiiyo bilawga dhagaysiga dacwadda waxa uu garsooruhu miiska ku dhufanaya dubaha.
5. Waa In uu sameeyo diyaargarow ku filan maalinta uu galayo kiisaska diwaanada la soo bandhigay.
6. Garsooruhu marka uu hoggaaminayo fadhiga dhagaysiga dacwadaha waa in uu dabaqo islamarkaana ixtiraamo Hiddaha, dhaqanka iyo Diinta bulshada.
7. Waa in dacwad-oogayaasha, shaqaalaha maamulka maxkamadda, booliiska, wakiillada xafiisyada kala duwan, dhagaystayaasha dacwadda iyo macaamiisha iyo danley kasta la ixtiraama. Sido kale, waa in maragyada labada dhinac iyagoo la ixtiraamayo xuquuqdooda islamarkaana loola dhaqmo si siman;
8. Waa in dhinacyada is haya, maragyada iyo dadka kale ee ka soo qaybgalaya dhageysiga uu ula hadlo si xushmad muujinaysa, iyadoo uu ugu yeedhayo islamarkaana adeegsanaya taytilada xirfadaha ee sida; Marwo, mudane, iyo wx.
9. Haddii maalinta ay ballantu ahayd go'aan ama amar in uu dhaco, waa in sababta kaliftay uu uqeexo danleyda, islamarkaana isaga oo garsooruhu diwaanka ku dhigaya sababta uu sheegay, sido kalena iyadoo uu usheegayo danleyda cilladdu in ay tahay mid dhanka maxkamadda ah ama garsooraha, ama fadhiga ah, islamarkaana si xushmad leh raaligelin uga bixinaya.
10. Si Garsoore kasta si uu ugu sugnaado nidaam garsoor oo caddaaliya waa in uu nidamgeeddi-socodka caddaaladda: haddii mabda'a la raaco: in loo oggolaado macmiil kasta inuu fikirkiisa si xor ah u cabbiro isagoon xishood lahayn.
11. Garsooreyaashu waa in ay ula macaamilaan macaamiisha, qareenada iyo dacwadaha hab waafaqsan shuruucda kala duwan ee nidaamka hab-dhaqanka garsoorka, xeerka anshaxa garsoorka, iyo qodobada hab-raaca maamulka iyo maaraynta geeddi-socodka dacwadaha.

21. NIDAMKA ANSHAXA EE LOOGA BAAHAN YAHAY MACAAMIISHA

1. Macaamiisha fadhi-jiloodka waxaa looga baahan yahay dabaqidda arrimahan soo socda;

A. Imaanshaha maalinta ballanta, goobta iyo Saacada ballanta;

B. In ay fadhiistan goobta jiloodka ee loogu talagalay ;

C. In ay yimaadan maalinta ballanta iyagoo si wanagsan isugu soo diyaariyan dooda;

D. Waa in uuna hal dhinac imaanin xafiiska garsooraha, iyadoo uusan joogin dhinicii kale ee doodu ka dhexaysay, ama ayna ogolaansho ka haysan garsooraha;

E. Waa in shaqaalaha anshax sugidda jiloodka, booliska, shaqaalaha geeddisocodka jiiloodka, iyo qareenadu ay la socdaan nidaamka geeddisocodka jiloodka, islamarkaana ogeysiiyaan macaamiishooda.

F. Haddii ay joogan garsoorayaasha jiloodku iyo haddii ayna jooginba waa in la fulliyo amarada lagu dabaqayo anshaxa qolka dhagaysiga dacwadaha.

G. Codsiyada ugarsoorida macaamisha (danlayda) maxkamadda ay ka dalbadaan waa in loo fulliyo si waafaqsan sharciga, islamarkaana iyadoo la dabaqayo nidaamka geeddisocodka maxkamadda;

H. Soo bandhiga dhammaan doodaha, diidmada iyo soo jeedintaada si toosa ugusoo dhawayso maxkamadda.

I. Macmiil kasta marka uu usoo bandhigayo garsooraha dooddiisa ama dacwaddiisa ama marka uu garsooruhu la hadlayo waa in uu indhaha la helaa garsooraha.

J. Dhammaan doodaha, diidmada iyo fikradaha aad kusoo bandhigayso jiloodka waa in ay ahadan kuwo ku salaysan oo kaliya caddaymo xaqiiq iyo caddaalada;

K. Muddada lagu guda jiro geeddisocodka dooda chilootka waxaa looga baahan yahay macmiilku in uu ka dhawrsanaado ku dhawaaqida magaca garsooraha, uguna yeedho sidan

"Maxkamadda sharafta leh" ama "Garsooraha sharafta leh";

L. Inkasta oo waajibaadka ugu horeeya ee xaqiijinta hab-dhaqanka chilootka ay tahay doorka garsooraha, hase ahaate waa in aan lagu xadgudbin nidaamka anshaxa chilootka;

M. Inaad ku hadasho adigoo samaynaya dhaqdhaqaaqyada jidheed ee munaasibka ah, islamarkaana aan xaddidayn fikirka macmiilka ama difaacah, haddii aysan ahayn mid wax u dhimaysa sharafta chilootka ama qas u horseedaysa.

N. Xaqiijinta in ay joogaan maragyadu ka hor inta uuna chilootku bilaaban;

O. Iyadoo la raacayo maragyada ku taxan eedeymaha ama jawaabaha waa in ay keena caddaymo is waafaqsan oo si sax ahana u xaqiijinaya cidda ay yihin iyo ciwaanadooda meelaah ay joogaan lagu soo lifaaqo islamarkaana si wadajira isusoo raacinaya;

P. Qof kasta oo dacwad uu udoodayo gacanta ku haya, isagoo ilaalinaya dadka maragyada sharaftooda, islamarkaana ula hadlaya si munaasiba waa inuu usoo bandhigo su'aalo;

Q. Marka amarka, xukunka ama go'aanka lagu dhawaaqo, ama garsooraha, isaga oo aan muujin wax ereya diidmo ah, si habsami leh oo aamusnaan ah ilaa dhammaadka, islamarkaana ay jirto cabasho, waxa uu qofku racfaan u qaadanaya cidda ay khuseyso ama wuxu soo gudbisan karaa codsiga cabashada hab waafaqsan nidaamka chilootka;

R. Waxaa guud ahaanba mamnuuca in qofku soogalo chilootka isagoo sakhraansan ama ku sugan jawi daroogo;

S. Qofka macmiilka ah ee qufacaya ama hargab qabo waa in uu fadhiga ka codsado in loo hormariyo isagoo marka hore xaaladdisa la socodsiinaya chilootka, ama uu chilootka dibaddiisa kusugo inta ay ka gaadhayso taradisu;

T. Hooyada ilmaha sidata, xaamilada uurka leh, dadka naafada, dadka da'da ah iyo qofka ay arrimo ka madax bannaani ku dhacan, si loogu horreysiiyo adeegoda chilootka waa in marka hore xaaladdooda ay la socodsiiyan chilootka;

2. Macmiil kasta waxaa ka mamnuuca inuu sameeyo asbaabahan soo socda;

A. In uu ka baxo chilootka marka uu garsooraha fadhigu bilaabo akhrinta kiiska, bayaaminta xukunka, go'aanka ama dhageysiga maragyada kaddib;

B. Iyadoo ay tahay macaamisha ama dhinacyada is haya in aan la xaddidin fikirkooda, haddana waxaa mamnuuca samaynta calaamado dhaqdhaqaaq jidheed ah oo ku saabsan habboonaanta iyo habboonaan la'aanta arrimaha uu garsooraha fadhigu kaga hadlay chilootka, il jebinta, sunnayaasha, wejiga oo aad xidho, ama fal-celinada kale aan munaasibka ahayn islamarkaana muujinaya diidmada, sida in qofku isagoo kasii jeeda garsooraha ama fadhiga ujawaabo, ama in uu la doodo garsooraha;

C. Haddii ayna jirin xaalad caafimaad oo dhakhtar caddeyay ama uuna garsooraha fadhigu si gaarahaaned ugu ogolaanin, macaamiisha iyo xirfadleyaasha sharcigu in qolka fadhi chilootka ay ku dhex cunteeyan, xanjo ku dhex axadhan, ama ay la yimaadan cabbitaan biyo ka baxsan;

D. Maxkamaddu goobta ay ugu talo gashay sigaar cabka goob ka baxsan in sigaar lagu cabbo fadhi chilootyada maxkamadaha, waaxa adeeg bixinta ee maxkamadaha in xaalad kasta oo jirta aan lagu dhex cabbi karin sigaar. Sido kale, in Jaad (Qaad) lala soo galo ama lagu dhex qayilo maxkamadaha.

E. In qaylo iyo buuq ama rabshad laga sameeyo maxkamadaha dhexdooda, fadhi chilootyada, agagaarka xafiisyada garsoorka;

F. Dhinacyada is haya in ay hadlaan ama dooda dhex-galaan iyagoo aan loo ogolaanin;

G. Marka aad dacwaddaada u sharraxayo chilootka in aad adeegsato ereyo ayna bulshada intooda badani fahmaynin, haddii uu waayo ereyo u dhigma kuwa afka shaqo ee maxkamadda islamarkaana uu adeegsado erayo afaf kale isagoo aan fasax ka haysan chilootka;

H. Samaynta faro-taagtaag bixinaya macno aan bulshada ku habbonayn, taaso uu garsooraha ama fadhi chilootka ama dhagaystayaasha fadhiga uu u isticmaalayo islamarkaana isagoo adeegsanaya gacan kahadalo aan munaasib ahayn sida faro saydh-saydhka;

I. Dhinac kasta marka uu soo bandhigayo dooddiisa waxaa ka mamnuuca in uu dhinaca kale ugaysto ku xadgud cirdi, bahdilaad, ceebayn, ama hanjabaad;

J. Marka lagudo galo dhagaysiga doodaha dhinacyadu in si toosa ay chilootka ugu soo bandhigaan dooda fikradahooda, mooye in ay wada hadalo gaarahaneed yeeshan;

K. Waxaa kale oo mamnuuca, ku dhaqanka arrimaha la hilmaama qodobadan iyo xadgudubyada anshaxa ee kor ku faah-faahsan, iyo in chilootka la keeno caruurta haddii aysan jirin xaalad adag oo kalifta ama haddii ayna maxkamaddu lahayn goob lagu hayo carruurta;

22. ANSHAXA LOOGA BAAHAN YAHAY MAAMULKA SHAQAALAHA MAXKAMADDA, REJISTERAARADA IYO ADEEGYADA CHILOOTKA

1. Intan la bilaabin chilootka ka hor waa in loo dhamaystira shaqaalaha maamulka adeega chilootka, xaalad walba oo timaada si ay taageero buuxda u siinaya;
2. Maalinta ballanta ka horeysa waa in garsooraha loo gudbiyo dukumeentiyada diwaanada ballantodu gaadhay oo dhammaystiran;
3. Gudashada shaqada chilootka si habsami leh ama jahwareer la'aana;
4. Shaqsi ahaanba ha ahate waa in macaamisha si wanaagsan oo ixtiraam leh loogu adeega;
5. Dabaqidda amarada garsooruhu amray, addeecida iyo dhaqan-galinta waqti xaadirka loogu talo galay;
6. Haddii aanay lagamamaarmaan u ahayn hawlaha geeddisocodka chilootka, garsooraha, dhinacyada is haya, maragyada ama cid kalaba lama sheekaysan kartid iyadoo ay dooddu socoto;
7. Xafiddida diiwaanada iyo dukumeentiyada maxkamadda, iyo horgeynta chilootka muddadi loogu talo galay;
8. Dabagalka shaqaalaha maamulka adeega chilootka iyo gudashada waajibaadkoda shaqo ee la xidhiidha arrimaha fadhiga;
9. Dabagalka agabka looga baahan yahay chilootka iyo samaynta si loo buuxiyo;
10. Ilaalinta sirta diiwaanka, xaqiijinta nooc kasta oo caddayn ama qoraal ah in ay ku lifaaqan tahay diiwaanka, iyadoo aan ogolaansho iyo ogaansho laga helin chilootka;
11. Iyadoo la raacayo qodobada awaamiirtan, masuuliyiinta guddigu magacaabay, iyo shaqaalaha maamulka waa inay gutaan mas'uuliyada iyo waajibaadka lagu siiyay xeerkashaqaalaha.

23. MAS'UULIYADDA IYO WAAJIBAADKA AF-CELIYAHA (TURJUMAANKA)

1. Bixinta adeeg af-celineed habboon oo hufan;
2. In macaamiisha aad ula hab-dhaqan wanaag iyo Ixtiraam;
3. Gudbinta tarjumaadda saxda ah oo aan eex lahayn;
4. U hogaansamidda iyo dhaqan gelinta amarada garsooraha;
5. Turjumaadda dhabta ah si aad u turjunto ku sale dhaarti aad gashay;

6. Dhaqan-gelinta mas'uuliyadaha la xidhiidha tarjumaadda ee lagu qeexay hab-raacyada kale maxkamaddu soo saarto;

24. MAS'UULIYADDA IYO WAAJIBAADKA SARKAALKA ANSHAXA CHILOOTKA IYO BOOLIISKA

1. Ilaalinta iyo sugidda nidamka anshaxa chilootka, islamarkaana marka uu arko in lagu xadgudbay nidamka anshaxa ee chilootka waa in uu ogeysiiyo garsooraha fadhiga;
2. Baadhista dhammaan dadka soo galaya chilootka marka laga reebo garsooraha;
3. Sii galinta chilootka macaamiisha Inta ayna garsooreyaashu soo galin fadhiga ka hor;
4. Usharraxidda macaamiisha chilootka, fadhiga iyo magacda garsooraha/garsooreyaasha, sido kale sharraxaad kooban oo ku saabsan nidaamka anshaxa chilootka in laga siiyo dhagaystayaasha fadhiga, islamarkaana la ogaysiinayo in ay damiyaan telefoonada iyo elektiroonigyada u cod eg;
5. U hogaansamidda iyo dhaqan gelinta amarada garsooraha;
6. Ixtiraamidda dadka macaamisha, dhinacyada, maragyada iyo cid kasta oo kasoo qaybgasha chilootka;
7. Iyadoo aan amar laga haysan chilootka, inta uu socdo dhegaysiga fadhigu in la dhex galo oo la hadlo ama dhaqdhaqaad samaynta si geeddisocodka chilootka loo carqaladeeyo ama loo qalalaaseeyo;
8. Haddii ayna lagamamaarmaan u ahayn hawlaha geeddisocodka chilootka, garsooraha, dhinacyada is haya, maragyada ama cid kalaba lalama sheekaysan karo iyadoo ay dooddu socoto;
9. Marka la akhriyayo amarada ama go'aanada in si fiican ay u dhagaystan islamarkaana siday u dhaqan-gelin lahayen in kaalintooda ay ka gaystan;
10. Marka garsoorayaasha lagumeeleyay fadhi chilootku ay dhammeeyan geeddisocodla dhegaysiga kadib xaga xafiiskoda ay aadayaan in la siiyo ixtiraamka ay mudan yihiin.
11. Soo gudbinta dukumentiyada loo baahan yahay in garsooraha loo keeno marka uu garsooruhu ogolaado;
12. Xaqiijinta anshaxa iyo amniga chilootka;

25. ILAALADA AMNIGA CHILOOTKA

1. Macmiil kasta ama cid kasta oo ka baxsan garsooraha ee soo galaya maxkamadda ama qolka chilootka waxa uu waajib ka saaranyahay in maro baadhitanka amniga;
2. Macmiil kasta ama cid kasta oo ay ka mid yihiin xirfadleyaasha sharciga waxaa ka mamnuuc ah in ay la yimaadaan maxkamadda ama chilootka; ul, daab ama qalab ama hub;
3. Iyadoo ay jirto arrimaha aan kor ku xusnay, haddana ciidamada Booliska iyo Asluubta way lagali karan hubka ay wataan ee sharciga ah, islamarkaana loo siiyay si ay maxaabiista ugu galbiyaan. Hase ahaatee, looma ogola inay hubkan la galaan qolka chilootka;

26. NIDAAMKA DHAMAYSTIRKA CHILOOTKA

1. Marka garsooraha ama garsoorayaal ka badan hal garsoore ay dhammeeyaan, dhagaysiga chilootka waa in uu garsooraha ama fadhi-gudoonka chilootku uu u mahadceliyo dadka ku sugan fadhiga, isagoo miiska ku dhufanaya dubaha, islamarkaana u sheegaya in udhammaaday dhageysiga.
2. Dhammaadka dhageysiga, anshax ilaaliyaha chilootku ama booliisku waa in ay garsooraha ama garsooreyaasha utaagan astaanta salaan, islamarkaana ay galbiyaan garsoorayaasha iyo dadka jooga chilootka;

QAYBTA SHANAAD

QODOBBO KALA DUWAN

27. TALAABOOYINKA CHILOOTKU QAADAYSO

1. Ujeeddada talaabo qaadka iyo ciqaabtu waa in ay tahay mid qofka uhorseeda toosnaan uu kaga shaalaytoodo dambigi uu galay, islamarkaana si dadka kalena ay wax uga bartaan, sido kalena ay udhawrsanaato sharafta iyo haybadda maxkamaddu.
2. Qof kasta oo ku xad-gudba nidaamka anshaxa chilootka waxa uu garsooraha fadhichilootku si degdeg ah ugu qaadi karaa tallaabooyinkan soo socda, isaga oo eegaya habka uu fal dambiyeedka ugaystay iyo sababta ka dambaysa falka ugaystay, sido kale fahamka iyo garashada uu qofku uleeyahay sharciga;
    a. Digniin;
    b. Muddo kooban oo laga mamnuuco soo galista chilootka;
    c. Ka saarista qolka fadhi-chilootka ama
    d. Hab waafaqsan xeerka ciqaabta iyo sharciyada kale ee ku salaysan ciqaabta fal dambiyeedyada ku xad-gudubka nidamka anshaxa chilootka, shiqaaqo samayn iyo rabshada abuurista in si degdeg ah loogu xukumo.
3. Shaqaalaha maamulka maxkamadda iyo xubnaha magacaabista guddiga maamulku ay ku xadgudbaan habraaca chilootka, kama reebayso mas'uuliyadi maamul go'aanka garsooraha ee ku xusan faqrada 2aad ee qodobkan

28. MAS'UULIYADDA GARSOORAHA

1. Garsooruhu wuxuu ka mas'uul yahay fulinta iyo dhaqan gelinta awaamiirtan.
2. Garsooruhu haddii uu ku xad-gudbo qodobada awaamiirtan, wuxuu mutaysanaya ganaax fal dambiyeed oo waafaqsan sida uu dhigayo xeerka anshaxa iyo hab-dhaqanka garsoorka ee Dawladda Deegaanka Soomaalida ee tirsigiisu yahay 1/2013 T.I.

29. MAS'UULIYADDA HAY'ADEED EE MAXKAMADDA

Mas'uuliyadda hay'adeed ee ku salaysan awaamiirtan, maxkamad kasta waxaa looga baahan yahay oo la filayaa in iyadoo ka duulaysa hadba xaaladda iyo awoodda miisaaniyadeed ay fulliso haddana;

1. Waa in wacyigalino ku saabsan awaamiirtan ay kasiiso bulshada, iyadoo adeegsanaysa warbaahinada kala duwan ee sida; muuq-baahiyaha, iyo ogaysiisyada qoraalka ah;
2. Waa in maxkamaduhu ay si dhamaystiran u qalabeeyan fadhi chilootyada;
3. Waa in dhammaan magacda Waaxaha adeeg-bixinta garsoorka, xafisyada garsooreyasha iyo magacda fadhi chilootyada si cad loogu shaaciyo macaamiisha;
4. Waa in maxkamaduhu ay xoojiyaan adeega miiska xogta;
5. Waa in maxkamaduhu ay fulliyaan waajibaadka iyo mas'uuliyadaha hay'adeed ee ku cad habraacyada maamulka geeddisocodka kiisaska;
6. Waa in maxkamaduhu ay sameeyan goob amni oo loogu talo-galay in lagu keydiyo hantiyaha waaweyn iyo hubka, sidoo kalena ay u dejiyaan habraac;

30. QODOBADA KU MEEL GAADHKA AH

Awaamirtani waxa ay dhaqan-galaysaa saddex bilood gudahood laga bilaabo **___/6/2015 T.I**. kadib marka uu ansixiyo guddoomiyaha maxkamadda guud ee Dawladda Deegaanka Soomaalidu.

31. WAX KA BEDDELKA AWAAMIIRTA

Maxkamadda guud ee Dawladda Deegaanka soomaalidu waxay wax ka baddeli kartaa awaamiirtan haddii ay u aragto lagamma-maarmaan.

32. MUDDADA DHAN-GALKA AWAAMIIRTA

Waxay dhaqan-galaysaa marka uu ansixiyo guddoomiyaha maxkamadda guud ee Dawladda Deegaanka Soomaalidu laga bilaabo **___/6/2015 T.I** saddex bilood gudahood.

CALI SHEEKH AXMAD

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GUUD *EE DDS*